



“WAXAAN KU NOOLNAHAY CABSI JOOGTA AH”

XADGUDUBYADA IYO TACADDIYADA LAGU HAYO XORIYADDA
HADALKA EE SOOMAALIYA

Amnesty International waa dhaq-dhaqaaq caalami ah oo ka kooban in ka badan 7 milyan oo qof, kuwaasoo u ololeeya duni xuquuqda aadanaha ay helaan dadka oo dhan.

Aragtideenu waa in qof kasta uu helo dhammaan xuquuqda ku xusan Bayaanka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo heerarka xuquuqul insaanka caalamiga ah.

Waxaan nahay urur ka madax bannaan dowladaha, fikirrada siyaasadeed, danaha dhaqaale ama diimeed, waxaana dhaqaalaha ka helnaa xubnaheena iyo tabarucaadda dadweynaha.

© Amnesty International 2020

Macluumaadka dukumintigaan waxa xeeriya ruqsadda Creative Commons, marka laga reebo meelaha lagu sheegay inaanay ruqsaddaasi qaban (ruqsadda ayaa dhigaysa; xigasho, inaan la iibin karin, waxba laga bedeli karin, caalami ah 4.0)

<https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/4.0/legalcode>

Si aad xog dheeraad ah u hesho, fadlan booqo boggeena oggolaanshiyaha: www.amnesty.org

Marka macluumaadka loo tiiryo qof leh xuquuqda xogta oo aan ahayn Amnesty International, macluumaadkaasi uma hogaansana ruqsadda Creative Commons.

Waxaa ugu horreyn la daabacay 2020

Amnesty International Ltd

Peter Benenson House, 1 Easton Street
London WC1X 0DW, UK

Tusmo: AFR 52/1442/2020

Luuqadda Asalka ah: English

amnesty.org



Sawirka Kore: Weriyaal Soomaali ah oo loo diiday inay sawirro ka qaataan goob Muqdisho ka tirsan oo ay Al-Shabaab weeerarreen Janaayo 2020. © Gaar ah

AMNESTY
INTERNATIONAL 

TUSMO

1. SOO KOOBID GUUD	6
2. QAABKA BAARITAANKA	9
3. MACLUUMAAD DHEERAAD AH	11
COLAADDA IYO DHIBAATADA GAARTA RAYIDKA	11
ADEEGSIGA WARBAAHINTA IYO BARAHA BULSHADA	12
LA MACAAMILKA WARBAAHINTA IYO WERIYAYAASHA	12
XIISADDA SIYAASADEED EE SARE U KACDAY 2018 IYO 2019	13
4. HANNAANKA SHARCI EE CAALAMKA IYO KAN GOBOLKA	15
HANNAANKA SHARCI EE DALKA	17
5. DILALKA IYO ISKU-DAYGA DIL EE WERIYAYAASHA	19
ISKU-DAY DIL	22
6. WEERARRADA MUUQDA, XARIGA WERIYAYAASHA IYO WEERARRIDA XARUMAHA WARBAAHINTA	24
WEERARRADA MUUQDA	25
XARIGA WERIYAYAASHA	27
WEERARRIDA XARUMAHA WARBAAHINTA	30
7. WERIYAYAASHA DIBEDDA U CARARAY HANJABAAD AWGEED	33
8. XAYIRAADDA HELITAANKA XOGTA	37
9. FAAFREEBIDDA KU TIMAADA LAALUUSHKA IYO HANJABAADDA	39
10. HANDADAADA ONLINE-KA IYO MARIN-HABAABINTA BARAHA BULSHADA	42
MARIN HABAABINTA XOGTA FACEBOOK	45
11. TALOYINKA	48
KU AADDAN MADAXWEYNAHA SOOMAALIYA:	48
KU AADDAN RA'IISAL WASAARAHNA SOOMAALIYA:	48
KU AADDAN BAARLAMAANKA SOOMAALIYA:	49

KU AADDAN WASIIRKA AMNIGA:	49
KU AADDAN WASIIRKA CADAALADDA :	49
KU AADDAN WASIIRKA WARFAAFINTA:	49
KU ADDAAN WASAARADDA HAWEENKA & HORMARINTA XUQUUQDA AADANAHA:	49
KU AADDAN BEESHA CAALAMKA, GAAR AHAAN QARAMADA MIDOOBAY, MIDOWGA YURUB IYO MIDOWGA AFRIKA:	50
KU AADDAN FACEBOOK:	50

ERAY BIXIN

ERAY	TILMAANTA
AMISOM	Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya
BRA	Maamulka Gobolka Banaadir
CGTN	Telefishinka Caalamiga ah ee Shiinaha
CID	Waaxda Dembi Baarista
CPJ	Golaha Difaacidda Weriyayaasha
FESOJ	Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed
FGS	Federal Government of Somalia Dowladda Federaalka ee Soomaaliya
IED	Walxaha qarxa ee la farsameeyay
NISA	Hay'ada Sirdoonka iyo Nabadsugida Qaranka
SJS	Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed
GDP	Wax soo saarka Dalka

1. SOO KOOBID GUUD

Soomaaliya kama aysan jirin dowlad si wanaagsan u shaqeysa tan iyo 1991, waxaana arintaasi ay keentay in dalku noqdo meelaha caalamka ugu horreeya xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo xaaladaha bani'aadannimo. Doorashadii Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi "Farmaajo" ee Febraayo 2017, ayaa soo bandhigtay fursad muhiim ah oo uu maamulka cusub wax uga qaban karay isagoo gacan ka helaya caalamka caqabadaha dhanka xuquuqda aadanaha ee dalka ka jira, gaar ahaan ixtiraamidda, ilaalinta iyo hormarinta xoriyadda hadalka iyo tan madax bannaanida warbaahinta. Taa bedalkeeda, dowladda ayaa adeegsatay qaabab ay si adag ugu xakamayneyso madax bannaanida saxaafadda iyo guud ahaan xuquuqda xoriyadda hadalka.

Tan iyo dhammaadkii 2017, madax bannaanida warbaahinta Soomaaliya ayaa waxaa caqabad ku ahaa saraakiisha iyo laamaha ammaanka ee dowladda Federaalka, maamul goboleedyada iyo ururka Al-Shabaab.

Warbixintan waxaa lagu diiwaangeliyay eedeymo ah hanjabaad, handadaad iyo cagajugleyn lagula kacay warbaahinta, gaar ahaan weerarrada muuqda, dilalka, isku-day dilal lala beegsaday weriyayaal, xarig aan loo meeldeyin, cagajugleyn lagula kacay weriyayaasha iyo dadka dowladda dhaliilsan, xayiraadda helitaanka xogta ee ka dhacay Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya tan iyo 2018 iyo xaaladaha qaar laga soo billaabo 2017, kuwaasoo ay geysteen dowladda iyo Al-Shabaab. Waxaa intaa dheer in warbixinta ay diiwaangelisay qaababka cusub ee ay dowladda u laaluushto warbaahinta si ay u faafreebaan wararkooda, waxaana kamid ah handadaad dhanka online-ka ah, cagajugleyn iyo marin-habaabinta wararka baraha bulshada la isugu gudbiyo. Sidoo kale waxaa warbixintu ay ka hadlaysaa kiisas dhowr ah oo ka dhacay Puntland kuwaasoo khuseeya qaar kamid ah xadgudubyada iyo tacaddiyada lagu xusay warbixinta.

Warbixinta waxaa lagu saleeyay waraysiyo lala yeeshay in ka badan 70 qof oo 55 kamid ah ay yihiin weriyayaal, shakhsiyaad u doodad warbaahinta, wakiillo ka socda ururada suxufiyiinta, agaasimayayaal warbaahinta ah, tifaftirayaal, qareenno, siyaasiyiin mucaarad ah, ururada rayidka ah, xubno ka tirsan hay'adaha caalamiga ah, shaqaalaha Facebook iyo mas'uuliyiin katirsan dowladda. Sidoo kale, waxaa warbixinta lagu saleeyay qiimeyn ku aaddan dukumiintiyo kala duwan oo ay kamid yihiin kuwa xukunka maxkamadaha, shuruucda qaranka, warbixinno lagu daabacay warbaahinta Soomaalida iyo tan caalamka iyo sidoo kale qoraallo la soo dhigay Facebook, Twitter iyo baraha kale ee internet-ka, faallooyin cilmiyeysan, warbixinno ay qoreen hay'adaha aan dowliga ahayn iyo ururada caalamiga ah iyo sidoo kale caddeymo sawirro iyo muuqaal ah.

Sanadkii shanaad oo xiriir ah, Soomaaliya ayaa kaalinta koobaad ka gashay liiska hay'adda CPJ ee Isla Xisaabtan La'aanta, kaasoo looga hadlo dalalka aan cadaaladda la soo taagin kuwa dila weriyayaasha. Dowladda Soomaaliya ayaan inta badan baaritaan ku samayn dilalka iyo weerarrada loo geysto weriyayaasha, xarumaha warbaahinta iyo dadka siyaasadaheeda dhaliilsan. Tan iyo 2017 markii uu xilka la wareegay Madaxweyne Farmaajo, ugu yaraan sideed weriye ayaa lagu dilay Soomaaliya, gaar ahaan Koonfurta, Bartamaha iyo Puntland. Afar kamid ah weriyayaashaasi ayaa la dilay 2018, halka laba kalena la dilay 2019. Weriye kale ayaa ka badbaaday isku-day dil, inkastoo uu soo gaaray dhaawac xooggan, kadib markii walxaha qarxa loogu xiray gaarigiisa. Marka laga raabo laba kiis oo uu kamid yahay mid ni askari boolis ah oo 2018 Muqdisho ku dilay weriye ay maxkamadi xukun ku ridday isagoo maqan, ma jirto cid kale oo lagula xisaabtamay dilalka iyo beegsiga loo geystay weriyayaasha kale. Ninkaasi booliska ah ayaan weli la soo qaban.

Guud ahaan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, laamaha ammaanka gaar ahaan booliska, milateriga iyo saraakiil dowladda ah ayaa sanadihii 2018 iyo 2019 waxa ay weerarro, garaac iyo xarig aan loo meeldeyin kula kaceen weriyayaasha. Inta badan weriyayaasha ayaa la beegsaday xilli ay ku gudajireen hawlahooda war tebinaya ee arimaha qaranka, iyagoo ku sugan goobaha ay ka dhaceen weerarrada Al-Shabaab, xilli ay tebinayeen dibedbaxyo ka dhan ah siyaasadaha dowladda ama iyagoo maraya baraha koontaroolada ee Muqdisho. Laamaha ammaanka ee Muqdisho iyo Puntland ayaa sidoo kale u dhacay, si kumeelgaar ahna u xiray xarumo warbaahineed si ay uga hortagaan tebinaya warar aanay jeclaysan, ay lacag baad ah uga qaataan milkiilayaasha warbaahinta ama iyagoo aargoosi ahaan u socda.

Weriyaasha Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa u sheegay Amnesty International in saraakiil sare oo ka tirsan dowladda ayna kamid yihiin kuwa ammaanka ay u diiddeen xog ku aaddan arimo khuseeya danaha shacabka ama ay ka horjoogsadeen waraysiyada iyo gelitaanka xarumaha dowladda sida baarlamaanka, xafladaha waaweyn ama goobaha ay ka dhaceen weerarrada Al-Shabaab. Qaar kamid ah weriyayaasha ayaa sheegay in laamaha ammaanka ay ka hor istaageen inay muuqaallo duubtaan ama sawirro qaadaan xitaa marka ay gudaha u galaan xarumaha dowladda ama goobaha ay ka dhaceen weerarrada Al-Shabaab.

Dhowr weriye, dad u ololeeya madax bannaanida warbaahinta, saraakiil sare oo dowladda ka tirsan, agaasime hore oo xarun warbaahineed, hogaamiyayaal bulshada rayidka ah, madaxda mucaaradka iyo shaqaale hore oo dowladda ka tirsanaa ayaa u sheegay Amnesty International in mudadii u dhexaysay dabayaaqadii 2017 illaa horraantii 2019 in mas'uuliyiin ka tirsan xafiiska madaxtooyada ay lacago laaluush ah siinayeen milkiilayaasha iyo agaasimayaasha warbaahinta caanka ah iyo weliba shakhsiyaadka saamaynta ku leh baraha bulshada ee ku nool gudaha iyo dibedda dalka si loo tebiyo wanaagga dowladda. Weriyayaasha ayaa u sheegay Amnesty International in laaluushka la siiyo madaxdooda uu saameyn ballaaran ku yeeshay shaqadooda taasoo keentay inay si madax bannaan u tebin waayaan arimaha xasaasiga ah ee aanay ku farxayn dowladdu.

Mawduucyada ay adag tahay in weriyayaasha ay si madax bannaan uga warramaan iyadoo aanay dowladdu ka aargoosaneyn ayaa waxaa kamid ah wararka ku aaddan weerarrada Al-Shabaab ee caasimadda iyo guud ahaan arimaha ammaanka, wararka ku saabsan gaabiska dhanka siyaasadaha dowladda, gaar ahaan kuwa khuseeya xafiisyada Madaxweynaha iyo Ra'iisal wasaaraha, ka warramida ama baahinta wararka xubnaha mucaaradka iyo weliba musuq-maasuqa iyo xuquuqda aadanaha.

Faafreebka jira iyo weliba isku dhex-milanka warbaahinta iyo dowladda ayaa ku qasbay weriyayaasha iyo shakhsiyaad kale oo Soomaaliya ku nool inay adeegsadaan baraha ay bulshadu kuwada xiriirto si ay u gudbiyaan fekerkooda iyo dhaliisha ay tilmaamayaan. Balse dowladda Soomaaliya ayaa si dhaw isha ugu haysa doodaha ka socda baraha bulshada. Dowladda ayaa la sheegay inay samaysay koox ula socota arimaha ka taagan baraha bulshada, si gaar ahna uga warrama waxyaabaha dowladda lagu dhaliilayo. Mas'uuliyiinta dowladda ayaa weriyayaasha iyo dadka siyaasadahooda dhaliilsan oo ay kamid yihiin xubnaha mucaaradka ugu hanjabo online-ka, gaar ahaan baraha bulshada. Cinwaannada Facebook ay ku leeyihiin 16 qof oo 13 kamid ah ay weriyayaal yihiin ayaa si buuxda hawada looga saaray ama la tirtiray sanadihii 2018 iyo 2019. Dhammaan dadka laga xiray cinwaannada Facebook ayaa u sheegay Amnesty International in horay ay u qoreen waxyaabo ay dowladda ku dhaliilayaan. Sidoo kale waxaa jira isku-day lagu jabsanayay cinwaannada Facebook ee shan weriye, halka cinwaannada afar suxufi oo kale lala wareegay labadii sano ee la soo dhaafay.

Qaar kamid ah weriyayaasha ayaa u adkeysan waayay cadaadiska iyo hanjabaadaha uga imanaya dowladda iyo Al-Shabaab, waxaana ay goosteen inay dalka ka cararaan ayna magangelyo weydiistaan dalal kale. Amnesty International ayaa diiwaangelisay ugu yaraan sideed weriye oo ka cararay Soomaaliya tan iyo Oktoobar 2018. Todobo kamid ah weriyayaashaasi ayaa u sheegay Amnesty International inay dalka uga soo carareen hanjabaadaha ku yimid hawshooda saxaafadeed. Laba kamid ah suxufiyiintaasi oo lagu magacaabo Munasar Maxamed Cabdi and Zakariye Maxamuud Timacade ayaa hadda raadinaya magangelyo ay siiso dowladda Sweden, weriye kale ayaa ku sugan Turkiga halka shanta kale ay joogaan deegaanno aan la sheegi karin ammaankooda awgii.

Sanadihii 2018 iyo 2019, Soomaaliya waxay gashay xilli kale oo ay sare u kaceen xasillooni darrada iyo khilaafka siyaasadeed, kuwaasoo wiiqay isbedelka aadka loogu baahan yahay ee dhinaca xuquuqda aadanaha iyo cadaaladda. Dowladda Federaalka, maamul goboleedyada iyo weliba xubnaha beesha

caalamka ayaa xoogga saaray hannaanka doorashooyinka maamul goboleedyada gaar ahaan Koonfur Galbeed, Puntland, Jubaland iyo Galmudug iyo la dagaallanka Al-Shabaab. Dowladda Soomaaliya ayaa caburinta ay ku hayso dadka dhaliilsan waxa ay xitaa gaarsiisay beesha caalamka. Janaayo 2019, markii ugu horreysay taariikhda Soomaaliya, ayaa dowladda waxay dalka ka cayrisay wakiilka gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Haysom, kadib markii uu walaac ka muujiyay dibedbaxayaal lagu dilay magaalada Baydhabo, mudaharaadkaasi oo daba socday doorashada muranka dhalisay ee madaxtinnimada Koonfur Galbeed. Kadib markii la eryay wakiilka ayaa Qaramada Midoobay waxa ay hakisay warbixinnada bil kasta ay ka diyaarin jirtay xaaladda xuquuqda aadanaha ee dalka.

Mas'uuliyiinta Soomaaliya ayaa inta badan qiil ka dhigta walaac dhanka ammaanka qaranka ah iyo dagaalka lagula jiro Al-Shabaab si ay u xakameeyaan xuquuqda xoriyadda hadalka iyo helitaanka xogta. Sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ayaa dhigaya in xakameynta xuquuqda xoriyadda hadalka la oggolaan karo oo keliya haddii ay ku qeexan tahay sharciga ayna lagama maarmaan u tahay bulshada dimuqraadiga ah, gaar ahaan danaha ammaanka qaranka ama badqabka dadweynaha, kala dambeynta, ilaalinta caafimaadka dadweynaha ama qiyamkooda, ama ilaalinta xuquuqda iyo xoriyadda dadka kale. Sidaa awgeed, helitaanka xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka ayaa u baahan in loo tixgeliyo sharciga. Xaqa xoriyadda hadalka ayaa khuseeya dhammaan macluumaadka iyo fikradaha oo ay ku jiraan kuwa loo arkayo inay meel ka dhac yihiin. In laga difaaco dowladda weji gabax ama laga baaqsado soo bandhigidda khaladaadkeeda ama in la shaaciyiyo xogta sida ay u shaqeeyaan hay'adaheeda ayaan noqon karin sabab sharci ah oo lagu xakameeyo xoriyadda hadalka.

Xayiraad kasta oo ku salaysan ammaanka qaranka ama kala dambeynta waa inay ixtiraanto dowlada warbaahinta ee ah in si dhab ah loo xaqiijiyo xoriyadda hadalka; tusaale ahaan, ma aha in warbaahinta laga horjoogsado baahinta xog ku saabsan ama uu bixiyay urur ama koox loo arko inay khatar ku yihiin ammaanka qaranka ama arimaha la xiriira. Dalku ma aha inuu diiddo helitaanka xogta ku aaddan arimaha ammaanka qaranka, balse waxaa u furan inuu ilaaliyo qeyb kooban oo kamid ah xogtaasi si uu u difaaco danaha ammaanka qaran ee saxda ah.

Hanjabaadaha iyo cagajugleynta lagu hayo warbaahinta madaxa bannaan iyo in aan baaritaan lagu samayn xadgudubyada noocaasi ah ayaa sii kordhaya xilli ay soo dhaw yihiin doorashooyinka qaran. Iyadoo la filayo in dalka ay doorashooyin ka dhacaan dabayaaqada 2020 iyo horraanta 2021, ayaa waxaa dowladda looga baahan yahay inay inay ixtiraamto, ilaaliso ayna hormariso xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta iyo xaqiijinta in saraakiisha dowladda ama kuwa ammaanka aanay caburin weriyayaasha ama aysan ka hor joogsan helitaanka xogta. Dowladda waxaa sidoo kale looga fadhiiyaa inay si buuxda, dhexdhexaad ah oo wax ku ool ah ay u baarto tacaddiyada la sheegay, gaar ahaan weerarrada muuqda, dilalka, isku-dayga dil, xariga aan loo meeldeyin iyo cagajugleynta loo geysto weriyayaasha iyo eedeymaha ku saabsan handadaada online-ka iyo marin-habaabinta wararka baraha bulshada. Waa in sidoo kale ay dowladda damaanad qaado ammaanka dhammaan weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta.

Ka hor doorashada, xubnaha beesha caalamka ee taageera Soomaaliya ayaa waxaa looga baahan yahay inay gacan siiyaan dedaallada lagu wanaajinayo badqabka weriyayaasha iyo inay ku dhiirageliyaan dowladda Soomaaliya joojinta xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha iyo weerarrada lagu beegsado madax bannaanida warbaahinta. Waa in sidoo kale ay kula taliyaan dowladda inay samayso baaritaanno madax bannaan, hufan oo wax ku ool ah si looga sal gaaro dhammaan eedeymaha ku aaddan tacaddiyada, gaar ahaan weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha iyo xirfadlayaasha saxaafadda.

Waxaa looga baahan yahay ururka Al-Shabaab inuu joojiyo weerarrada ka dhanka ah shacabka Soomaaliya, gaar ahaan weriyayaasha iyo dhammaan xadgudubyada ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kan bani'aadannimada.

2. QAABKA BAARITAANKA

Warbixintan waxaa lagu saleeyay cilmi-baaris ay Amnesty International ku samaysay magaalada Muqdisho bishii July 2019, iyo meelo kale intii u dhexaysay Agoosto 2019 iyo Janaayo 2020.

Cilmi-baarayaasha Amnesty International ayaa waraystay in ka badan 70 qof oo 55 kamid ah ay yihiin weriyayaal, shakhsiyaad u doodad warbaahinta, wakiillo ka socda ururada suxufiyiinta, agaasimayayaal warbaahinta ah, tifaftirayaal, qareenno, siyaasiyiin mucaarad ah, ururada rayidka ah, difaacayaasha xuquuqda aadanaha, xubno ka tirsan hay'adaha caalamiga ah, shaqaalaha Facebook iyo mas'uuliyiin katirsan dowladda. Sidoo kale, waxaa warbixinta lagu saleeyay qiimeyn ku aaddan dukumiintiyo kala duwan oo ay kamid yihiin kuwa xukunka maxkamadaha, shuruucda qaranka, warbixinno lagu daabacay warbaahinta Soomaalida iyo tan caalamka iyo sidoo kale qoraallo la soo dhigay Facebook, Twitter iyo baraha kale ee internet-ka, faallooyin cilmiyeysan, warbixinno ay qoreen hay'adaha aan dowliga ahayn iyo ururada caalamiga ah iyo sidoo kale caddeymo sawirro iyo muuqaal ah.

Amnesty International ayaa waraysatay weriyayaal ka soo jeeda Muqdisho, Afgooye, Garowe, Jowhar, Dhusamareeb, Galkayo, Bosaaso iyo Kismaayo. Dhowr qof oo ay kamid yihiin weriyayaal loo waraystay warbixintan ayaa xilligaasi ku sugnaa dibedda dalka, waxaana isgaarsiinta lagula xiriiray iyadoo ku kala sugan Kenya, Uganda, Itoobiya, Sweden, UK, Maraykanka iyo Turkey. Weriyayaasha loo waraystay warbixintan ayaa isugu jira kuwo usoo shaqeeyay warbaahinta dowladda iyo tan gaarka loo leeyahay, inkastoo ay u badan yihiin suxufiyiinta u shaqeeyay warbaahinta gaarka loo leeyahay.

Waraysiyada waxaa lagu qaaday luuqadaha Soomaaliga iyo Ingiriiska, iyadoo weriyayaasha qaar si toos ah loogula kulmay Muqdisho iyo Nairobi, halka kuwa kalena lagula xiriiray telefoon aan la dhegaysan karin ama email.

Caddeymaha ay bixiyeen dadka la waraystay ayaa waxaa dheer in warbixinta lagu saleeyay qiimeyn ku aaddan dukumiintiyo kala duwan oo ay kamid yihiin kuwa xukunka maxkamadaha, shuruucda qaranka, warbixinno lagu daabacay warbaahinta Soomaalida iyo tan caalamka iyo sidoo kale qoraallo la soo dhigay Facebook, Twitter iyo baraha kale ee internet-ka, faallooyin cilmiyeysan, warbixinno ay qoreen hay'adaha aan dowliga ahayn iyo ururada caalamiga ah iyo sidoo kale caddeymo sawirro iyo muuqaal ah. Waxaan sidoo kale qiimeyn ku samaynay caddeymo muuqaallo iyo sawirro ah oo aan ka helnay dadka noo warramay.

Amnesty International ayaa ku wargelisay dhammaan dadka ay waraysatay qaabka iyo ujeedada laga leeyahay cilmi-baarista iyo weliba sida loo adeegsanayo macluumaadka ay bixiyeen. Waxaan mid kasta ka helnay oggolaansho hadal ah markii aan billaabaynay waraysiga. Dadka la waraystay ayaa sidoo kale loo sheegay ka hor iyo kadib marka la waraystay inay khiyaar u leeyihiin in magacooda aan lagu darin warbixinta. Ma jirin wax lacag ah ama sasabasho kale oo la siiyay dadka la waraystay si ay u sheegaan waxa ku dhacay ama looga helo xogta. Shakhsiyaadka ayaa loo sheegay in xilli kasta ay codsan karaan in la joojiyo waraysiga, ayna leeyihiin go'aanka ah inay ka jawaabaan su'aasha ay doonaan.

Dadka Soomaalida ah ee lagu waraystay warbixinta ayaa waxaa marka koobaad loogu yeerayaa magacooda oo dhamaystiran, kadibna waxaa qeybaha kale ee warbixinta loogu yeerayaa magacooda koobaad ama isagoo dhamaystiran si waafaqsan hab-dhaqanka sheegidda magacyada Soomaalida. Waxaa caadi ah in Soomaalida, gaar ahaan weriyayaasha ay leeyihiin naaneys inta badan magac ahaan loogu yaqaano; naaneystaasi waxaa la adeegsaday haddii ay caan ku yihiin ama ay si cad ugu sheegeen Amnesty International in sidaa loogu yeero. Macluumaadka sida gaarka ah loogu aqoonsan karo dadka u warramay

warbixintan ayaa meesha laga saaray si heybtooda loo ilaaliyo, loogana hortaggo aargoosi lagula kici karo. Shakhsiyaadka ku xusan warbixinta ayaa loogu yeeray magacyadooda dhabta ah, waa haddii arinta ay qeexeen tahay mid horay loo daabacay oo si weyn ay u baahisay warbaahinta iyo marka ay weriyayaashu qudhooda dalbadaan in la magacaabo.

Warbixintan waxaa diiradda lagu saaray hanjabaadaha, handadaadda iyo cagajugleynta ay kamid tahay tan loo adeegsado online-ka, weerarrada sida dilalka, isku-day dilal lala beegsaday weriyayaal oo ka dhacay Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya tan iyo 2018 kuwaasoo ay geysteen dowladda iyo Al-Shabaab. Sidoo kale waxaa warbixintu ay ka hadlaysaa kiisas dhowr ah oo dhacay 2017 si loo qeexo qaar kamid ah xadgudubyada dhacay tan iyo markii ay xukunka qabatay dowladda federaalka ee hadda jirta. Warbixinta ayaa sidoo kale lagu sheegay kiisas kooban oo ka dhacay Puntland. Warbixinta ma aha mid isku-dayday inay soo koobto dhammaan weerarrada ka dhanka ah xuquuqda xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta ee Soomaaliya, sidaa awgeed waxaa loo baahan yahay cilmi-baaris dheeraad ah oo diiradda lagu saaro xadgudubyada iyo tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha iyo madax bannaanida warbaahinta gaar ahaan Puntland.

13-kii Nofembar 2019, Amnesty International ayaa warqad ay uga hadleyso waxyaabaha ay ku ogaatay baaritaanka u dirtay Facebook, waxaana ay ka codsatay in shirkaddaasi ay ka jawaabto su'aalo ku aaddan xiritaanka cinwaanno ay leeyihiin weriyayaal iyo dad dhaliilsan dowladda oo ay shirkaddu hawada ka saartay. Facebook ayaa 3-dii Disembar 2019 si rasmi ah uga jawaabay qaar kamid ah su'aalaha aan weydiinay iyo walaaca aan muujinay. Faahfaahinta jawaabaha Facebook ayaa waxa ay ku jiraan qeybaha ay warbixinta ka khuseeyaan.

23-kii Janaayo 2020, Amnesty International ayaa warqad u dirtay Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiiska Soomaaliya, Wasaaradda Amniga Gudaha, Xafiiska Warfaafinta ee Madaxtooyada iyo Wasiirka Warfaafinta Puntland, waxaana ay ka codsatay inay uga jawaabaan su'aalo ku salaysan waxyaabaha lagu ogaaday baaritaanka.

Xafiiska Warfaafinta ee Madaxtooyada Soomaaliya iyo Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) ayaa 3-dii iyo 9-kii Febraayo 2020 si rasmi ah uga soo jawaabay su'aalaha aan weydiinay. Faahfaahinta jawaabahaasi ayaa waxa ay ku jiraan qeybaha ay warbixinta ka khuseeyaan.

Xilliga la qoray warbixintan, Amnesty International wax jawaab ah kama aysan helin hay'adaha iyo mas'uuliyiinta kale ee dowladda ee warqadaha loo diray.

3. MACLUUMAAD DHEERAAD AH

COLAADDA IYO DHIBAATADA GAARTA RAYIDKA

Soomaaliya waxaa ka taagan mid kamid ah colaadaha ugu mudada dheer caalamka, dalkuna ma lahayn dowlad si buuxda uga hawlgasha tan iyo 1991.¹ Tobanaan sano oo colaad, abaar, macluul iyo xooggag hubaysan² oo si joogta ah u soo shaac baxay ayaa dalka ka dhigay mid ay ka dhacaan xaaladaha ugu adag ee bani'aadannimada iyo dhibaatooyinka xuquuqda aadanaha ee caalamka. Colaadda ayaa si xun u saamaysay dhaqaalaha waddanka. Inkastoo uu dhaqaalaha si tartiib ah uga soo kabanayo abaartii 2016/2017, ayaa haddana Soomaaliya waxa ay wajahaysaa caqabado dhaqaale oo sanado badan jiri kara. Sida uu sheegay Bangiga Adduunka, tirada dadweynaha ayaa si weyn uga kormaraysa dhaqaalaha dalka. Sidaa awgeed, faqriga ka jira dalka ayaa ah mid sarreeya oo gaarsiisan boqolkiiba 67.³

Bangiga Adduunka ayaa sidoo kale sheegay in caqabado ka taagan heerka noolasha, waxbarashada, caafimaadka, biyaha iyo fayadhowrka ay haystaan inta badan qoysaska Soomaalida. Tilmaamayaasha caafimaadka ee Soomaaliya ayaa kamid ah kuwa ugu liita caalamka. Helitaanka waxbarashada iyo natiijada tacliinta ayaa sidoo kale ah kuwo hooseeya. Colaad tobanaan sano socotay iyo kala qeybsanaanta dalka ayaa dhaliyay inay yaraadaan tirada macallimiinta xirfadda leh iyadoo ay liitaan dugsiyada dalka.⁴

Hawlgallada milateriga ee ay ciidamada Soomaaliya iyo kuwa shisheeye sida AMISOM iyo kuwa Maraykanka ku beegsadaan Al-Shabaab ayaa khasaaro weyn gaarsiya dadka rayidka ah.⁵ Dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda ayaa ku xadgudbay shuruuca caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo xuquuqda aadanaha.⁶ Dad rayid ah ayaa si aan kala sooc lahayn loogu laayay dagaallada ay ciidamada dowladda iyo xulafadooda ku qaadaan Al-Shabaab, iyo sidoo kale dagaal beeleedyo ka socda qeybo kamid ah dalka.⁷

¹ "Soomaaliya: Sheekada La Hilmaamay", Aljazeera, 2-dii Nofembar 2016,

<https://www.aljazeera.com/programmes/aljazeeraworld/2016/10/somalia-forgotten-story-161027115655140.html>.

² "Ururada Hubaysan ee Soomaaliya, Aljazeera", 6-dii Juun 2018, <https://www.aljazeera.com/indepth/interactive/2018/06/armed-groups-somalia-180604110516975.html>.

³ "Xogta Ugu Dambaysay Dhaqaalaha Soomaaliya" Bangiga Adduunka, Agoosto 2019, waxaa laga heli karaa <https://bit.ly/2R8ndSq>.

⁴ "Xogta Ugu Dambaysay Dhaqaalaha Soomaaliya" Bangiga Adduunka, Agoosto 2019, waxaa laga heli at <https://bit.ly/2R8ndSq>.

⁵ Amnesty International, "Dagaalka qarsoon ee uu Maraykanka ka wado Soomaaliya, Khasaaraha rayidka ka soo gaara duqeymaha ka dhaca Shabeellaha Hoose" 19-kii Maarso 2019, <https://www.amnestyusa.org/wp-content/uploads/2019/03/The-Hidden-U.S.-War-in-Somalia.pdf>.

⁶ Si aad waxbadan uga ogaato colaadda dabada dheeraatay ee Soomaaliya iyo xadgudubiyada ay dhinacyada dagaallamaya u geystaan shuruuca caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo xuquuqda aadanaha, eeg warbixinta Human Rights Watch ee Dagaal Adag, Nabad Adag: Tacaddiyada ay geystaan Al-Shabaab, Dowladda KMG ah ee Soomaaliya iyo AMISOM, 19-kii Abriil 2010, <https://www.hrw.org/report/2010/04/19/harshwar-harsh-peace/abuses-al-shabaab-transitional-federal-government-and-amisom>.

⁷ "Dagaal beeleedyo Soomaaliya ka dhacay oo ay 40 qof ku dhinteen laba maalin gudahood: Mas'uuliyiin", News24, 24-kii Oktobar 2018, <https://www.news24.com/Africa/News/somali-clan-clashes-kill-more-than-40-in-two-days-officials-20181024>. Sidoo kale eeg, "Ciidamada Soomaaliya oo Al-Shabaab ka qabsaday deegaanka Bariire" VOA, 19-kii Agoosto 2017, <https://www.voanews.com/africa/somalia-forces-capture-key-al-shabab-town-bariire>.

Ururka Al-Shabaab oo ah xulafada Al-Qaacida kan ugu awoodda badan Bariga Afrika,⁸ ayaa sii wada beegsiga dadka rayidka ah iyo goobahooda,⁹ isagoo adeegsanaya weerarro aan kala sooc lahayn, dilal qorsheysan oo ka dhan ah dadka uu la xiriirinayo dowladda iyo weliba weriyayaasha iyo shacabka kale.¹⁰ Ururka ayaa si qasab ah ku askareeya carruurta,¹¹ waxaana uu geystaa kufsi, jirdil iyo noocyada kale ee tacaddiyada xuquuqda aadanaha ah.¹²

ADEEGSIGA WARBAAHINTA IYO BARAHA BULSHADA

Inta uu socday dagaalka dabada dheeraaday ee Soomaaliya, warbaahinta ayaa ahayd qaab muhiim ah oo ay dhinacyada dagaallamaya shacabka ugu gudbiyaan dacaayadhooda. Al-Shabaab iyo dowladda Soomaaliya oo garab ka helaya hawl-wadaageeda caalamiga ah ayaa warbaahinta u adeegsada sheegashada waxay u arkaan guulaha milateri ee ay gaareen, jabka dhinaca kale, iyagoona dhanka kale marin-habaabin ku sameeya shacabka doonaya inay helaan xogta saxda ah, gaar ahaan khasaaraha ka dhashay dagaalka.¹³ Qaar badan oo kamid ah weriyayaasha Soomaaliya ayaa ku biira mihiinadda iyagoo da' yar oo aan qaadan tababar rasmi ah.¹⁴ Weriyayaal, dadka u ololeeya warbaahinta, khubaro caalami ah oo warbaahinta ku xeel-dheer ayaa u sheegay Amnesty International in qaar badan oo kamid ah suxufiyiinta ka hawlgalla Soomaaliya aysan lahayn xirfad weriyennimo, taasoo sii xoojinaysa khatarta ay weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta ku wajahayaan waddankaasi khatarta ah ee ay haraysay siyaasaddu.¹⁵

Sanadihii u dambeeyay waxaa Soomaaliya kusoo batay isticmaalka baraha bulshada. Qaar badan oo kamid ah qurba joogta Soomaalida ah iyo dhalinyarada ku nool magaalooyinka ayaa isticmaala internet-ka iyo baraha ay bulshada kuwada xiriirto. Facebook, YouTube iyo Twitter ayaa ah baraha ugu caansan ee Soomaalida gudaha iyo dibeddaba uga hadlaan arimaha siyaasadda, xaaladaha ka taagan dalka, diinta iyo heybtooda.¹⁶ Dowladda hadda jirta ee Madaxweyne Farmaajo ayaa si weyn ugu adeegsatay baraha bulshada si ay u maarayso doodaha qaran, isla markaana ay u hormariso siyaasadaha dowladda iyo ajandayaasheeda.¹⁷

LA MACAAMILKA WARBAAHINTA IYO WERIYAYAASHA

Dowladihii is xigay ee Soomaaliya ayaa ku xadgudbay xuquuqda weriyayaasha iyo madax bannaanida warbaahinta.¹⁸ 2019, waxaa sanadkii shanaad oo xiriir ah Soomaaliya ay kaalinta koobaad ka gashay liiska hay'adda CPJ ee Isla Xisaabtan La'aanta, kaasoo looga hadlo dalalka aan cadaaladda la soo taagin kuwa dila weriyayaasha.¹⁹ Dowladda Soomaaliya ayaan inta badan baaritaan ku samayn kiisaska dilalka iyo weerarada

⁸Al-Shabaab ayaa si rasmi ah u shaacisay 2012 inay xiriir la leeyahay Al-Qaacida, inkastoo ay wada shaqeyn hore ka dhexaysay.

⁹Mashruuca Ka Hortagga Xagjirmimada, Al-Shabab, <https://www.counterextremism.com/threat/al-shabab>

¹⁰OHCHR, Ilaalinta Rayidka: *Dhisidda Asaaska Nabadda, Ammaanka iyo Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya, Disembar 2017*, bogga.21, <https://www.ohchr.org/Documents/Countries/SO/ReportProtectionofCivilians.pdf>

¹¹Eeg: Human Rights Watch, Soomaaliya: Al-Shabab oo Dalbanaysa Carruur, 14-kii Janaayo 2018, <https://www.hrw.org/news/2018/01/14/somalia-al-shabab-demanding-children> iyo; Human Rights Watch, Meelna Uma Roona Carruurta: Askaraynta Carruurta, Guurka Qasabka ah, iyo Weerarrada Iskuullada Soomaaliya, 20-kii Febraayo 2012, <https://www.hrw.org/report/2012/02/20/no-place-children/child-recruitment-forced-marriage-and-attacks-schools-somalia#2fe00>.

¹²Eeg, Human Rights Watch, Dagaal Adag, Nabad Adag: Tacaddiyada ay geystaan Al-Shabaab, Dowladda KMG ah ee Soomaaliya iyo AMISOM, 19-kii Abriil 2010, <https://www.hrw.org/report/2010/04/19/harshwar-harsh-peace/abuses-al-shabaab-transitional-federal-government-and-amisom>.

¹³Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Disembar 2019. Si aad waxbadan uga ogaato adeegsiga warbaahinta ee Soomaaliya, fadlan eeg, Human Rights Watch, "Sida Kalluun Ku Jira Biyo Sumaysan", 2016, waxaa laga heli karaa: https://www.hrw.org/sites/default/files/report_pdf/somalia0516web_1.pdf.

¹⁴Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Disembar 2019

¹⁵Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Disembar 2019

¹⁶Eeg tusaale ahaan, Xogta Internet-ka Caalamka, Istickmaalka iyo Tirada Dadka, waxaa laga heli karaa: <https://www.internetworldstats.com/africa.htm>.

¹⁷Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Disembar 2019

¹⁸Eeg, Human Rights Watch, "Sida Kalluun Ku Jira Biyo Sumaysan", 2016, waxaa laga heli karaa: https://www.hrw.org/sites/default/files/report_pdf/somalia0516web_1.pdf.

¹⁹Eeg, Golaha Difaaca Weriyayaasha, "Tusmada Isla Xisaabtan La'aanta Caalamka 2019", waxaa laga heli karaa: <https://cpj.org/reports/2019/10/getting-away-with-murder-killed-justice.php>.

loo geysto weriyayaasha.²⁰ In aanay jirin baaritaanno lagu kalsoonaan karo iyo hanjabaadaha sii socda ayaa horseeday in warbaahinta ay iskeed isu faafreebto.²¹

Soomaali badan ayaa u dabaaldegtay doorashadii Madaxweyne Maxamed Cabdullahi Maxamed Farmaajo ee bishii Febraayo 2017²² taas oo soo bandhigtay fursad muhiim ah oo uu maamulka cusub wax uga qaban karay dhibaatooyinka dhanka xuquuqda aadanaha ee dalka ka jira,²³ gaar ahaan ixtiraamidda, ilaalinta iyo hormarinta xoriyadda hadalka iyo tan madax bannaanida warbaahinta. Taa bedalkeeda, dowladda ayaa adeegsatay qaabab ay si adag ugu xakamayneyso madax bannaanida saxaafadda iyo guud ahaan xuquuqda xoriyadda hadalka.²⁴

Weriyaal, dad u dooda xoriyadda warbaahinta iyoo weliba saraakiil ka tirsan dowladda ayaa u sheegay Amnesty International in dowladda hadda jirta ee Madaxweyne Farmaajo ay dhammaadkii 2017 dhaliilo xooggan kala kulantay siyaasiyiinta mucaaradka ah iyo shakhsiyaad saameyn leh, jawaabta ay arintaa ka bixisayna ay ahayd inay beegsato xoriyadda hadalka, gaar ahaan inay marin-habaabiso warbaahinta iyadoo adeegsanaysa qaab laaluush ah ama hanjabaad²⁵, waxa ayna sidoo kale weerarro la beegsatay xubno kamid ah mucaaradka iyo dadka siyaasadaheeda diiddan.²⁶ Dowladdu waxa ay xakamayneysaa kala aragti duwanaanta, waxaana ay maarayneysaa doodaha bulshada.²⁷

Dhibaatooyinka guud ee loo geysto weriyayaasha Soomaaliya waxaa dheer in gabdhaha warbaahinta ka shaqeeya ay la kulmaan caqabado u gaar ah, sida xakameyn dhanka bulshada iyo dhaqanka uga timaada, tacaddiyada jinsiga ku salaysan, iyadoo laga horjoogsado inay ka soo warramaan goobaha qaar, iyadoo aan helin tababarro ay xirfaddooda ku hormarin karaan, iyo faquuq ay kala kulmaan goobaha shaqada.²⁸ Dhowr weriyaal gabdho ah ayaa u sheegay Amnesty International in ay joojiyeen ka soo tebinta wararka goobaha ay weerarrada ka dhacaan maadaama ay ka cabsi qabaan in loo beegsado dumar ahaan.²⁹ Qaar kale ayaa sheegay inay faquuq kala kulmaan goobahooda shaqada, gaar ahaan inaan laga qeybgelin go'aan qaadashada, isla markaana aan la siin gunnooyin la mid ah kuwa ay helaan weriyayaasha ragga ah ee ay isla shaqeeyaan.³⁰

XIISADDA SIYAASADEED EE SARE U KACDAY 2018 IYO 2019

Soomaaliya waxa ay hadda ka kooban tahay dowlad Federaal ah oo fadhigeedu yahay Muqdisho iyo shan maamul goboleed oo xubno ka ah Federaalka oo kala ah: Jubaland,³¹ Koonfur

²⁰ Eeg, Human Rights Watch, "Sida Kalluun Ku Jira Biyo Sumaysan", 2016, waxaa laga heli karaa: https://www.hrw.org/sites/default/files/report_pdf/somalia0516web_1.pdf.

²¹ Eeg, Human Rights Watch, "Sida Kalluun Ku Jira Biyo Sumaysan", 2016, waxaa laga heli karaa: https://www.hrw.org/sites/default/files/report_pdf/somalia0516web_1.pdf.

²² "Maxamed Cabdullahi Farmaajo oo loo doortay Madaxweynaha Soomaaliya", BBC, 8-dii Febraayo 2017, <https://www.bbc.com/news/world-africa-38904663>.

²³ "Waa cusub oo u baryay Soomaaliya, iyadoo Soomaali-Maraykan uu ku gulanay madaxtinnimada" 8 Febraayo 2017, <https://www.theguardian.com/world/2017/feb/08/somali-presidential-election-won-mohamed-abdullahi-mohamed>.

²⁴ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Nofembar 2019

²⁵ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Nofembar 2019

²⁶ "Laamaha ammaanka Soomaaliya oo xiray wasiir hore oo ay gurigiisa ku weerarreen" Reuters, 18-kii Disembar 2017, <https://www.reuters.com/article/us-somalia-politics/somali-security-forces-arrest-former-minister-in-raid-idUSKBN1EC14D>.

²⁷ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah, dad u ololeeya warbaahinta iyo khubarro caalami ah oo dhanka saxaafadda ah intii u dhexaysan July iyo Nofembar 2019.

²⁸ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal gabdho ah, Fatxi Maxamed Axmed, Raxma Xasan Maxamed, Amal Yusuf Macallim iyo kuwo kale, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²⁹ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal gabdho ah oo ay kamid tahay Raxma Xasan Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

³⁰ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal gabdho ah oo ay kamid tahay Farxiyo Maxamed Yusuf and Nafiso Xirsi Maxamed, Nairobi, Kenya, 31-kii Oktobar 2019. Si aad waxbadan uga ogaato caqabadaha gaarka u ah weriyayaasha dumarka ah ee Soomaaliya, eeg Human Rights Watch, "Sida Kalluun Ku Jira Biyo Sumaysan", 2016, waxaa laga heli karaa: https://www.hrw.org/sites/default/files/report_pdf/somalia0516web_1.pdf.

³¹ Waxaa kamid ah gobollada Gedo, Jubada dhexe iyo Jubada hoose.

Galbeed,³²Galmudug,³³Hirshabelle³⁴ iyo Puntland.³⁵ Puntland oo dhacda waqooyi bari Soomaaliya ayaa maamulkeeda dhisatay 1998, waxaana ay leedahay hay'ado xasilloon oo shaqeeya marka loo eego maamul goboleedyada kale. Puntland ayaa qirsan inay qeyb ka tahay Soomaaliya. Somaliland oo ku taal dhanka waqooyi galbeed ee Soomaaliya ayaa 1991 ku dhawaaqday inay ka go'day Soomaaliya inteeda kale, balse ma jiro dal u aqoonsaday waddan madax bannaan.³⁶ Welii waxaan go'aan laga gaarin maqaamka uu Gobolka Banaadir, oo ah xarunta dowladda, ku yeelanayo hannaanka federaalka.³⁷ Gobolka Banaadir ma aha maamul goboleed gees u taagan, balse waxa uu leeyahay maamul shaqeeya oo uu madax u yahay Duqa Muqdisho.

Sanadihii 2018 iyo 2019, Soomaaliya waxa ay gashay xilli kale oo ay sare u kacday xiisadda siyaasadeed. Dowladda Soomaaliya, hawl-wadaagayaasheeda caalamiga ah iyo maamul goboleedyada ayaa xoogga saaray hannaanka doorashooyinka maamul goboleedyada, sida doorashadii Koonfur Galbeed ka dhacday dabayaqaadii 2018,³⁸ tii baarlamaanka iyo madaxweynaha ee Puntland ka dhacday horraantii 2019,³⁹ midii baarlamaanka iyo madaxtinnimada ee Jubaland ka dhacday Agoosto 2019,⁴⁰ and iyo tii horraantii 2020 ka dhacday Galmudug.⁴¹

Dhammaan doorashooyinkaasi ayaa waxaa hareeyay xiisad iyo eedeymo ku aaddan loolan siyaasadeed iyo ku shubasho.⁴² Arimahaasi ayaa horseeday in dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada ay gacan adag ku qabtaan dadka dhaliilsan isla markaana ay caburiyaan xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta⁴³ iyagoo mararka qaarna adeegsanaya awood xad dhaaf ah, geysanaya xadgudubyo xuquuqda aadanaha ah sida dilal loo geystay dadka rayidka ah.⁴⁴

Dowladda Soomaaliya ayaa caburinta ay ku hayso dadka dhaliilsan waxa ay xitaa gaarsiisay beesha caalamka. Janaayo 2019, markii ugu horreysay taariikhda Soomaaliya, ayaa dowladda waxay dalka ka cayrisay wakiilka gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Haysom, kadib markii uu walaac ka muujiyay dibedbaxayaal lagu dilay magaalada Baydhabo, mudaharaadkaasi oo daba socday doorashada muranka dhalisay ee madaxtinnimada Koonfur Galbeed.⁴⁵ Kadib markii la eryay wakiilka ayaa Qaramada Midoobay waxa ay hakisay warbixinnada bil kasta ay ka diyaarin jirtay xaaladda xuquuqda aadanaha ee dalka.⁴⁶

32 Waxaa kamid ah gobollada Shabeellaha hoose, Baay iyo Bakool.

33 Waxaa kamid gobolka Galgaduud iyo qeybta koonfureed ee gobolka Mudug.

34 Gobollada Hiraan iyo Shabeellaha dhexe.

35 Eeg Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, "Warbixinta Xoghayahay Guud ee ku aaddan Soomaaliya," S/2017/751, 5-tii Sebtembar 2017, faqrada. 7. Iyo "Warbixinta Xoghayahay Guud ee ku aaddan Soomaaliya," S/2018/411, 2-dii Mey 2018, faqrada 8.

36 The Economist, Sababta aan Somaliland dal loogu aqoonsan, 1-dii Nofembar 2015, <https://www.economist.com/the-economist-explains/2015/11/01/why-somaliland-is-not-a-recognised-state>

37 Eeg Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, "Warbixinta Xoghayahay Guud ee ku aaddan Soomaaliya," S/2017/751, 5-tii Sebtembar 2017, faqrada. 7. Iyo "Warbixinta Xoghayahay Guud ee ku aaddan Soomaaliya," S/2018/411, 2-dii Mey 2018, faqrada 8.

38Crisis Group, "Maamulka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya: Madaxweyne la doortay, Xasarad ka dhalatay", 24-kii Disembar 2019, <https://www.crisisgroup.org/africa/horn-africa/somalia/somalias-south-west-state-new-president-installed-crisis-inflamed>.

39 "Puntland oo madaxweyne cusub doortay", VOA, 8-dii Janaayo 2019, <https://www.voanews.com/africa/somalias-puntland-region-elects-new-president>.

40 "Maamulka Jubaland ee Soomaaliya oo dib u doortay madaxweyne Ahmed Mohamed" Aljazeera, 22-kii Agoosto 2019, <https://www.aljazeera.com/news/2019/08/somalia-jubaland-region-elects-ahmed-mohamed-president-190822091045118.html>.

41"Mucaaradka Soomaaliya oo cabasho muujiyay ka hor doorashada Galmudug", The Star, 22-kii Sebtembar 2019, <https://www.the-star.co.ke/siasa/2019-09-22-somalia-opposition-cry-foul-ahead-of-galmudug-state-election/>.

42 Crisis Group, "Maamulka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya: Madaxweyne la doortay, Xasarad ka dhalatay", 24-kii Disembar 2019, <https://www.crisisgroup.org/africa/horn-africa/somalia/somalias-south-west-state-new-president-installed-crisis-inflamed>. Sidoo kale eeg, "Mucaaradka Soomaaliya oo cabasho muujiyay ka hor doorashada Galmudug", The Star, 22-kii Sebtembar 2019, <https://www.the-star.co.ke/siasa/2019-09-22-somalia-opposition-cry-foul-ahead-of-galmudug-state-election/>.

43 "Soomaaliya: Weriyaasha oo wajahaya hanjabaad iyo cagajugleyn ka hor doorashada Jubaland" AllAfrica, 1-da June 2019, <https://allafrica.com/stories/201906030287.html>.

44 Amnesty International, "Soomaaliya: Adeegsiga awoodda xad dhaafka ah ee lagu jabiyay dibedbaxyada Baydhabo oo aan qiiil lahayn" 14-kii Disembar 2018, <https://www.amnesty.org/en/latest/news/2018/12/somalia-use-of-lethal-force-to-quiet-protests-in-baidoa-unjustifiable/>.

45 "Soomaaliya oo eriday ergayga Qaramada Midoobay Nicholas Haysom" BBC, 2-dii Janaayo 2019, <https://www.bbc.com/news/world-africa-46734994>.

46 Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay saraakiil ka tirsan Qaramada Midoobay, July 2019, goobta waa la qariyay.

4. HANNAANKA SHARCI EE CAALAMKA IYO KAN GOBOLKA

Sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ayaa dhigaya in dowladaha ay ixtiraamaan, ilaaliyaan, hormariyaan isla markaana fuliyaan xuquuqda aadanaha oo ay kamid tahay xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta. Warbaahinta madax bannaan ayaa waxa ay dowlad muhiim ah ka dheeshaa wacyigelinta muwaadiniinta ee ku aaddan arimaha bulshada iyo inay dusha kala socota oo ay baarto waxqabadka dowladda ee heer kasta leh. Madax bannaanida warbaahinta ayaa ka caawisa dadweynaha inay la socdaan siyaasadaha dowladda, loona soo bandhigo ku tagri falka awoodda iyo xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.

Shuruuc kala duwan oo caalami ah ayaa lagu muujiyay muhiimadda ay leedahay madax bannaanida warbaahinta. Qodobka 19-aad ee Bayaanka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ayaa dhigaya in “qof kasta uu xaq u leeyahay xoriyadda hadalka iyo fekerka; waxaa xaqqaasi qeyb ka ah xoriyadda in qofka aan lagu faragelin fekerkiisa, iyo inuu raadsan karo, heli karo, gudbin karana macluumaadka iyo afkaarta isagoo adeegsanaya warbaahin kasta, iyadoo aan loo eegayn habka uu u maro⁴⁷ iyo qodobka 19-aad Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda oo ay Soomaliya saxiixday 1990, kaasoo dhigaya “qof kasta waxa uu xaq u leeyahay xoriyadda hadalka; waxaana xaqqaasi kamid noqonaya xoriyadda uu qofka ku raadsan karo, ku heli karo, kuna gudbin karo macluumaadka iyo fekradaha nooc kasta ay yihiinba, iyadoo aan loo eegayn qaabka gudbinta, oo noqon karta hadal, qoraal ama daabacaad, hab farshaxan, ama nooc kasta oo uu doono.⁴⁸ Axdiga Afrika ee Xuquuqda Bani’aadanka oo ay sidoo kale Soomaaliya qeyb ka tahay ayaa qodobkiisa 9-aad waxa uu dhigayaa “shakhsi kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu helo macluumaad” iyo “shakhsi kasta waxa uu xaq u leeyahay xoriyadda hadalka iyo inuu fekerkiisa u gudbiyo si waafaqsan sharciga.”⁴⁹ Dhammaan shuruucda xuquuqda aadanaha ayaa muujinaya muhiimada ay leeyihiin madax bannaanida warbaahinta iyo xoriyadda hadalka.

Xaq uu qofka u leeyahay xoriyadda hadalka ayaa la xakameyn karaa oo keliya haddii la buuxiyo shuruudaha ku xeeran oo ka kooban saddexda qodob ee kala ah: in xakameynta ay waafaqsan tahay sharciga (kaasoo ay qasab tahay in loo meelmariyay si ku haboon oo qofka u sahlaya inuu hab-dhaqankiisa u nidaamiyo si waafaqsan sharciga); in xakameynta tahay mid loo baahan yahay oo dheelitiran (tallaabooyinka ugu sahlan ee lagu gaari karo hadafka) iyo in ujeedadu tahay ilaalinta dano gaar ah oo dadweynaha khuseeya (ammaanka qaranka, kala dambeynta, ama caafimaadka bulshada iyo qiyamkeeda) ama ilaalinta xuquuqda iyo sumcadda dadka kale. Waa inuu jiro hannaan looga hortagayo in si xun loo

⁴⁷Bayaanka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha qodobka 19.

⁴⁸Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda qodobka 19

⁴⁹Axdiga Afrika ee Xuquuqda Bani’aadanka, qodobka 9.

adeegsado xakameynta xoriyadda hadalka, sida in qofka uu racfaan u qaadan karo guddi madax bannaan oo illaa xad dib u eegis ku samayn kara go'aannada maxkamada.

Ma aha in xakameynta ku jirta hannaankan ay caqabad ku noqoto xoriyadda hadalka qudheeda. Xakameynta aan waafaqsaneyn shuruudahaasi ayaa waxa ay meel ka dhac ku tahay xuquuqda hadalka xitaa haddii aanay wax ganaax ah ka dhalan. Xakameynta noocaasi ah ma aha mid saamaynteedu ku kooban tahay qofka la saaray, balse waxa ay dhibaato ku tahay xuquuqda ay dadka kale u leeyihiin helitaanka macluumaadka iyo afkaarta.

Sida uu qabo Bayaanka Mabaadii'da Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka ee Afrika oo uu Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee qaaradda uu anxisiyay Nofembar 2019, dalalka ayaa waxaa loo oggolaaday yahay inay xakameeyaan xuquuqda hadalka iyo helitaanka macluumaadka waa haddii xakameynta ay tahay: mid uu sharci dhigayo; looga gol leeyahay dan sharci ah; ayna tahay mid muhiim ah oo dheelitiran si looga gaaro dantaasi la sheegay ee khuseysa bulsho dimuqraadi ah.⁵⁰

Waxaa la sii qeexay waxa loola jeedo muhiim ah oo dheelitiran, iyadoo la sheegay in xakameynta ay noqoto: mid ku timaada baahi taagan oo muhiim ah kuna filan; ay xiriir degdeg ah oo toos ah la leedahay hadalka oo ay tahay qaabka ugu fudud ee lagu gaari karo ujeedadaasi; iyo in faa'iidada laga helayo danta la sheegay ay ka weyn tahay dhibaata ka dhalanaysa xakameynta xoriyadda hadalka, oo ay kamid tahay ciqaabta la amray.⁵¹

Cilmi-baarista Amnesty International ay ka samaysay Soomaaliya ayaa muujinaysa in inta badan xaaladaha ay dowladda ku xakameysay xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta ay u custakatay ammaanka iyo la dagaallanka argagixisada. Haseyeeshee ficillada dowladda ayaa hareer marsanaa sharci caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.

Mabaadii'da Johannesburg ee Ammaanka Qaran, Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka oo ay 1-kii Oktoobar 1995 ansixiyeen khubaro sharci caalamka, ammaanka qaranka iyo xuquuqda aadanaha ku xeel dheer ayaa waxaa ku jira mabaadii' looga gol leeyahay in lagu xalliyo xiisadaha ka dhasha is waafajinta xuquuqda xoriyadda hadalka iyo ammaanka qaranka. Waxaa lagu sheegay in "dowladuhu ay ku qasban yihiin inay adeegsadaan qaabka ugu fudud ee xakameynta marka ay mamnuucayaan xoriyadda hadalka ee khilaafsan danaha ammaanka qaranka; xakameyn loogu qiil dayayo ammaanka qaranka ma noqonaysa mid sharci ah haddii ujeedada dhabta ah ee laga leeyahay ay tahay in la ilaaliyo dano aan khuseyn ammaanka qaranka, sida in dowladda laga difaaco weji gabax ama soo bandhigidda khaladaadkeeda, ama in la qariyo macluumaadka ku saabsan sida ay hay'adaheeda u shaqeeyaan, ama in la xoojiyo aragti gaar ah..."⁵²

Dowladdu waxa uu sidoo kale waajib ka saaran yahay inay ka hortagto, baarto oo ay si ku filan u maxkamadeyso xadgudubyada iyo tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha iyo hay'adaha warbaahinta. Golaha Xuquuqda Aadanaha Aragtidiisa Guud ee lambarka 31 ayaa lagu qeexay in dowladuhu ay meel uga dhacayaan waajibaadka ka saaran Axdiga Caalamiga ah ee xuquuqda madaniga iyo siyaasadda marka ay hay'adaheeda mas'uulka ka yihiin tacaddiyada xuquuqda aadanaha iyo weliba marka ay dowladdu ku guuldaraysato inay qaado tallaabooyin ku habboon si looga hortago xadgudubyada ay galaan hay'adaha gaarka ah: dowladaha waa inay ay "qaadaan tallaabooyinka ku habboon si looga hortago, loo ciqaabo, loo baaro ama looga shaafiyo dhibaata ay geystaan shakhsiyadka ama shirkadaha gaarka loo leeyahay."⁵³

Bayaanka Mabaadii'da Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka ee Afrika ayaa sidoo kale qeexaya mabaadii' gaar ah oo dowladaha looga baahan yahay in tixgeliyaanka si ay u damaanad qaadaan badqabka weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta. Waxa uu bayaanka dhigayaa "Dowladuhu waa inay damaanad qaadaan badqabka weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta, iyadoo qaadaya tallaabooyin looga hortagayo weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta, sida dilka, dilalka sharci ka baxsan, jir dilka iyo dhibaateynta kale, xariga aan loo meeldeyin, afduubka iyo

⁵⁰Bayaanka Mabaadii'da Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka ee Afrika oo uu Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee qaaradda uu anxisiyay https://www.achpr.org/public/Document/file/English/draft_declaration_of_principles_on_freedom_of_expression_in_africa_eng.pdf

⁵¹Bayaanka Mabaadii'da Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka ee Afrika oo uu Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee qaaradda uu anxisiyay https://www.achpr.org/public/Document/file/English/draft_declaration_of_principles_on_freedom_of_expression_in_africa_eng.pdf

⁵²Mabaadii'da Johannesburg ee Ammaanka Qaran, Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka oo ay 1-kii Oktoobar 1995 <https://www.article19.org/wp-content/uploads/2018/02/joburg-principles.pdf>.

⁵³Aragtidiisa Guud ee lambarka 31 [80], Nooca Waajibaadka Guud ee uu Axdiga Saaray Dowladaha oo La Anxisiyay 29-kii Maarso 2004 (kulankii 2187-aad), <https://www.refworld.org/docid/478b26ae2.html>.

cagajugleynta kuwaasoo wax u dhimaya madax bannaanida warbaahinta iyo in shacabku ay si aan kala go' lahayn u helaan macluumaadka." Waxaa sidoo kale lagu sheegay, "Dowladuhu waa inay qaadaan tallaabooyin sharci oo wax ku ool ah iyo kuwo kaleba si ay u baaraan, maxkamadeeyaan, una ciqaabaan dadka geysta weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta iyo inay xaqiijiyaan in dhibbanayaasha ay helaan cadaalad wax ku ool ah."⁵⁴

HANNAANKA SHARCI EE DALKA

Dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya oo la meelmariyay 2012, ayaa qodobkii 18-aad ku damaanad qaada xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta, iyo weliba xaq ah in macluumaadka loo gudbin karo nooc kasta.⁵⁵ Sidoo kale waxa uu qodobka 32-aad dhigayaa xuquuqda helitaanka macluumaadka.⁵⁶ Xeerka saxaafada oo Janaayo 2020 uu ansixiyay Aqalka Sare, isla markaana sugaya saxiixa Madaxweynaha,⁵⁷ ayaa sidoo kale dhigayaa xoriyadda hadalka⁵⁸ iyo madaxbaannida warbaahinta, gaar ahaan xuquuqda helitaanka ammaan iyo macluumaad.⁵⁹ Waxa uu xeerka mamnuucayaa faafreebid iyo wararka qasabka ku yimaada.⁶⁰ Sidaa awgeed, dowladda Soomaaliya waxa uu waajibaad ka saaran yahay sida ku cad sharciga dalka inay ixtiraamto, ilaaliso, difaacdo, hormariso oo ay fuliso xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta.

Sidaa oo ay tahayna, xeerka saxaafada waxaa weli ku jira qodobo dhibaato keeni kara, gaar ahaan dhowr meelood oo lagu xakameynayo xogta oo aan si wanaagsan loo qeexin, kuwaasoo ay dowladda si khaldan u adeegsan karto haddii loo fasiro sida ay hadda u dhigan yihiin. Waxaa kamid ah mamnuucidda wararka wax u dhimaya "ammaanka qaranka",⁶¹ "macluumaadka beenta ah",⁶² "hurinta rabshadaha iyo qabyaallada"⁶³ iyo "faafinta dacaayadaha".⁶⁴

Weriyaal badan iyo dadka u ololeeya madax bannaanida warbaahinta ayaa u sheegay Amnesty International in qodobadaasi aan sida wanaagsan loo qeexin ee ku jira xeerka saxaafada ay khatir weyn ku noqon karaan xoriyadda hadalka, maadaama suxufiyiinta ay ka fogaan doonaan tebinta wararka ay dowladdu qiil uga dhigan karto qodobadaasi.

Qodobka 18-aad ee wax ka bedalka xeerka saxaafada ayaa ku qasbaya dhammaan weriyayaasha maxalliga ah ee ka hawlgalla dalka in ay iska diiwaangeliyaan golaha qaran ee warbaahinta ee diiwaanka qaran ee weriyayaasha, kadibna ay magacyadooda u diraan wasaaradda warfaafinta oo markaa weriyayaasha siin doonta aqoonsi. Qaar badan oo kamid ah weriyayaasha iyo dadka u ololeeya madax bannaanida warbaahinta ayaa qodobkan u arka mid siinaya wasaaradda warfaafinta awood ballaaran oo ay ku xakameyn karto warbaahinta iyo xirfadlayaasheeda, maadaama ay dowladdu markaa awood u yeelanayso inay shakhsiyadka qaar ka horjoogsato mihnadooda warbaahinta.⁶⁵

Sanad kasta, Khabiirka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Hormarinta iyo Ilaalinta Xuquuqda Xoriyadda Hadalka iyo Fekerka, Wakiilka Madax bannaanida Warbaahinta u qaabilsan Ururka Iskaashiga Ammaanka ee Yurub (OSCE) iyo Khabiirka Gaarka ah ee Ururka Gobollada Maraykanka (OAS) u qaabilsan Xoriyadda Hadalka ayaa ansixiya Bayaan Wadajir ah oo lagu soo bandhigayo arimo muhiim u ah xoriyadda hadalka. Bayaankii 2003 ayay ku sheegeen: "Ma aha in shakhsiyadka weriyayaasha ah ay shati qaataan

⁵⁴Mabaadii'da Johannesburg ee Ammaanka Qaran, Xoriyadda Hadalka iyo Helitaanka Macluumaadka oo ay 1-kii Oktoobar 1995, <https://www.article19.org/wp-content/uploads/2018/02/joburg-principles.pdf>.

⁵⁵ Dastuurka kumeelgaarka ah, qodobka 18.

⁵⁶ Dastuurka kumeelgaarka ah, qodobka 32.

⁵⁷ Xeerka saxaafada ee Soomaaliya ayaa waxaa 2016 saxiixay Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamud. Horraantii 2017, Wasiirkii Warfaafinta ee xilligaasi ayaa ballanqaaday in dib u eegis horleh lagu samaynayo ka hor inta aanay ansixin golaha wasiiradda July 2017. Hindise sharciyeedka ayaa loo diray Golaha Shacabka, waxaana uu markale ansixiyay July 2019. Cabasho ka timid saamilayaasha awgeed, ayaa baarlamaanka waxa uu weli helayaa talooyin ku aaddan xeerka.

⁵⁸ Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. 3.

⁵⁹ Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. 36.

⁶⁰ Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. 3.

⁶¹ Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. 3.4.

⁶² Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. 4 (j)

⁶³ Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. 4 (j)

⁶⁴ Xeerka saxaafada Soomaaliya qodobka. (x)

⁶⁵ Waraysiyay ay Amnesty International la yeelatay dad u ololeeya warbaahinta intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

ama la diiwaangeliyo, sidaa awgeed sharciga caalamiga ah ayaa mamnuucaya diiwaangelinta shaqaalaha warbaahinta.”⁶⁶

Wasiirka Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiiska Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) oo usoo jawaabay Amnesty International ayaa yiri “...wasaaraddu waxay diyaar u tahay inay dhegaysato warbaahinta gaarka loo leeyahay ee dalka iyo hay’adaha taageera ee maxalliga iyo caalamiga ah si wax ka bedal loogu sameeyo xeerka saxaafadda oo loo waafajiyo heerka caalamiga ah ee lagu taageerayo xoriyadda hadalka.” Amnesty International ayaa ugu baaqaysa wasiirka iyo dhammaan hay’adaha kale ee arinta ku shaqada leh inay si degdeg ah u qaadaan tallaabooyin dib u eegis loogu samaynayo xeerka saxaafadda iyo inay xaqiijiyaan in dhammaan qodobadiisa ay waafaqasn yihiin heerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.⁶⁷

Sidoo kale, Xeerka Ciqaabta Soomaaliya ee 1963 ayaa koobanaya xoriyadda hadalka, maadaama ay ku jiraan qodobo aan si wanaagsan loo qeexin oo micno badan yeelan kara, kuwaasoo dembi ka dhigaya noocyada kala duwan ee xoriyadda hadalka iyo hawlaha weriyayaasha sida sumcad dilka,⁶⁸ ku xadgudubka sharafta madaxda qaranka,⁶⁹ daabicidda iyo baahinta beenta, ka badbadinta wararka,⁷⁰ aflagaadeynta shaqaalaha iyo hay’adaha dowladda,⁷¹ meel uga dhaca sharafta qaranka iyo calanka,⁷² ama Diinta Islaamka.⁷³ Dhammaan dembiyadaasi ayaa wata ciqaab mararka qaar gaaraysa illaa saddex sano oo xabsi ah.

⁶⁶Eeg, Hannaanka Caalamiga ah ee Hormarinta Xoriyadda Hadalka BAYAANKA WADAJIRKA AH ee Khabiirka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Hormarinta iyo Ilaalinta Xuquuqda Xoriyadda Hadalka iyo Fekerka, Wakiilka Madax bannaanida Warbaahinta u qaabilsan Ururka Iskaashiga Ammaanka ee Yurub (OSCE) iyo Khabiirka Gaarka ah ee Ururka Gobollada Maraykanka (OAS) u qaabilsan Xoriyadda Hadalka: 2003, <https://www.osce.org/fom/28235?download=true>.

⁶⁷Warqadda jawaabta ee uu wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) usoo diray Amnesty International kuna taariikheysan 9-ka Febraayo 2020, u diiwaangashan Amnesty International.

⁶⁸Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, qodobka 452.

⁶⁹Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, qodobka 220.

⁷⁰Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, qodobka 328.

⁷¹Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, qodobka 269.

⁷²Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, qodobka 219.

⁷³Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, qodobka 313.

5. DILALKA IYO ISKU-DAYGA DIL EE WERIYAYAASHA

Sanadkii shanaad oo xiriir ah, Soomaaliya ayaa kaalinta koobaad kaga jirtay liiska Isla Xisaabtan La'aanta Caalamiga ah ee CPJ, oo looga hadlo dalalka aan cadaaladda la marsiin kuwa dila weriyayaasha.⁷⁴ Guud ahaan, dowladda Soomaaliya ayaan inta badan baaritaan ku samayn kiisaska dilalka ama weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha.⁷⁵ Taasi ayaa ka dhigtay Soomaaliya mid kamid ah dalalka ugu xun ee weriye laga noqdo. Sida ay sheegtay CPJ, 68 weriye ayaa lagu dilay Soomaaliya tan iyo 1992.⁷⁶

Ugu yaraan sideed weriye ayaa lagu dilay Soomaaliya tan iyo 2017 xilligaasi oo uu xilka la wareegay Madaxweyne Farmaajo.⁷⁷ Shan kamid ah weriyayaashaasi ayaa ku dhintay weerarrada Al-Shabaab⁷⁸, laba waxaa dilay dableyn aan la aqoonsan⁷⁹ halka kan kale uu ku dhintay gacanta askari ka tirsan booliska federaalka oo Muqdisho ku sugnaa.⁸⁰ Laba kamid ah sideedaasi weriye ayaa la dilay 2017, halka afar kalena la dilay 2018, labada kalena waxa ay dhinteen 2019.⁸¹ Sidoo kale, waxaa isku day dil ka badbaaday weriye walxaha qarxa gaarigiisa loogu xiray, balse waxaa soo gaaray dhaawac xooggan.⁸² Marka laga reebo laba kiis oo uu kamid yahay midka nin boolis ah oo weriye Muqdisho ku dilay 2018 xukun lagu riday isagoo maqan, illaa haddana baxsad yahay, ma jirto cid kale oo lagula xisaabtamay dilalka iyo isku-dayga dil ee loo geystay weriyayaasha kale.⁸³

⁷⁴Golaha Difaacidda Weriyayaasha (CPJ), "Ka fakashada cadaaladda ee dilaayaasha", 29-kii Oktoobar 2019, <https://cpj.org/reports/2019/10/getting-away-with-murder-killed-justice.php>.

⁷⁵Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan iyo saddex qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta oo ku sugan Muqdisho iyo Nairobi mudadii u dhexaysay July iyo Nofembar 2019. Sidoo kale eeg, Human Rights Watch, "Sida Kalluun Ku Jira Biyo Sumaysan" 2016, oo laga heli karo: https://www.hrw.org/sites/default/files/report_pdf/somalia0516web_1.pdf.

⁷⁶ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Muthoki Mumo, Wakiilka CPJ ee dalalka ka hooseeya Saxaraha, 22-kii Janaayo 2020, Nairobi, Kenya. Sidoo kale eeg bogga CPJ ee Soomaaliya <https://cpj.org/africa/somalia/>.

⁷⁷ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan iyo saddex qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta oo ku sugan Muqdisho iyo Nairobi mudadii u dhexaysay July iyo Nofembar 2019. Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay ehelada weriyayaasha la dilay 2018 iyo 2019, mudadii u dhexaysay July iyo December 2019 iyo waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khalifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019.

⁷⁸Cawil Dahir Salad, Maxamed Sahal Cumar, Hodan Nalayeh, Cabdullahi Cismaan Macalim iyo Cali Nuur Siyad.

⁷⁹Cabdirisaaq Saciid Cismaan iyo Cabdullahi Mire Xaashi.

⁸⁰Cabdirisaaq Qaasim Imaan.

⁸¹ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan iyo laba qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta, Maxamed Ibrahim Macallimuu oo ka tirsan Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed iyo Cabdalle Axmed Mumin oo ka tirsan Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (SJS), Muqdisho, Soomaaliya, taariikhdu marka ay ahayd 21-kii July 2019 iyo 16-kii July 2019, Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay ehelada weriyayaasha la dilay 2018 iyo 2019, mudadii u dhexaysay July iyo December 2019 iyo waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khalifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019.

⁸² Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khalifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019. Waa weriyaha uu dhaawaca xooggan ka soo gaaray walxaha qarxa ee gaarigiisa loogu xiray. Waxa uu hadda ku soo kabanayaa dalka Turkiga inkastoo uu qabo dhaawacyo waaweyn oo aan ka hari doonin.

⁸³ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan iyo saddex qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta oo ku sugan Muqdisho iyo Nairobi mudadii u dhexaysay July iyo Nofembar 2019. Iyo waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Qaasim Imaan Cosoble, aabaha dhalay weriyaha uu dilay ninka booliska ah ee ay maxkamadda ciidamada ee Muqdisho ku heshay

26-kii July 2018, Cabdirisaaq Qaasim Imaan, 17 jir sawir qaade u ahaa telefishinka SBS ayaa waxaa Muqdisho ku toogtay Cabdullaahi Nuur Axmed oo ka tirsan booliska Soomaaliya.⁸⁴ Sida lagu ogaaday xogta ay ururisay Amnesty International, askariga ayaa madaxa ka toogtay weryaha xilli uu marayay bar koontarool oo ku taalla caasimadda.⁸⁵ Weryaha ayaa la sheegay inuu markaas ka soo laabtay degmada Waaberi halkaasi oo uu ka soo duubtay muuqaallada warbixin uu diyaarinayay.⁸⁶

Sida ku cad warqadaha maxkamadda ee ay aragtay Amnesty International ee Nofembar 2018, maxkamad milateri oo ku taalla Muqdisho ayaa dembigaasi dilka weryaha ku heshay Cabdullaahi Nuur Axmed, oo xilligaasi aan maxkamadda joogin, waxaana ay ku xukuntay shan sano oo xarig ah iyo 100 halaad ah oo mag ahaan loo siinayo qoyska marxuumka.⁸⁷ Maxkamadeynta iyo xukunka lagu riday askarigaasi ayaan la shaacin ka hor July 2019.⁸⁸ Qoyska weryaha ayaa loo oggolaaday inay ka qeyb galaan maxkamadeynta, balse kuma aanay qancin xukunka.⁸⁹

Qaasim Imaan Cosoble, aabaha dhalay weryaha la dilay ayaa Amnesty International u sheegay:

“Kiiskan si cadaalad ah looma qaadin, askariga booliska ah ee dilay wiilkeyga waa uu baxsaday, waxa uuna hadda ku sugan yahay Galmudug, lama xirin, mana aan helin magta ay maxkamada noo xukuntay”⁹⁰

Inkastoo maxkamadeynta askarigaas ay dadka qaar⁹¹ u arkaan tallaabo yar oo loo qaaday isla xisaabtanka ku aaddan dilalka weryayaasha guud ahaan Soomaaliya iyo gaar ahaan kiiskan,⁹² ayaa haddana qoyska weryaha waxa ay weli sugayaan inay cadaalad u helaan wiilkooda, maadaama aan weli gacanta lagu dhigin dembiilaha.⁹³

Galabnimadii 18-kii Sebtembar 2018, Cabdirisaaq Siciid Cismaan, 32 jir usoo warrami jiray Idaacadda Codka Nabadda ayaa rag aan heybtooda la aqoonsan ay toori laba jeer ku dhufteen magaalada Gaalkacyo ee dhanka koonfureed ka xigta Puntland.⁹⁴ Cabdirisaaq ayaa subixii xigay dhaawaca ugu geeriyooday cisbitaalka gobolka Mudug, halkaas oo looga daweynayay dhaawaca soo gaaray. Lama oga sababta ka dambaysay weerarkaasi, balse werye ka soo jeeda Gaalkacyo ayaa sheegay in Cabdirisaaq ay soo gaareen farriimo hanjabaad ah oo ka yimid dad la rumaysan yahay inay ka tirsan yihiin Al-Shabaab.⁹⁵

dembigaasi Nofembar 2018. Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019. Wasiirka Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiiska, Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) oo ka jawaabaya su'aalo ay weydiisay Amnesty International ayaa sheegay in maxkamadda milateriga ee Muqdisho ay Mey 2019 laba nin ku heshay inay ku lug lahaayeen diyaarinta qarixii uu ku dhintay weryihii Universal Cawil Daahir Salaad bishii Disembar 2018, kadibna lagu fuliyay xukun dil ah.

⁸⁴ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Qaasim Imaan Cosoble, aabaha weryaha la dilay, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019. Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, xoghayaha guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019. Sida uu sheegay aabaha, Cabdirisaaq waxa uu ahaa 17 jir.

⁸⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Qaasim Imaan Cosoble, aabaha weryaha la dilay, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019.

⁸⁶ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, xoghayaha guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019. Sidoo kale eeg, Golaha Difaacidda Weryayaasha (CPJ), “Sawir qaade Soomaali ah oo lagu dilay Muqdisho”, 31-kii July 2018, <https://cpj.org/2018/07/somali-cameraperson-shot-dead-in-mogadishu.php>.

⁸⁷ Warqadaha maxkamadda oo ay heshay Amnesty International.

⁸⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, xoghayaha guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019.

⁸⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Qaasim Imaan Cosoble, aabaha weryaha la dilay, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019.

⁹⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Qaasim Imaan Cosoble, aabaha weryaha la dilay, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019.

⁹¹ Oo ay kamid yihiin dadkii ololeeya madax bannaanida warbaahinta Soomaaliya, iyo khabiir madax bannaan oo la socda xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.

⁹² Khabiir madax bannaan ee la socda xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, tusaale ahaan, waxa uu warbixintiisa Sebtembar 2019 ku sheegay, “inkastoo ciqaabtaasi tahay mid aan ku filnayn, ayaa haddana xukunka waxa uu dirayaa farriin cad oo ah inay suuragal tahay in lala xisaabtamo dadka geysta weerarrada ka dhanka ah weryayaasha”. Eeg, “Xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya”, Warbixinta khabiir madax bannaan ee la socda xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, 16-kii Sebtembar 2019, faqrada 59, https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/A_HRC_42_62_AEV.pdf.

⁹³ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Qaasim Imaan Cosoble, aabaha weryaha la dilay, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019.

⁹⁴ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Axmed Caano-Geel, Agaasimaha Codka Nabadda, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019. Sidoo kale eeg, RSF, “Werye idaacadeed oo toori lagu dilay bartamaha Soomaaliya”, 20-kii Sebtembar 2019, <https://rsf.org/en/news/radio-reporter-stabbed-death-central-somalia>.

⁹⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay werye ka soo jeeda Gaalkacyo, taariikhda waraysiga iyo magaca weryaha ayaa loo qariyay sababo ammaan awgood iyo markii uu weryaha sidaa codsaday.

Ma jiro wax baaritaan ah oo ay Amnesty International ka war heshay oo lagu sameeyay kiiskan, mana jirto cid loo maxkamadeeyay dilka Cabdirisaaq.

“Weriyaheenna waxaa toori lagu dilay xilli uu shaqada ka rawaxay oo uu guriga u socday, ma jirto cid ilaa maanta sheegatay mas’uuliyadda dilkiisa, mana jirto cid cadaaladda loo mariyay”⁹⁶

Axmed Caano-Geel, Agaasimaha Codka Nabadda.

27-kii October 2018, laba nin oo hubaysan oo aan heybtooda la aqoonsan ayaa toogasho ku dilay Cabdullaahi Mire Xaashi, 26 jir,⁹⁷ barnaamij soo saare iyo daadihiye ka ahaa barnaamij maalinle ah oo ka baxa idaacadda gaarka loo leeyahay ee Darul Sunnah ee ku taal deegaanka Ceelasha Biyaha ee duleedka Muqdisho. Ragga weerarka geystay ayaa goobta ka baxsaday, mana jirto cid sheegatay mas’uuliyadda dilka weriyahaasi. Inkastoo aanay caddeyn sababaha dhaliyay dilka, ayaa haddana laba weriye oo la hadlay Amnesty International waxa ay sheegeen in Cabdullaahi Mire Xaashi ay soo waceen shakhsiyaad sheegay inay ka tirsan yihiin Al-Shabaab, kuwaasoo su’aal ka keenay sababta aanay idaacaddiisa uga warramin hawlgallada uu ururkaasi ka wado deegaankaasi.⁹⁸

Cabdiraxmaan Mataan Diriyee, agaasimaha idaacadda Darul Sunnah ee uu Cabdullaahi ka shaqeynayay, ayaa su’aal geliyay sababta loo beegsaday weriyahaasi, maadaama idaacadooda ay baahiso oo keliya muxaadarooyinka Islaamiga ah oo aanay waxba ka sheegin siyaasadda ama arimaha kale ee lagu muransan yahay. Ma jirto cid loo qabtay dilkaasi ama baaritaan lagu sameeyay.⁹⁹

22-kii Disembar 2018, Cawil Daahir Salad, 48 jir, ahaa weriye caan ah oo u shaqeynayay telefishinka Universal ayaa lagu dilay qarax gaari loo adeegsaday oo ka dhacay Muqdisho.¹⁰⁰ Saddex kale oo kamid ahaa shaqaalaha telefishinkaasi oo kala ahaa laba askari oo ilaalinaysay weriyaha iyo darawalkiisa ayaa isla qaraxaasi ku dhintay.¹⁰¹

Afartaasi qof ayaa u socday xarunta telefishinka Universal ee Muqdisho, waxaana uu qaraxa ku qabsaday bar koontoraal oo u dhaw madaxtooyada. Maalintaasi waxaa dhacay laba qarax oo is xigay, waxaana la sheegay in afartaasi qof ay ku dhinteen qaraxa hore. Guud ahaan 26 qof ayaa ku dhimatay qaraxyadaasi mataanaha ahaa.¹⁰² Cawil iyo ragga la socday ayaa isla goobta ku naf waayay. Ururka Al-Shabaab ayaa sheegtay mas’uuliyadda labadaasi qarax.¹⁰³ Wasiirka Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiiska, Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) oo ka jawaabaya su’aalo ay weydiisay Amnesty International ayaa sheegay in maxkamadda milateriga ee Muqdisho ay Mey 2019 laba nin ku heshay inay ku lug lahaayeen diyaarinta qarixii uu ku dhintay weriyihii Universal Cawil Daahir Salaad bishii Disembar 2018, kadibna lagu fuliyay xukun dil ah.¹⁰⁴

12-kii July 2019, Mohamed Sahal Omar, oo loo yaqaanay Gacmadhere, 34 u soo warrami jiray telefishinka SBC Somali iyo **Hodan Nalayeh** oo asaastay telefishinka Integration, haysatayna dhalashada Canada ayaa lagu dilay weerar ka dhacay huteelka Cascade ee magaalada Kismaayo.¹⁰⁵ Labada weriye ayaa kamid ahaa

⁹⁶Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Axmed Caano-Geel, Agaasimaha Codka Nabadda, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019.

⁹⁷ Waraysiyo ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay laba weriye oo Muqdisho ka soo jeeda. Sidoo kale eeg, “Weriye Soomaali ah oo lagu dilay dibedda Muqdisho”, Xinhua, 28-kii Oktobar 2018, http://www.xinhuanet.com/english/2018-10/28/c_137562949.htm, iyo, Golaha Difaacidda Weriyayaasha (CPJ), “Weriye idaacadeed oo lagu dilay Muqdisho”, 31-kii Oktoobar 2018, <https://cpi.org/2018/10/radio-journalist-gunned-down-in-somalia.php>

⁹⁸ Waraysiyo ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay laba weriye oo Muqdisho ka soo jeeda, taariikhda waraysiyada iyo magacyada weriyayaasha ayaa la qariyay sababo ammaan awood, iyo codsi ka yimid weriyayaasha.

⁹⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdiraxmaan Mataan Diriyee, agaasimaha Darul Sunnah, Ceelasha Biyaha, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019.

¹⁰⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, tifaftire iyo madaxa wararka iyo barnaamijyada ee telefishinka universal ee Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019. Sidoo kale eeg, Golaha Difaacidda Weriyayaasha (CPJ), “Cawil Daahir Salaad”, <https://cpi.org/data/people/awil-dahir-salad/index.php>.

¹⁰¹ UNESCO, “Agaasimaha-Guud oo cambaareeyay weerar argagixiso oo Soomaaliya ku dilay dad badan oo uu kamud yahay weriye Cawil Daahir Salaad”, 3-dii Janaayo 2019, <https://en.unesco.org/news/director-general-condemns-terror-attack-somalia-claimed-numerous-lives-including-journalist>.

¹⁰²“Tirada dhimashada qarixii Muqdisho ee Sabtida oo gaartay”, AP, 24-kii Disembar 2018, <https://apnews.com/c524f4572e864517815adde08337fd64>.

¹⁰³ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, tifaftire iyo madaxa wararka iyo barnaamijyada ee telefishinka universal ee Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019. Sidoo kale eeg, “Tirada dhimashada qarixii Muqdisho ee Sabtida oo gaartay”, AP, 24-kii Disembar 2018, <https://apnews.com/c524f4572e864517815adde08337fd64>.

¹⁰⁴Warqadda jawaabta ee uu wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) usoo diray Amnesty International kuna taariikheysan 9-ka Febraayo 2020, u diiwaangashan Amnesty International.

¹⁰⁵“Ugu yaraan 26 qof oo ku dhimatay weerar huteel oo ay sheegatay Al-Shabaab”, New York Times, 13-kii July 2019, <https://www.nytimes.com/2019/07/13/world/africa/somalia-shabab-hotel-kismayo.html>.

26 qof oo lagu laayay weerarkaasi ka dhacay huteelka oo kamid ah kuwa ugu caansan xarunta maamulka Jubaland.¹⁰⁶ Weerarka ayaa waxaa fuliyay afar dabley ah oo gudaha u galay huteelka galabnimadii 12-kii July. Ururka Al-Shabaab ayaa sheegtay mas'uuliyadda weerarkaasi.¹⁰⁷

Laba weriye oo kale, **Cabdullaahi Cismaan Macallin** oo ka tirsanaa idaacadda gaarka loo leeyahay ee Codka Hiiraan iyo telefshinka dowladda Jubaland, iyo **Cali Nuur Siyaad** oo ahaa filim-qaade madax bannaan, ayaa lagu dilay Soomaaliya sanadkii 2017, waxaana ay sidaa ku noqotay tirada weriyayaasha dalka lagu dilay tan iyo markii uu xukunka la wareegay Madaxweyne Farmaajo sideed suxufi. Cali Nuur ayaa kamid ahaa dadkii lagu laayay qarixii Zoobe ee 14-kii Oktoobar 2017¹⁰⁸ halka Cabdullaahi Cismaan Macallin uu **13-kii Sebtembar 2017** u geeriyooday dhaawac ka soo gaaray qarax lagu weerarray maqaayad ku taal magaalada Beledweyne. Ururka Al-Shabaab ayaa sheegtay mas'uuliyadda qaraxaasi gaariga loo adeegsaday.¹⁰⁹

ISKU-DAY DIL



Weriye Ismaaciil Sheekh Khaliifa, rugcadaa saxafaadeed una ololeeya xuquuqda warbaahinta ayaa ku dhaawacmay walxaha qarxa oo gaarigiisa loogu xilay 4-tii December 2018. Ismaaciil waxaa hadda lagu daweynayaa magaalada Istanbul ee Turkiga. © Ismail Sheikh Khalifa

Galabnimadii **4-tii Disembar 2018**, weriye rugcadaa ah, oo ka tirsan dadka u ololeeya xuquuqda warbaahinta, una shaqeyta telefshinka Kalsan, **Ismaaciil Sheekh Khaliifa** ayaa si xun ugu dhaawacmay walxaha qarxa oo gaarigiisa loogu xiray gudaha Muqdisho.¹¹⁰ Ismaaciil oo 47 jir ah iyo saaxiibkii ayaa markaas uun ka soo baxay xarunta telefshinka oo ku soo diyaariyay barnaamij todobaadle ah oo uu daadihiyo. Gaariga ayaa qarxay daqiiqado kadib markii uu ka soo baxay xarunta.¹¹¹

Ismaaciil Sheekh Khaliifa oo hadda dhaawacii soo gaaray looga daweynayo magaalada Istanbul ee Turkiga ayaa Amnesty International u sharraxay waxa ku dhacay maalintaasi:

“Waxaan gaariga dhigtay bannaanka hore ee istuudiyaha Kalsan TV, waxaana gudaha galay si aan barnaamijka u duubo xilli barqadii ah. Aniga iyo saaxiib igala qeyb qaadanayay barnaamijka waxaan istuudiyaha ka soo baxnay saddexdii galabnimo. Marka aan gaariga waday muddo shan daqiiqo ah, ayaa waxaan maqlay qarax weyn. Waan argagaxay, waxaana arkay qeybaha hoose ee jirkeyga oo gaariga dhex daadsan. Ninkii ila socday waxba ma aysan gaarin, waxaana uu i weydiyay waxa

¹⁰⁶ Waraysi ay Amnesty international telefoonka kula yeelatay Faarax Cumar Sahal, Kismaayo, Soomaaliya, 4-tii Disembar 2019 iyo Waraysi ay Amnesty international telefoonka kula yeelatay Cabdalle Axmed Muumin, Muqdisho, Soomaaliya, 16 July 2019.

¹⁰⁷ Ugu yaraan 26 qof oo ku dhimatay weerar huteel oo ay sheegatay Al-Shabaab”, New York Times, 13-kii July 2019, <https://www.nytimes.com/2019/07/13/world/africa/somalia-shabab-hotel-kismayo.html>. Wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) ayaa ku sheegay warqadda uu noo soo diray 9-kii Febraayo 2020 in Waaxda Dembi Baarista ee Jubaland ay xirtay nin lagu tuhunsan yahay falkaasi, ay welina wadaan baaritaanka, balse wasiirka ma bixin faahfaahin dheeraad ah, gaar ahaan in ninka la qabtay si rasmi ah dacwad loogu soo oogay iyo kale.

¹⁰⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibraahim Macallimuu, xoghayaha guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019. Weerarkaasi waxa uu ahaa qarax gaari loo adeegsado kii ugu khasaaro badnaa caalamka oo dhan iyo weerarkii ugu dhimashada badnaa ee maalin qura ka dhaca Soomaaliya. Inkastoo dad badan ay rumaysan yihiin inuu fuliyay ururka Al-Shabaab, ayaa haddana aanu ururkaasi sheegan mas'uuliyadda qaraxaasi. Eeg, Guddiga khubarada ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, UN Doc: S/2018/1002, Warbixinta Kooxda La socodka arimaha Soomaaliya iyo Eritrea ee loo gudbiyay si waafaqsan qaraarka 2385, 9-kii Nofembar 2018.

¹⁰⁹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibraahim Macallimuu, xoghayaha guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019. Sidoo kale eeg, Golaha Difaacidda Weriyayaasha (CPJ), Weriyaha Soomaali ah oo ku dhintay qarax qof ismiidaamiyay uu ku qaaday maqaayad, 14-kii Sebtembar 2019, <https://cpj.org/2017/09/somali-journalist-dies-after-suicide-bomber-target.php>.

¹¹⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khaliifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019. Sidoo kale eeg, Human Rights Watch, “Weriye Soomaali ah oo si xun ugu dhaawacmay qarax gaari”, 7-dii Disembar 2018, <https://www.hrw.org/news/2018/12/07/somali-journalist-critically-hurt-car-bombing>.

¹¹¹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khaliifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019.

dhacay. Waxaan u sheegay in gaarigeenna uu qarxay. Wuu argagaxay oo dhaqaaqi waayay. Aad ayaan u dhiig baxay. Albaabka gaariga ayaan iska furay oo dhulka ayaan isku tuuray. Weriyaal soo aaday goobta qaraxa ayaa arkay inaan dhaawac ahay, waxayna ii qaadeen cisbitalka Digfeer.”¹¹²

Ismaaciil Sheekh Khaliifa.

Ismaaciil ayaa Muqdisho ku galay dhowr qalliin oo qeybta hoose iyo dhabarka ah. Haseyeeshee dhaawiciisa ayaa aad u darnaa,¹¹³ waxaana bishii Oktoobar 2019 u suuragashay in loo qaado Istanbul kadib dedaal ay sameeyeen asxaabtiisa iyo dad muxsiniin ah.¹¹⁴ Ma jirto cid sheegatay mas'uuliyadda weerarkaasi. Ma jiro wax baaritaan ah oo ay Amnesty International ogtahay oo lagu sameeyay kiiskan ama cid loo maxkamadeeyay.¹¹⁵

Dhowr weriye oo la hadlay Amnesty International ayaa sheegay inay joojiyeen wadashada gawaaridooda, maadaama ay si fudud u beegsan karaan dadka raba inay dilaan ama dhibaateeyaan.

“Waxaan ku noolnahay cabsi joogta ah. Ma kaxaysto gaarigeysa, waxaana isticmaalaa gawaari kala duwan. Qof aan saaxiibo nahay ayaa i keenay goobtan aad igu waraysaneyso, mid kale ayaana u yeeran doonaa marka aan laabanayo. Ma ogid cidda rabta inay ku disho”¹¹⁶

Weriye jooga Muqdisho.

Dadka u ololeeya warbaahinta ayaa u sheegay Amnesty International in shakhsiyaad u shaqeyda dowladda iyo kuwo aan la aqoon ay u hanjabaan oo dhibaateeyaan marka ay ka hadlaan xuquuqda weriyayaasha. Waxa ay sheegeen weerarka lagu qaaday Ismaaciil inuu tusaale u yahay sida ay dhabta u tahay khatarta jirta.¹¹⁷

“Waxa uu ahaa isku-day cad oo lagu dili rabay. Qof ayaa doonayay inuu adduunka dhaafiyo. Waxa uu u doodi jiray xuquuqda suxufiyiinta Soomaaliya iyo warbaahinta guud. Waan ka naxnay weerarkaasi, waxaana u rajeyneynaa caafimaad degdeg ah. Weli cisbitalka ayuu ku jiraa. Dad badan oo wanaaga jecel ayaa u istaagay caawintisa iyo bixinta kharashka caafimaadkiisa. Ma garanayo cidda weerartay, balse waxaan hubaa in loo beegsaday hawsha uu hayay” ayuu yiri Cabdalle Axmed Mumin, Xoghayaha Guud ee Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (SJS).¹¹⁸

Wasiirka Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiiska, Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) ayaa u sheegay Amnesty International in dowladda ay ka go’an tahay xaqiijinta badqabka weriyayaasha iyo in xukuumadu ay samaysay Guddiga Qaran ee Badqabka Weriyayaasha. Waxa uu intaa ku daray in dowladdu ay ka baaraandegayso sidii guddigaasi looga dhigi lahaa mid dastuuri ah. Haseyeeshee wasiirka ayaan faahfaahin dheeraad ah ka bixin arimo ay kamid yihiin awoodda guddiga uu u leeyahay inuu baaro weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha iyo tallaabooyinka gaarka ah ee uu qaaday si loola xisaabtamo dadka geystay xadgudubadii dhacay ee lagula kacay weriyayaasha Soomaaliyeed ee ay kamidka yihiin kuwa lagu xusay warbixintan.¹¹⁹

¹¹² Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khaliifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019.

¹¹³ Sawirro laga qaaday dhaawaca soo gaaray Ismaaciil ayaa muujinaya gubasho baahsan oo qeybta dambe, bowyaha iyo dhabarka ah. Sawiradda ayaa u diiwaangashan Amnesty International.

¹¹⁴ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khaliifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019.

¹¹⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Ismaaciil Sheekh Khaliifa, Istanbul, Turkey, 16-kii Nofembar 2019. Iyo waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019. Qiimeyn ay Amnesty International ku samaysay jawaabta dowladda ee kiiskan.

¹¹⁶ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay weriye (magaciisa la qariyay), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

¹¹⁷ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Nairobi, Kenya, 5-tii Nofembar 2019

¹¹⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Nairobi, Kenya, 5-tii Nofembar 2019

¹¹⁹ Warqadda jawaabta ee uu wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) usoo diray Amnesty International kuna taariikheysan 9-ka Febraayo 2020, u diiwaangashan Amnesty International.

6. WEERARRADA MUUQDA, XARIGA WERIYAYAASHA IYO WEERARRIDA XARUMAHA WARBAAHINTA

Guud ahaan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, laamaha ammaanka gaar ahaan booliska, milateriga iyo saraakiil dowladda ah ayaa sanadihii 2018 iyo 2019 waxa ay weerarro, garaac iyo xarig aan loo meeldeyin kula kaceen weriyayaasha. Inta badan weriyayaasha ayaa la beegsaday xilli ay ku gudajireen hawlahooda war tebinta ee arimaha qaranka, iyadoo ku sugan goobaha ay ka dhaceen weerarrada Al-Shabaab, xilli ay tebinayeen dibedbaxyo ka dhan ah siyaasadaha dowladda ama iyadoo maraya baraha koontaroolada ee Muqdisho.¹²⁰ Laamaha ammaanka ee Muqdisho iyo Puntland ayaa sidoo kale u dhacay, si kumeelgaar ahna u xiray xarumo warbaahineed si ay uga hortagaan tebinta warar aanay jeclaysan ama iyadoo aargoosi ahaan u socda.¹²¹

Inkastoo ay jireen marar ay dowladda ka falcelisay oo ay garawsatay weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha qaar, iyadoo si shaac baxsan u raaligelisay suxufiyiinta ay arintu saamaysay ama sheegtay in askarta mas'uulka ka ahayd weerarka la xiray, baaritaanna lagu samaynayo,¹²² ayaa haddana waxaan jirin baaritaanno micno leh oo lagu sameeyay kiisaskaasi, mana jirin wax maxkamad ah oo la soo taagay kuwa falalkaasi geystay, marka laga reebo hal kiis oo laba askari oo milateri ah loo xiray, maxkamadna loo geeyay jirdil ay u geysteen laba weriye. Askarta ayaa markii dambe la sii daayay kadib markii sida la sheegay ay cafiyeen weriyayaasha.¹²³

¹²⁰ Dhowr waraysi oo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal Soomaali ah oo laamaha ammaanka ay garacaan, dhibaateeyeen, ayna xireen kuwaasoo la waraystay intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019 iyadoo ku sugan Muqdisho ama khadka telefoonka looga waraystay Nairobi.

¹²¹ Xarumaha warbaahin ee ay ciidamada ammaanka weerareen waxaa kamid ah telefshinka Universal ee Muqdisho, xafiisyada telefshinka RTN iyo Idaacadda Daljir ee Puntland.

¹²² Eeg tusaale ahaan, <https://www.facebook.com/Shariifunaa/posts/3321840577841348>, Qoraal uu Cabdinuur Maxamed Axmed, Agaasimaha Warfaafinta ee Xafiiska Madaxweynaha uu soo dhigay bartiisa Facebook.

¹²³ Waraysiyo ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Daahir Cabdi and Siciid Warsame Sabriye, Muqdisho, Soomaaliya, 4-tii December 2019. Labadan weriye ayaa u sheegay Amnesty International in askarta milateriga ee garaacay la xiray, balse codsi uga yimid qoysaskooda awgeed ay iskood u cafiyeen. Labada askari ayaa markaa kadib la sii daayay iyadoo aan loo maxkamadeyn weerarka ay u geysteen weriyayaasha.

WEERARRADA MUUQDA

On **26-ka Juun 2019**, askari ka tirsan milateriga Soomaaliya ayaa garaacay Cabdiqaadir Axmed Maxamed oo ku magac dheer Macallin, ahna weriye ka tirsan Idaacadda Codka Gobolka Banaadir. Cabdiqaadir ayaa lagu garaacay gudaha xarunta maamulka xilli uu tebinayay dabaaldegga Maalinta Xornimada Soomaaliya.

Amnesty International ayaa aragtay muuqaal la soo dhigay baraha bulshada oo muujinaya askariga oo garaacaya, feer la dhacaya, dhulkana ku tuuraya weriyaha xilli ay dadka daawanayeen.¹²⁴

“Waxaan meesha u tegay inaan farxadda la qeybsado shacabka, isla markaana aan tebiyo dabaaldegga, balse waxaan noqday mid jir ahaan iyo maskax ahaanba loo dhibaateeyay” ayuu Cabdiqaadir u sheegay Amnesty International.¹²⁵

Agaasimaha warfaafinta ee xafiiska Madaxweynaha, Cabdinuur Maxamed Axmed, ayaa qoraal uu soo dhigay bartiisa Facebook raagelin uga bixiyay weerarka lagu qaaday weriyaha, waxaana uu sheegay in la xiray askariga dhibaateeyay Cabdiqaadir.¹²⁶

Cabdiqaadir ayaa sheegay in markii dambe saraakiil dowladda ah iyo asxaabta askariga la xiray ay ku cadaadiyeen inuu duubo muuqaal uu ku caginayo askariga, isla markaana uu soo dhigo bartiisa Facebook.¹²⁷ Askariga ayaa si dembi la'aan ah lagu sii daayay kadib markii uu Cabdiqaadir soo dhigay muuqaalka.¹²⁸

“Waan diidi lahaa balse ma jirin cid damaanad qaadaysay ammaankeyga. Haddii aan maxkamad aadi lahaa, ninkaasi aan ka gaban inuu igu garaaco shacabka hortooda kama uusan xishoon lahayn inuu i dillo haddii uu arinka ogaado. Anigoo eegaya tabarteyda iyo ammaankeyga ayaan go'aansaday inaan ka haro arintaasi.”¹²⁹

Cabdiqaadir Axmed Maxamed.

Sidoo kale, **1-dii July 2019**, mas'uul sare oo ka tirsan xafiiska Ra'iisal wasaaraha ayaa weerar muuqda iyo dhibaateyn kale u geystay **Cabdicasiis Bilow Cali**, weriyaha telefishinka caalamiga ah ee Shiinaha (CGTN) iyo sawir qaadihiisa **Maxamed Axmed Maxamed**.¹³⁰ Labada weriye ayaa duubayay dabaaldegga Maalinta Madax bannaanida ay qaadatay Soomaaliya oo ka socday hooyga Ra'iisal Wasaaraha.

Sida uu sheegay Cabdicasiis, mas'uulkan sare ayaa doonayay inay waraystaan, balse ay u sheegeen in macluumaad ku filan ay ka heleen dhanka dowladda, waxa ay u baahan yihiinna tahay ra'yiga dadka caadiga ah ee dabaaldegga ka qeybgalayay. “Waxa uu ka carooday inaan waraysan wayno, marka waxa uu billaabay inuu noo hanjabo oo uu xoog nooga saaro goobta”, ayuu yiri Cabdicasiis. “Waxa uu ku sigtay inuu naga jabiyo kaamerada aan sidanay” ayuu sii raaciyay.

Cabdicasiis ayaa markii dambe bartiisa Twitter-ka uga hadlay waxa ku dhacay iyo sida uu sarkaalkaasi “khalkhal u geliyay dedaallada uu ku waraysanayay dhalinyarada.... iyo in arinta ay dhacday xilli ay arkayeen shacabka halkaa u tegay inay u dabaaldegaan Maalinta Madax bannaanida....” Waxa uu sidoo kale ugu baaqay dowladda Soomaaliya inay xaqiijiso in mas'uuliyiinteeda ay ilaaliyaan xuquuqda weriyayaasha ay u leeyihiin inay ku shaqeeyaan jawi xor iyo ammaan ah.¹³¹

Waxyar kadib markii uu baahiyay qoraalkaas, ayaa waxaa Cabdicasiis soo wacay mas'uuliyiin ka tirsan xafiiska Ra'iisal Wasaaraha kuwaasoo ka codsaday inuu qoraalka ka saaro bartiisa Twitter-ka, balse waa uu diidday. Waxaa markii dambe la soo hadlay mas'uuliyiin sare oo ka tirsan xafiiska Ra'iisal Wasaaraha

¹²⁴ Daawo, <https://www.facebook.com/Daacad1414/videos/2274618195987527/> muuqaal Facebook la soo geliyay Juun 2019 oo muujinaya askariga oo garaacaya, feer la dhacaya, dhulkana ku tuuraya weriyaha.

¹²⁵ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

¹²⁶ Eeg <https://www.facebook.com/Shariifunaa/posts/3321840577841348>, qoraal uu agaasimaha warfaafinta ee xafiiska Madaxweynaha, Cabdinuur Maxamed Axmed soo dhigay bartiisa Facebook. 23-kii Janaayo 2020, Amnesty International ayaa warqado u dirtay dowladda Soomaaliya kuwaasoo su'aalo gaar ah looga weydiinayay tallaabooyinka ay qaaday si ay u baarto una maxkamadeyso kuwa weeraray weriyayaasha iyo xarumaha warbaahinta, oo uu kamid yahay kiiskan. Marka la qorayay warbixinta, ma jirin wax jawaab ah oo kiiskan khuseysa oo na soo gaaray

¹²⁷ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

¹²⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

¹²⁹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

¹³⁰ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Bilow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019.

¹³¹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Bilow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019. Sidoo kale eeg qoraalka uu Twitter-ka soo dhigay, <https://twitter.com/AbdulBillowAli/status/1145767371312963589?s=20>.

kuwaasoo ka raaligeliyay isaga iyo sawir qaadihiisaba waxa ku dhacay. “Waxa ay iga codsadeen inaan tiro qoraalka ama aan ku daro qeyb aan dowladda ugu mahadcelinayo sida ay arinta usoo faragelisay. Waxaan qaatay talada dambe maadaama aan ka cararay cadaadis dheeraad ah.”¹³²



Weriye Cabdicasiis Bilow oo la jooga weriyayaal kale oo maxalli iyo caalami ah xilli ay tebinayeen weerar ay dagaalyahannada Al-Shabaab ku qaadeen saldhig boolis oo ku yaalla Afgooye. (Oktobar 2016). Cabdicasiis ayaa waxaa weerar muuqda ku qaaday sarkaal dowladda ka tirsan oo ku sugnaa dabaaldega Maalinta Madax bannaanida Soomaaliya oo ka socotay hoyga Ra'iisal Wasaaraha.

4-tii Nofembar 2019, askar ka tirsan booliska ayaa garaacay oo dhibaateeyay weriyayaal ay kamid yihiin **Jaamac Nuur Axmed** oo u shaqeeya AlJazeera qeybta Carabiga iyo **Faysal Cumar Xaashi** oo ka tirsan Reuters.¹³³ Weriyayaasha ayaa ka soo laabtay garoonka diyaaradaha ee Muqdisho halkaasi oo ay warbixin ka diyaarinayeen xaaladda bani'aadannimo ee ka dhalatay fatahaadda ku dhufatay gobollo kamid ah dalka. Booliska ayaa rasaas hawada u riday, qoryana ku taagay weriyayaasha si ay u joojiyaan. Kadibna waxa ay garaaceen oo feer la dhaceen qaar kamid ah weriyayaasha.¹³⁴ Laba kamid ah ayuu dhaawac fudud ka soo gaaray garaacaasi. Booliska ayaa muddo kooban haystay laba kaamero oo ay lahaayeen weeriyayaasha AlJazeera.¹³⁵

Agaasimaha warfaafinta ee xafiiska Madaxweynaha, Cabdinuur Maxamed Axmed, ayaa sheegay in 5-tii Nofembar 2019 laba askari oo boolis ah loo xiray dhibaataada loo geystay weriyayaashaasi,¹³⁶ balse Amnesty International ma aanay arkin caddeyn muujinaysa in askartaasi la xiray oo loo maxkamadeeyay garaaca ay u geysteen weriyayaasha.¹³⁷

Faysal Cumar Xaashi oo u shaqeeya Reuters ayaa Amnesty International u sheegay in labadii sano ee la soo dhaafay ay adkaatay shaqadiisa sawir-qaadennimada ah ee Muqdisho. “Waxaan dhibaatooyin sii kordhaya kala kullanaa laamaha ammaanka, balse kama niyad jabeyno oo waan sii wadi donnaa shaqadeenna” ayuu yiri Faysal.¹³⁸

Ma cadda sababta ay booliska xilligaasi u beegsadeen weriyayaasha, balse waxa ay qeyb ka tahay bartilmaameedsi ballaaran oo ka jira Muqdisho iyo maamul goboleedyada, taasoo ay muujinayso tirada sii

¹³² Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Bilow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019. 23-kii Janaayo 2020, Amnesty International ayaa warqado u dirtay dowladda Soomaaliya kuwaasoo su'aalo gaar ah looga weydiinayay tallaabooyinka ay qaaday si ay u baarto una maxkamadeeyso kuwa weerarray weriyayaasha iyo xarumaha warbaahinta, oo uu kamid yahay kiiskan. Marka la qorayay warbixinta, ma jirin wax jawaab ah oo kiiskan khuseysa oo na soo gaaray.

¹³³ Weriyayaasha kale ee gaariga la saarnaa ayaa kala ah, Cabdinaasir Abukar Xared iyo Maxamed Cali Dahir oo ka tirsan Aljazeera.

¹³⁴ Amnesty International telephone interview with Feisal Omar Hashi, 27 January 2020, Mogadishu, Somalia.

¹³⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Faysal Cumar Xaashi, 27-kii Janaayo 2020, Muqdisho, Soomaaliya; Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu Muqdisho, Soomaaliya, 3-dii Disembar 2019. Qiimeyn ay Amnesty International ku samaysay jawaabta dowladda ee kiiskan.

¹³⁶ <https://www.facebook.com/Shariifunaa/posts/3711486702210065>

¹³⁷ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Faysal Cumar Xaashi, 27-kii Janaayo 2020, Muqdisho, Soomaaliya. Qiimeyn ay Amnesty International ku samaysay jawaabta dowladda ee kiiskan.

¹³⁸ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Faysal Cumar Xaashi, 27-kii Janaayo 2020, Muqdisho, Soomaaliya

badanaysa ee weerarrada iyo xariga lala beegsado weriyayaasha. Ugu yaraan 14 weriye ayaa Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya loogu geystay weerarro muuqda sanadihii 2018 iyo 2019.¹³⁹ Sida uu sheegay Maxamed Ibraahim Macallimuu, Xoghayaha Guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, weerarrada sii banadaya ee lagu hayo weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee saxaafadda ayaa muujinaya duulaanka sii kordhaya ee lagu hayo xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta ee dalka.

“Qab-qabashada, xariga iyo weerarrada lagu hayo weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta ayaa u muuqda kuwo lagu doonayo in loogu cagajugleeyo suxufiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta. Waxa ay aakhirka keeni doonaan faafreebid iyo in la wiiqo warbaahinta madaxa bannaan,”¹⁴⁰ ayuu yiri.

3-dii Febraayo 2020, Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada ayaa ka soo jawaabtay su'aalo aan ka weydiinay waxyaabaha aan ka ogaannay weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha iyo tallaabooyinka ay dowladda qaaday si ay u baarto una maxkamadeyso dadka weerarka geystay, balse jawaabta ayaan si waafi ah u qeexin tallaabooyinka ay dowladdu qaaday si ay wax uga qabato kiisaska aan u tirinay. Jawaabtu waxay ahayd sidan:

“Arinta ku aaddan maxkamadeyta saraakiisha dowladda ee meel ka dhaca ku sameeya madax bannaanida warbaahinta, hay'adaha ammaanka iyo kuwa cadaaladda ayaa dhowr jeer xiray, dacwadna kusoo oogay saraakiil lagu helay inay ku xadgudbeen xuquuqda weriyayaasha. Dhammaan saraakiisha lagu helay inay geysteen xarig, weerar muuqda iyo waxyeelaynta qalabka ayaa waxaa la marsiiyay ciqaabta ay mudnaayeen si waafaqsan sharciga”¹⁴¹

XARIGA WERIYAYAASHA

8-dii Febraayo 2018, booliska Jubaland ayaa magaalada Kismaayo ku xiray **Saabir Cabdiqaadir Warsame** oo u shaqeynayay telefishinka gaarka loo leeyahay ee Somali Cable.¹⁴² Saabir ayaa u sheegay Amnesty international in xilliga ay qabanayeen booliska maamulka Jubaland uu dadweynaha Kismaayo ka ururinayay aragtidooda ku aaddan sanad guuradii koobaad ee ka soo wareegtay markii la doortay Madaxweynaha Soomaaliya, Maxamed Cabdullaahi Farmaajo. “Waxay igu amreen inaan dhigo kaameradayda, waxaana ay ii wateen Xarunta Dembi Baarista Kismaayo, kadibna waxay ii gudbiyeen xabsiga Fiat,” ayuu yiri.¹⁴³

Saabir ayaa xirnaa afar maalmood, waxaana la sii daayay 11-kii Febraayo 2018.¹⁴⁴ Ma jirin maxkamad la soo taagay ama warqad waaran ah oo la tusay ka hor inta aan la xirin.¹⁴⁵ Waxa uu sheegay in booliska ay si xun u garaaceen inta uu xirnaa, ayna su'aalo ka weydiyeen sababta uu u duubay gaari siday dhuxul, arintaasi oo uu Saabir beeniyay.¹⁴⁶ Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ayaa 2012 mamnuucay dhuxusha laga dhoofiyo Soomaaliya, ka warramida dhuxushana waxaa loo arkaa inay kamid tahay arimaha xasaasiga ah.¹⁴⁷

“Habeennimadii 10-kii Febraayo, dhowr askari oo boolis ah ayaa iga saaray meeshii aan ku xirnaa, indhaha iga xiray, kadibna igu qaatay buutka gaariga. Waxay i geeyeen xeebta halkaasi oo ay si xun iigu garaaceen. Biyaha ayay igu quusiyeen, mararka qaarna waxay isku dayeen inay i ceejiyaan. Dhiig ayaan ka keenay afka iyo sankaba, illaa aan ka miyir-daboolmay. Subixii xigay ayaa waxaan is arkay anigoo ku jira xabsi, ayna i caawinayaan qaar kamid ah maxaabiista. Askari Dembi Baarista ka tirsan oo i yaqaana ayaa subaxaa ii yimid, waxaana uu ka naxay dhibaataada la ii geystay. Waxa uu amray in la i sii daayo, waxaana la i sii daayay 11-kii Febraayo,” ayuu Saabir u sheegay Amnesty International.¹⁴⁸

¹³⁹ Tiradan waa madda ay diiwaangeliyay Amnesty International, balse waa ay ka badnaan kartaa.

¹⁴⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu Muqdisho, Soomaaliya, 3-dii Disembar 2019.

¹⁴¹ Jawaab email ah oo ay Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada soo dirtay, la helay 3-dii Febraayo 2020, una diiwaangashan Amnesty International.

¹⁴² Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019.

¹⁴³ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019. “Fiat” waa xarun ku taalla Kismaayo oo ay hay'adda sirdoonka Jubaland si kumeelgaar ah dadka ugu xirto.

¹⁴⁴ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, Xoghayaha Guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019 iyo Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019.

¹⁴⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019.

¹⁴⁶ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019.

¹⁴⁷ Qaraadka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay 2036 (2012), oo lagu ansixiyay kulankii uu Golaha yeeshay ee 6718-aad, 22-kii Febraayo 2012. [https://www.un.org/ga/search/view_doc.asp?symbol=S/RES/2036\(2012\)](https://www.un.org/ga/search/view_doc.asp?symbol=S/RES/2036(2012)).

¹⁴⁸ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019.



Saabir Cabdiqaadir Warsame oo telefshinka gaarka loo leeyahay ee Somalia Cable uga soo warramayay magaalada Kismaayo ayay booliska maamul goboleedka Jubaland xireen, jirdilna u geysteen bishii Febraayo 2018. © Saabir Cabdiqaadir Warsame

Saabir ayaa sheegay in dhacdadaasi kadib uu Kismaayo ka shaqeysan waayay, uuna go'aansaday inuu u cararo Muqdisho.¹⁴⁹ Kadibna waxa uu ka sii cararay Muqdisho oo waxa uu u baxsaday dal kale, maadaama ay weli hanjabaad uga imaanaysa laamaha ammaanka ee Jubaland.



Nuur Ismaaciil Sheekh ayaa Muqdisho lagu xiyay Nofembar 2018 kadib markii uu Facebook-giisa ku dhaliilay mas'uuliyiin dowladda ah. Dalka ayuu ka baxsaday Nofembar 2019 kadib markii ay u hanjabeen mas'uuliyiin dowladda katirsan. © Nuur Ismaaciil Sheekh

20-kii Nofembar 2018, booliska magaalada Muqdisho ayaa xiray **Nuur Ismaaciil Sheekh**, 30 jir tifaftire ka ahaa website-ka Shaaciye. Nuur ayaa u sheegay Amnesty International inuu bartiisa Facebook ku baahiyay maqaallo iyo muuqaallo uu ku dhaliilay mas'uuliyiin sar sare oo ka tirsan dowladda. Waxaa markii dambe damaanad lagu sii daayay 2-dii Disembar kadib 12 maalmood oo uu xirnaa, afar uu ku xirnaa xarunta Dembi barista iyo sideed maalmood oo lagu hayay Xabsiga Dhexe ee Muqdisho.¹⁵⁰

Nuur ayaa u sheegay Amnesty International in 24-kii Nofembar la geeyay Maxkamadda Gobolka Banaadir, halkaas oo ay saraakiisha booliska garsooraha ka codsadeen inay sii hayaan maalmo dheeraad ah, balse laga diidday, isagoo garsooruhu sheegay in weriyaha uu xaq u leeyahay xoriyadda hadalka iyo war tebinta.

“Garsooraha ayaa la yaabay inay igu eedeeyaan inaan shacabka kicinayay, waxaana uu ka dalbaday inay i sii daayaan, balse waxay sheegeen in mas'uul sare uu rabo in la i sii hayo dhowr maalmood. Garsooraha ayaa ka carooday

¹⁴⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Saabir Cabdiqaadir Warsame, goobta waa la qariyay, 3-dii Disembar 2019.

¹⁵⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Nuur Ismaaciil Sheekh, goob aan la sheegin, 7-dii Nofembar 2019.

sheegashadooda, balse wuu ka oggolaaday inay i sii hayaan” ayuu u sheegay Amnesty International. “Waa wax laga naxo in maxkamadaha aanay madax bannaani haysan. Sideed maalmood oo dheeraad ah ayaan ku sii jiray Xabsiga Dhexe ee Muqdisho” ayuu sii raaciyay. Nuur ayaa 2-dii Disembar¹⁵¹ waxaa lagu soo daayay damaanad. Weriyaan ayaa la xiray waaran la'aan, mana uusan helin qareen u doodda.

28-kii Mey 2019, booliska Muqdisho ayaa xabsiga dhigay **Cali Adan Mumin**, weriye soo caan baxay oo ka tirsan idaacadda iyo telefishinka Goobjoog iyadoo aan haysan waaran. Cali ayaa u sheegay Amnesty International in la geeyay Maxkamadda Gobolka Banaadir laguna eedeeyay inuu aflagaadeeyay mas'uuliyiin qaran, uu hakad geliyay hawlaha dowladda, faafiyayna dacaayad, isla markaana uu “khatar ku yahay bulshada”.¹⁵²

Sida ku cad warqadaha maxkamadda oo ay arkeen Amnesty International iyo qareenka u dooday Cali, weriyaha ayaa lagu eedeeyay inuu “khatar ku yahay bulshada” taasi oo la xiriirta qoraal uu Facebook soo dhigay oo uu ku sheegay inuu helay nuqullo la soo dusiyay oo ka tirsan imtixaanka qaran ee dugsiyada sare kuwaasoo uusan bulshada la wadaagi doonin.¹⁵³ 29-kii Mey 2019, garsoore ka tirsan Maxkamadda Gobolka Banaadir ayaa meesha ka saaray kiiska ay booliska u haysteen Cali, waxaa se uu amray in xabsiga lagu sii hayo illaa inta uu ka dhammaanayo imtixaanka.

“Wax la aqbali karo ma ahayn in garsooraha uu meesha ka saaro dacwadda loo haystay weriyaha, kadibna uu go'aamiyay in xabsiga lagu sii hayo” ayuu Amnesty International u sheegay qareenka Cali oo lagu magacaabo Cabdiraxmaan Xasan, isagoo la yaaban go'aanka. Cali ayaa markii dambe la sii daayay 31-kii Mey 2019.¹⁵⁴

14-kii Oktoobar 2019, Cabdicasiis Xasan Macallin, oo ku magac dheer Cabdicasiis Foolyarey, oo si madax bannaan ula shaqeeya warbaahin kala duwan oo uu kamid yahay telefishinka Somali Cable, ayaa laga qabtay gurigiisa, waxaana lagu xiray saldhigga booliska ee magaalada Jowhar. Weriyaan ayaa la xiray kadib markii uu tebiyay dibedbax maalintaasi ka dhacay magaalada Jowhar. Laamaha ammaanka ayaa habeenkii ka horreeyay magaalada ka sameeyay hawlgal ay kusoo qabqabteen dhowr qof kadib weerarkii 13-kii Oktoobar lagu dilay gudoomiye kuxigeenka Shabeellaha dhexe iyo wiil uu dhalay. Ka hor inta aan weriyaha gurigiisa laga wadan ayaa waxaa soo wacay oo telefoonka uga hanjabay mas'uuliyiin sare oo ka tirsan maamulka HirShabelle.¹⁵⁵

“Boolisku kuma aysan farxin inaan tebiyay warka dibedbaxa aana sawirro ka qaaday dadka mudaharaadayay. Waxay ii sheegeen inaan warka ugu dhigi lahaa in booliska ay fuliyeen hawlgal ammaanka lagu sugayo, ayna soo qabqabteen dad argagixiso ah. Mid kamid ah ayaa ii sheegay in cashar la ii dhigi doono. Waxay i xireen waaran la'aan,”¹⁵⁶ ayuu yiri Cabdicasiis. Maalintii xigtay ayaa la sii daayay isagoo aan maxkamad la horgayn.

Amnesty International ayaa diiwaangeliyay 11 kiis oo dheeraad ah kuwaasoo weriyayaasha lagula kacay xarig aan loo meeldeyin iyo xabsi oo ka dhacay Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya iyo Puntland sanadihii 2018 iyo 2019.¹⁵⁷

¹⁵¹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Nuur Ismaaciil Sheekh, goob aan la sheegin, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁵² Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cali Adan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019. Iyo waraysi ay Amnesty International la yeelatay Xasan Maxamud Maxamed, Agaasimaha warbaahinta Goobjoog, Muqdisho, Soomaaliya, 17 July-kii 2019.

¹⁵³ Warqadaha maxkamadda oo u diiwaangashan Amnesty International;

¹⁵⁴ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay qareen Cabdiraxmaan Xasan, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019. Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cali Adan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019. Iyo waraysi ay Amnesty International la yeelatay Xasan Maxamud Maxamed, Agaasimaha warbaahinta Goobjoog, Muqdisho, Soomaaliya, 17 July-kii 2019.

¹⁵⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Xasan Macallin, Jowhar, Soomaaliya, 13-kii Nofembar 2019.

¹⁵⁶ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Xasan Macallin, Jowhar, Soomaaliya, 13-kii Nofembar 2019.

¹⁵⁷ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

WEERARRIDA XARUMAHA WARBAAHINTA

30-kii Maarso 2019, boolis hubaysan oo ah kuwa federaalka ayaa u dhacay xafiiska telefishinka Universal ee Muqdisho, waxaana ay rasaas ku fureen gudaha xaruntaasi.¹⁵⁸Ma cadda sababta loo weerarray xaruntaasi warbaahinta, haseyeeshee Cabdullaahi Axmed Nuur oo ah madaxa wararka iyo barnaamijyada ee telefishinkaasi u qaabilsan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa sheegay in ciidanka soo weerarray ay sheegeen inay ka socdeen waaxda caanshuurta, ayna xarunta ka qaadayaan canshuurta lagu leeyahay.¹⁵⁹ Cabdullaahi ayaa sheegay in aysan caadi ahayn in booliska ay qaabkaasi oo kale usoo galaan xarunta telefishinka, iyadoo xilliga la soo weerarray ay caadi u socdeen barnaamijta telefishinka.¹⁶⁰

Kadib muran dhexmaray booliskaasi iyo maamulka telefishinka, ayaa askarta waxa ay billaabeen inay rasaas ku dhex ridaan xarunta, taasoo keentay in weriyayaasha shaqeynayay ay kala cararaan oo gabbaad raadsadaan. Rasaasta ayaa muddo dhacaysa illaa inta ay goobta ka soo gaarayaan milateriga ilaalada u ah madaxtooyada oo u dhaw xarunta Universal, kuwaasoo hubka ka dhigay booliska weerarka geystay.¹⁶¹ Inkastoo aanay cidna ku dhaawacmin shaqaqaadaasi, ayaa haddana Cabdullaahi waxa uu sheegay in muddo saacado ah ay hakad galeen barnaamijta telefishinka iyo in hal kaamero ay ku burburtay weerarka.¹⁶²



Xafiiska Telefishinka Universal ee Muqdisho. © Universal TV

Maxamed Ibraahim Macallimuu, Xoghayaha Guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed ayaa u sheegay Amnesty International in weerarkaasi uu ahaa isku-day kale oo ay booliska ku cabsi gelinayeen weriyayaasha Soomaaliya ayna ugu cagajugleynayeen maamulka telefishinka Universal si ay uga horjoogsadaan gudashada hawlaha warbaahineed.¹⁶³

Cabdinuur Maxamed Axmed, agaasimaha warfaafinta ee xafiiska Madaxweynaha ayaa qoraal uu soo dhigay bartiisa Facebook ku cambaareeyay weerarka, isagoo sheegay in wax aan la aqbali karin ay tahay in qeyb kamid ah booliska oo hawshoodu tahay inay ilaaliyaan sharciga ay qaadeen weerarka noocaasi ah. Waxa uu intaa ku daray in weerarkaasi uu ahaa mid lagu soo qaaday xoriyadda hadalka, iyo in dadka lagu tuhunsan

¹⁵⁸Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, madaxa wararka iyo barnaamijyada telefishinka Universal u qaabilsan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019 iyo waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, Xoghayaha Guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019. Sidoo kale eeg, Golaha Difaacidda Weriyayaasha, "Rag hubaysan oo weerarray telefishinka Universal, rasaasna ku furay xaruntiisa" 3-dii Abriil 2019, <https://cpj.org/2019/04/somalia-raid-universal-tv-shooting.php>.

¹⁵⁹Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, madaxa wararka iyo barnaamijyada telefishinka Universal u qaabilsan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019

¹⁶⁰Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, madaxa wararka iyo barnaamijyada telefishinka Universal u qaabilsan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019

¹⁶¹Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, madaxa wararka iyo barnaamijyada telefishinka Universal u qaabilsan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019 iyo waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, Xoghayaha Guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019.

¹⁶²Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdullaahi Axmed Nuur, madaxa wararka iyo barnaamijyada telefishinka Universal u qaabilsan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii Nofembar 2019

¹⁶³Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Macallimuu, Xoghayaha Guud ee Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 21-kii July 2019.

yahay la horgeyn doono cadaaladda.¹⁶⁴ Haseyeeshee baaritaanka Amnesty International laguma ogaan cid loo qabtay ama loo maxkamadeeyay weerarkaasi.¹⁶⁵

3-dii Febraayo 2020, agaasimaha warfaafinta ee Madaxtooyada ayaa email uu soo diray Amnesty International ku yiri:

“Arinta weerarka kagu qaaday telefishinka Universal, qaabka uu agaasimaha uga falceliyay weerarka ayaa muujinaya go’aanka dowladda iyo sida ay uga xuntahay weerar kasta oo ka dhan ah warbaahinta.”¹⁶⁶Haseyeeshee jawaabta ayaan sharraxaad ka bixin tallaabooyinka ay dowladdu qaaday – haddiiba ay jiraan – si ay wax uga qabato weerarka lagu qaaday telefishinka Universal.

Askar ka tirsan booliska Puntland ayaa weerarray xarumaha **Radio Daljir** ee Garowe iyo Bosaaso **14-kii, 15/16-kii Sebtembar 2019**, waxaana ay muddo kooban damiyeen anteenada idaacadda ee Bosaaso 16-kii Sebtembar 2019. Askarta ayaa sidoo kale handaday weriyayaasha xilligaasi shaqeynayay, waxaana ay ku amreen inay xarumaha ka baxaan iyagoo baaritaan kula dhaqaaqay.¹⁶⁷



Xafiiska Radio Daljir ee Bosaaso

Sida ay sheegeen dadka u ololeeya warbaahinta iyo shakhsiyaad ogaa tallaabooyinka horseeday weerarrada, maalmo ka hor inta aanay boolisku gelin xarumaha Radio Daljir ayaa idacaaddaasi waxa ay baahisay waraysiyo iyo warbixinno ku aaddan maxbuus la sheegay inuu u dhintay jirdil ay Bosaaso ugu geysteen

¹⁶⁴Eeg https://www.facebook.com/Shariifunaa/posts/3096784440346964?_rdc=1&_rdr, Qoraal uu bartiisa Facebook soo dhigay Cabdinuur Maxamed Aemed 30-kii Maarso 2019.

¹⁶⁵23-kii Janaayo 2020, Amnesty International ayaa warqado u dirtay dowladda Soomaaliya kuwaasoo su’aalo gaar ah looga weydiinayay tallaabooyinka ay qaaday si ay u baarto una maxkamadeyso kuwa weerarray weriyayaasha iyo xarumaha warbaahinta, oo uu kamid yahay kiiskan. Marka la qorayay warbixinta, ma jirin wax jawaab ah oo kiiskan khuseysa oo na soo gaaray.

¹⁶⁶Jawaab email ah oo ay Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada soo dirtay, la helay 3-dii Febraayo 2020, una diiwaangashan Amnesty International.

¹⁶⁷Isutagga Suxufiyiinta Caalamiga ah (IFJ), “Soomaaliya: Booliska oo baaritaan ku sameeyay laba idaacadood oo Puntland ku yaal” 16-kii Sebtembar 2019, <https://www.ifj.org/media-centre/news/detail/category/press-freedom/article/somalia-police-search-two-prominent-radio-stations-in-puntland.html?share>.

Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed, “Booliska Puntland oo galay Radio Daljir, muddo kooban hawada ka saaray anteenada idaacadda”, 16-kii Sebtembar 2019, waxaa laga heli karaa: <https://sjsyndicate.org/2019/09/16/puntland-police-carry-out-multiple-raids-on-radio-daljir-and-briefly-shut-down-radio-transmitter/>

laamaha ammaanka.¹⁶⁸ Boolisku ma aanay keenin amar maxkamadeed oo u oggolaanaya inay baaraan xarumaha idaacadda, ayna hawada ka saaraan war-laliyaha.¹⁶⁹

15-kii Oktoobar 2019, askar ka socota booliska Puntland qeybta dembi baarista ayaa xoog ku galay xarunta telefishinka gaarka loo leeyahay ee **RTN** oo ku leeyahay magaalada Garowe, waxaana ay handadeen weriyayaasha xilligaasi shaqeynayay.¹⁷⁰ Sida ay sheegeen weriyayaal u shaqeeya RTN, oo uu kamid yahay barnaamij soo saarahooda Nairobi, Cabdicasiis Axmed Barrow, booliska ayaa raadinayay Cabdiqani Axmed Maxamed oo ku magac dheer Cabdiqani Fantastic kana mid ah weriyayaasha telefishinkaasi ee Garowe, kaasoo baahiyay warbixin¹⁷¹ ay ku jiraan waraysiyo la sheegay in lagu dhaliilay ka qeybgalkii madaxweynaha Puntland ee caleema saarkii muranka dhaliyay ee Kismaayo ka dhacay 14-kii Oktoobar.¹⁷² Booliska ayaa muddo kooban baaray xafiisyada telefishinka iyaga oo aan soo bandhig wax waaran ah, kadibna waxa ay weriyayaashii shaqeynayay ku amreen inay xarunta xiraan, meeshana ka tagaan.¹⁷³

“Boolisku waxa ay sheegeen inay raadinayeen Cabdiqani Fantastic, kaasoo aan xilligaasi xafiiska joogin; kadibna waxa ay u sheegeen weriyayaasha goobta ku sugnaa inay xafiiska xiraan iyagoo aan siin faahfaahin dheeraad ah,” ayuu yiri Cabdicasiis Axmed Barrow.¹⁷⁴

Weriyayaasha goobta ku sugnaa ayaa Cabdiqani Fantastic ku wargeliyay in booliska ay raadinayaan.¹⁷⁵

“Waan naxay markii ay weriyayaasha i soo waceen oo ay ii sheegeen in booliska ay i raadinayaan. Ma garan karin khalad aan galay. Waxaan ku dhuuntay guri ay leeyihiin qaraabadeyda oo Garowe ku yaalla, balse booliska ayaa isoo wacay oo ii sheegay inaan is geeyo saldhigga si su’aalo la ii weydiyo. Waan diidday, waayo waxaan ogaa inay i xiri rabeen,” ayuu yiri Cabdiqani Fantastic.¹⁷⁶

Inkastoo uu weriyahaasi ka badbaaday xarig, ayaa haddana suxufiyiinta RTN oo uu kamid yahay Cabdiqani Fantastic waxa ay sheegeen in weerarkaasi iyo wicitaannada xigay ee booliska ay si cad u muujinayeen hanjabaadda iyo cagajugleynta maamulka Puntland oo ku wajahayo warbixinnada lagu dhaliilo.¹⁷⁷

¹⁶⁸ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay shakhsi ogaa tallaabooyinka horseeday weerarrada boolisku ku qaadeen Radio Daljir, goobta waa la aqriyay, 12-kii Disembar 2019. Sidoo kale eeg, <https://www.daljiir.com/ciidamada-gaarka-ah-ee-janaraal-muxyadin-oo-lagu-eeedeeyey-dil-maxbuus-iy-dhac-hanti-dhegayso/> lifaaqa warbixinta uu Radio Daljir ka diyaariyay jirdilka uu ku eeedeeyay booliska.

¹⁶⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay shakhsi ogaa tallaabooyinka horseeday weerarrada boolisku ku qaadeen Radio Daljir, goobta waa la aqriyay, 12-kii Disembar 2019. Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Nairobi, Kenya, 29-kii Nofembar 2019.

¹⁷⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdiqani Axmed Maxamed, Cabbiqani Fantastic, Garowe, Puntland, Soomaaliya, 03-dii Diembar 2019, Sidoo kale eeg, Ururka Suxufiyiinta Soomaliyeed, “Booliska Puntland oo galay xafiiska RTN TV ee Garowe, u hanjabay weriyayaal kadib ra’yiga dadweynaha oo ay baahiyeen”, 15-kii Oktobar 2019, waxaa laga heli karaa: <https://sisyndicate.org/2019/10/15/puntland-police-raid-rtn-tv-office-in-garowe-threaten-journalists-after-vox-pop/>

¹⁷¹ Barta YouTube ee telefishinka RTN oo Soomaali, waxaa laga heli karaa: <https://www.youtube.com/watch?v=rxF6KsMslY4>

¹⁷² Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Axmed Barrow, Nairobi, Kenya, 03-dii Disembar 2019.

¹⁷³ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Axmed Barrow, Nairobi, Kenya, 03-dii Disembar 2019.

¹⁷⁴ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Axmed Barrow, Nairobi, Kenya, 03-dii Disembar 2019.

¹⁷⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdiqani Axmed Maxamed, Cabbiqani Fantastic, Garowe, Puntland, Soomaaliya, 03-dii Diembar 2019,

¹⁷⁶ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdiqani Axmed Maxamed, Cabbiqani Fantastic, Garowe, Puntland, Soomaaliya, 03-dii Diembar 2019,

¹⁷⁷ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Axmed Barrow, Nairobi, Kenya, 03-dii Disembar 2019, iyo, Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdiqani Axmed Maxamed, Cabbiqani Fantastic, Garowe, Puntland, Soomaaliya, 03-dii Diembar 2019,

7. WERIYAYAASHA DIBEDDA U CARARAY HANJABAAD AWGEED

Amnesty International ayaa diiwaangelisay ugu yaraan sideed weriye oo Soomaaliya ka cararay tan iyo Oktoobar 2018.¹⁷⁸ Todobo kamid ah weriyayaasha la hadlay Amnesty International ayaa sheegay inay dalka uga soo tageen hanjabaado khatar geliyay naftooda. Hanjabaadaha ayaa si toos ah ula xiriira shaqadooda. Laba kamid ah oo kala ah Munasar Maxamed Cabdi iyo Zakariye Maxamud Timacade ayaa hadda ku sugan Sweden oo ay magangelyo ka codsadeen. Cali Aadan Mumin waxa uu ku sugan yahay Turkiga,¹⁷⁹ halka shanta kale ay ku sugan yihiin goobo aan la shaacin karin ammaankooda awgii.¹⁸⁰

Cali Aadan Mumin, weriyaha u shaqeeya warbaahinta Goobjoog ee la xiray lana maxkamadeeyay Mey 2019, ayaa u sheegay Amnesty International in cadaadis xooggan iyo hanjabaad uu kala kulmay sarkaal ka tirsan NISA oo Muqdisho ku sugan, kaasoo u haysta warbixinnadiisa dhaliisha leh, sidaana uu ku go'aansaday in Janaayo 2020 uu dalka ka soo tago. Cali ayaa hadda ku sugan Turkiga, waxaana uu sheegay inuu ka nasanayo shaqadiisa Muqdisho hanjabaada awgeed, isla markaana uu qiimeynayo xaaladda iyo haddii ay u suurtagali karto inuu ku laabto Muqdisho.¹⁸¹



Cali Aadan Mumin, oo ka shaqeeya Goobjoog ayaa la xiray Mey 2019, wuxuuna dalka ka cararay Janaayo 2020 kadib hanjabaad uga timid sarkaal NISA ah. Turkiga ayuu hadda joogaa. © Cali Aadan Mumin

¹⁷⁸ Waxa ay kala yihiin Munasar Maxamed Cabdi, Zakariye Maxamud Timacade, Nuur Ismaaciil Sheekh, Xasan Kaafi Xuseen, Cabdishakur Xuseen Maxamed, Cali Aadan Mumin, Saabir Cabdiqaadir Warsame iyo weriye kale oo codsaday inaan la magacaabin.

¹⁷⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cali Aadan Mumin, 27-kii Janaayo 2020, Ankara, Turkey.

¹⁸⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Munasar Maxamed Cabdi, Zakariye Maxamud Timacade iyo Nuur Ismaaciil Sheekh 18-kii Sebtembar 2019 iyo 7-dii Nofembar 2019 iyagoo ku sugan Sweden iyo goob aan la shaacin.

¹⁸¹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cali Aadan Mumin, 27-kii Janaayo 2020, Ankara, Turkey.



Munasar Maxamed Cabdi, oo ka tirsanaa warbaahinta Dalsan ayaa Soomaaliya ka cararay Oktoobar 2018. Waxa uu hadda magangelyo ka codsaday Sweden. © Munasar Maxamed Cabdi

Munasar Maxamed Cabdi, oo ka tirsanaa weriyayaasha warbaahinta Dalsan, ayaa ka cararay Soomaaliya bishii Oktoobar 2018, kadib markii ay u hanjabeen dad kasoo jeeda beel saamayn weyn ku leh dalka oo ka carooday warbixinno uu ka diyaariyay nin beesha Baantu-ga ah oo Muqdisho lagu gubay kadib markii wiil uu adeer u yahay uu jeclaaday oo damcay inuu guursado gabar ka tirsan beesha awoodda leh.¹⁸²

“Dadka u dhashay beesha ay ka soo jeedo gabadha uu ninka Baantu-ga ah guursaday ayaa ka carooday warbixinnadeyda, marka waxay iigu hanjabeen dil. Dhowr maalmood ayaan dhuumasho ku jiray, balse markii dambe waan u adkeysan waayay cadaadiska. Dalka ayaan ka soo cararay, waxaana hadda magangelyo ka codsaday Sweden,”¹⁸³ ayuu Munasar u sheegay Amnesty International.

“Cidna igama difaaci karin hanjabaadaha iiga imanayay xubnaha beeshaasi awoodda badan, xitaa dowladda. Dad aan saaxiibbo dhaw nahay ayaa igula taliyay inaan dalka isaga baxo, marka waxaan u dhoofay Turkiga, kadibna Sweden ayaan soo aaday” ayuu raaciyay.

Xasan Cali Geesey, agaasimaha warbaahinta Dalsan ee uu Munasar ka shaqeynayay ayaa sidoo kale sheegay in ugu yaraan saddex weriye oo uu kamid yahay Munasar loogu hanjabay warbixinnada ay ka diyaariyeen arinta ninka Baantu-ga ah.¹⁸⁴

“Weriyaheeda sheekadaasi sameeyay hadda dalka wuu ka cararay oo waxa uu ku sugan yahay Sweden. Waxaa hanjabaad telefoonka usoo mariyay qoyska gabadha, waxayna Facebook ku sheegeen in ay dili doonaan haddii uusan meesha ka saarin sheekada. Qoyskaasi ma aanay dooneyn in sheegada bannaanka la soo dhigo ama xitaa laga warramo” ayuu yiri Xasan Cali Geesey.¹⁸⁵

20-kii Nofembar 2018, booliska magaalada Muqdisho ayaa xiray **Nuur Ismaaciil Sheekh**, 30 jir tifaftire ka ahaa website-ka Shaaciye. Nuur ayaa u sheegay Amnesty International inuu bartiisa Facebook ku baahiyay maqaallo iyo muuqaallo uu ku dhaliilay mas’uuliyiin sar sare oo ka tirsan dowladda. Waxaa markii dambe damaanad lagu sii daayay 2-dii Disembar kadib 12 maalmood oo uu xirnaa, afar uu ku xirnaa xarunta Dembi barista iyo sideed maalmood oo lagu hayay Xabsiga Dhexe ee Muqdisho.¹⁸⁶

¹⁸² Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Munasar Maxamed Cabdi, Sweden, 18-kii Sebtembar 2019. Amnesty International ayaa markii ugu horreysay bishii Oktoobar 2018 ka war heshay hanjabaadaha uu wajahayo Munasar kadib markii uu la wadaagay Maxamed Ibrahim Macallimu, Xoghayaha Guud Isutagga Suxufiyiinta Soomaaliyeed (FESIJ).

¹⁸³ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Munasar Maxamed Cabdi, Sweden, 18-kii Sebtembar 2019.

¹⁸⁴ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Xasan Cali Geesey, agaasimaha warbaahinta Dalsan, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

¹⁸⁵ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Xasan Cali Geesey, agaasimaha warbaahinta Dalsan, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

¹⁸⁶ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Nuur Ismaaciil Sheekh, goob aan la shaacin, 7-dii Nofembar 2019.

Markii la soo daayay kadib, waxaa weli Nuur soo wacayay oo u hanjabay shakhsiyaad uu rumaysan yahay inay ka tirsan yihiin Dembi Baarista iyo mararka qaar dad heybtooda qariyay. Waxa uu dalka ka soo cararay 30-kii Nofembar 2019.¹⁸⁷

Nuur ayaa u sharxay Amnesty International sababta uu uga soo tegay Muqdisho:

“Noolasha ayaa igu adkaatay, marka waxaan go’aansaday inaan dalka ka baxo. Waxaan ka baqayay Dembi Baarista, si fudud ayay igu dili kareen, cidna waxba kama qaadi karin. Halkan ayaan hadda ku noolahay oo waxaan ka soo fogaaday qoyskeyga, balse waxaan ka baxay cabsidii ahayd in la i dilo”.¹⁸⁸

Nuur Ismaaciil Sheekh.

Zakariye Maxamud Timacade, oo isna weriye u ahaa telefishinka Universal ayaa dalka ka soo cararay Juun 2019. Zakariye ayaa sheegay inuu dalka ka soo baxsaday kadib hanjabaado uga yimid saraakiil NISA ka tirsan iyo weliba Al-Shabaab.¹⁸⁹

Horraantii bishii Maarso 2019, Zakariye ayaa waxaa soo wacay dad uusan aqoon oo isku sheegay inay ka tirsan yihiin Al-Shabaab, uguna hanjabay dil.¹⁹⁰ Qofka soo wacay ayaa sheegay inuu ka caraysan yahay warbixin uu Zakariye ka diyaariyay saddex qof oo looga shakiyay inay Al-Shabaab ka tirsan yihiin kuwaasoo ay qabteen laamaha ammaanka ee Soomaaliya. Amnesty International ayaa daawatay warbixinta uu diyaariyay Zakariye waxaana ku jiray saddex nin oo qiranaya inay ka tirsan yihiin Al-Shabaab, kuwaasoo la sheegay in gacanta lagu dhigay xilli ay isu diyaarinayeen inay hawlgallo ka fuliyaan Muqdisho.¹⁹¹

“Qofka isoo wacay ayaa telefoonka iigu soo diray 20 dollar, waxaana uu ii sheegay inaan sii iibsado karfanteyda, maadaama ay i dili doonaan ka hor inta aan la toogan saddexdaasi nin” ayuu Zakariya u sheegay Al-Shabaab.

Ma aha hanjabaada Al-Shabaab oo keliya waxa uu ka soo cararay Zakariye. Waxaa sidaa si lamid ah handaday oo u hanjabay saraakiil ka tirsan NISA.

NISA ayaa sidoo kale la sheegay inay ka carootay warbixin baaritaan ah oo uu Zakariye telefishinka Universal u diyaariyay 3-dii Mey 2019, taasoo uu ku faahfaahiyay qaabka uu ururka Al-Shabaab ganacsatada uga mamnuucay kaamerooyinka ay ku xiraan xarumahooda ganacsiga.¹⁹²



Zakariye Maxamud Timacade, oo u shaqeyn jiray telefishinka Universal oo ka soo warramaya goob ay Al-Shabaab ka weerartay Muqdisho 2018. Zakariye ayaa dalka ka cararay Juun 2019 kadib hanjabaad uga timid NISA iyo Al-Shabaab. © Zakariye Maxamud Timacade

¹⁸⁷ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Nuur Ismaaciil Sheekh, goob aan la shaacin, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁸⁸ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Nuur Ismaaciil Sheekh, goob aan la shaacin, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁸⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Zakariye Maxamud Timacade, Sweden, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁹⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Nuur Ismaaciil Sheekh, goob aan la shaacin, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁹¹ Warbixinta xubno Al-Shabaab ah oo qiranaya inay hawlgallo ka fulinayeen Muqdisho. Facebook,

<https://www.facebook.com/universalsomaliytv/videos/2130834870562077/>.

¹⁹² Warbixinta ku saabsan mamnuucidda Al-Shabaab ee kaamerooyinka qarsoon ee diyaariyay Zakariye Maxamud Timacade, Facebook,

<https://www.facebook.com/universalsomaliytv/videos/2306066146379301/>.

“NISA ayaan ku farxin oo ka carootay warbixinteyda, maadaama ay muujinaysay in Al-Shabaab ay weli awood ku leedahay Muqdisho oo ay si fudud u fulin karto amarrada noocaasi ah. Sidaa awgeed, NISA ayaa u muuqatay mid aan waxba qaban karin. Marka aad ka warranto arimaha xasaasiga ah ee ammaanka, way ku soo raadsanayaan”¹⁹³

Zakariye Maxamud Timacade

Horraantii Mey, maalmo kadib markii ay baxday warbixintiisa ayaa Zakariye waxaa soo wacay saraakiil ka tirsan NISA kuwaasoo geeyay xarunta Dembi Baarista ee ka soo horjeeda Huteel Saxafi ee Muqdisho. Saraakiisha ayaa weyddiyay halka uu ka helay xogta warbixinta. Zakariye ayaa sheegay inuu diidday inuu u sheego heybta dadka siiyay xogta. “Waxaa la iigu yeeray in su’aalo la i weyddiyo, balse waxaan ka gaabsaday inaan la wadaago heybta dadka xogta i siiyay,”¹⁹⁴ ayuu ku yiri Amnesty International.

Saraakiisha NISA ayaa uga digay in marka kale uusan ka warramay arimaha khuseeya ammaanka. Kadibna waxaa telefoonno hanjabaad ah usoo diray dad sheegay inay ka tirsan yihiin NISA. “Dad aan aqoon ayaa soo wacay hooyaday una sheegay in la i dili doono haddii aan ka hari waayo ka warramida arimaha xasaasiga ah. Markaas ayaan go’aanka qaatay” ayuu yiri Zakariye.

“Cabsida ugu weyn waxay iiga timid NISA... Waan ogaa inay i dili rabeen. Muqdisho, waad ka dhuuman kartaa Al-Shabaab, balse kama baxsan kartid NISA. Waxa ay si fudud iiga wadan kareen xafiiskeyga. Waxaan go’aansaday inaan ka baxo dalka,”¹⁹⁵

Zakariye Maxamud Timacade

Zakariye ayaa hadda ku sugan oo magangelyo ka codsaday dalka Sweden. “Ma aha wax fudud inaan dalkeyga ka soo cararo oo aan noolal cusub ka billaabo dal kale, balse waxaan ku qasbanaa inaan badbaadiyo noolashayda,” ayuu yiri.¹⁹⁶

Inkastoo ay Amnesty International diiwaangelisay kiisaskaasi oo dhan, ayaa Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) waxa uu yiri: “Wasaaraddu kama war qabto weriyayaal Soomaali ah oo dalka ka cararay tan iyo 2017, iyagoo ka cabsi qaba in la ciqaabo.”¹⁹⁷

¹⁹³Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Zakariye Maxamud Timacade, Sweden, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁹⁴ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Zakariye Maxamud Timacade, Sweden, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁹⁵ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Zakariye Maxamud Timacade, Sweden, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁹⁶Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Zakariye Maxamud Timacade, Sweden, 7-dii Nofembar 2019.

¹⁹⁷Warqadda jawaabta ee uu wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) usoo diray Amnesty International kuna taariikheysan 9-ka Febraayo 2020, u diiwaangashan Amnesty International.

8. XAYIRAADDA HELITAANKA XOGTA

Weriyaasha Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa u sheegay Amnesty International in saraakiil sare sare oo ka tirsan dowladda ayna kamid yihiin kuwa ammaanka ay u diiddeen xog ku aaddan arimo khuseeya danaha shacabka ama ay ka horjoogsadeen waraysiyo iyo gelitaanka xarumaha dowladda sida baarlamaanka, xafladaha waaweyn ama goobaha ay ka dhaceen weerarrada Al-Shabaab.¹⁹⁸ Qaar kamid ah weriyaasha ayaa sheegay in laamaha ammaanka ay ka hor istaageen inay muuqaallo duubtaan ama sawirro qaadaan xitaa marka ay gudaha u galaan xarumaha dowladda ama goobaha ay ka dhaceen weerarrada Al-Shabaab.¹⁹⁹

Cali Aadan Mumin, oo ah weriye ka tirsan warbaahinta Goobjoog ayaa sheegay inay kusii adkaaneyso in weriyaasha ay xog ka helaan dhinaca dowladda.

“Dowladdu waxa ay ogtahay weriyaasha aniga oo kale ah inay weydiin doonaan su’aalo adag, marka waxay iga horjoogsadeen inaan ka qeybgalo munaasabadaheeda muhiimka ah. La iima oggola inaan lagu dhismayaasha dowladda ee muhiimka ah sida Villa Soomaaliya”²⁰⁰

Cali Aadan Mumin.

Weriye kale oo u shaqeeya warbaahin caalami ah ayaa sheegay in kooxda warfaafinta u qaabilsan mas’uuliyiinta sar sare sida Madaxweynaha iyo Ra’iisal wasaaraha ay ka horjoogsadeen waraysiyo uu la yeelan lahaa madaxdaas. “Waxaan doonayay inaan waraysiyo ka qaado Madaxweynaha iyo Ra’iisal wasaaraha balse waxaa i hor istaagay shaqaalaha u qaabilsan warbaahinta. Waxay iga dalbadaan inaan usii hormariyo su’aalaha, ayna ii doorayaan kuwa aan weydiin karo. Marka aan sidaa diiddo ayay iyaguna iga horjoogsadaan waraysiga. Waan ka niyad jabay”²⁰¹ ayuu yiri.

Bishii Abriil 2019, arin u muuqatay in shaqaalaha warbaahinta looga hor istaagayay helitaanka xogta saxda ah, ayaa sarkaal sare oo ka tirsan booliska federaalka iyo laba mas’uul oo ka kale socotay xafiiska Madaxweynaha iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxa ay ku amreen maamulka Amin Ambulance – oo ah gaadiidka gurmada keliya ee sida bilaashka ah uga shaqeeya Muqdisho – in aanay la wadaagi karin weriyaasha xogta khasaaraha ka dhasha weerarrada Al-Shabaab ee Muqdisho.²⁰² Saraakiisha ayaa sidoo

¹⁹⁸ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan iyo tifaftirayaal ku sugan Soomaaliya, mudadii u dhaxaysay July iyo Disembar 2019.

¹⁹⁹ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan iyo tifaftirayaal ku sugan Soomaaliya, mudadii u dhaxaysay July iyo Disembar 2019.

²⁰⁰ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay Cali Aadan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

²⁰¹ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay nin weriye ah (magaciisa la qariyay), Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019.

²⁰² Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay Dr Cabdiqaadir Cabdiraxmaan Xaaji Aadan, asaasaha Amin Ambulance, Muqdisho, Soomaaliya, 20-kii July 2019. Sidoo kale eeg, “Ninka ka dambeya ambalaasta keliya ee bilaashka ah ee Soomaaliya”, BBC, 15-kii Abriil 2019, <https://www.bbc.com/news/world-africa-47880548>.

kale ka dalbaday gaadiidka gurmada degdegga ah inay dowladda soo wargeliyaan ka hor inta aanay u dhaqaaqin goobaha ay weerarradu ka dhaceen.²⁰³

Dr Cabdiqaadir Cabdiraxmaan Xaaji Aadan oo ah asaasaha Amin Ambulance ayaa u sheegay Amnesty International inay ku qasbanaayeen inay raacaan amarka dowladda.

“Tan iyo 2006, waxaan u shaqeynaynay dadka ugu nugul Muqdisho, waana markii ugu horreysay ee na la dul dhigo amar noocan ah. Waxaan ku qasbanahay inaan raacno, oo hadda ma sheegno tirada khasaaraha. Marka ay weryayaasha na soo wacaan oo ay na weydiiyaan tirada dhimashada iyo dhaawaca ee weerarrada Al-Shabaab, waxaan u sheegnaa in “aamusnaantu ay dahab tahay”, ayuu yiri.²⁰⁴

19-kii Oktoobar 2019, saraakiisha dowladda ayaa warbaahinta madaxa bannaan ee Muqdisho u diidday inay war ka soo tebiyaan gudaha dhismaha baarlamaanka, iyadoo sababta ku sheegay in goobto ay buuxsantay oo aan loo heyn meel ay ka galaan.²⁰⁵ Haseyeeshee dhowr weriye iyo qof u ololeeya warbaahinta oo la hadlay Amnesty International ayaa sheegay in arintaasi ay ahayd tallaabo kale oo ay mas’uuliyiintu warbaahinta ugu diidayeen helitaanka xogta dowladda.²⁰⁶

“Waxaa wiiqmaya hannaanka dimuqraadiyadda dalka haddii aan warbaahinta madaxa bannaan loo oggolaan inay si xor ah uga warranto golaha shacabka. Shaqada weryayaasha waxaa kamid ah inay tooshka ku ifiyaan hawlaha mas’uuliyiinta la doortay, taasina ma suuragaleyso illaa inta si buuxda looga oggolaanayo kalfadhiyada baarlamaanka.”

Cabdalle Axmed Mumin, Xoghayaha Guud ee Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (SJS).²⁰⁷

Bishii Mey 2019, wasiirka waxbarashada ee Soomaaliya, Cabdullaahi Goodax Barre ayaa ku hanjabay inuu xirayo baraha bulshada ee dalka mudada u dhexaysay 27-ka ilaa 31-ka bishaasi, si looga hortago qiiska imtixaanka qaranka ee dugsiya sare.²⁰⁸ Haseyeeshee cabasho ka timid shacabka awgeed, ma aysan meel marin hanjabaadaasi ku aaddan xiritaanka baraha bulshada.²⁰⁹

Bayaan wadajir ah oo ay soo saareen khubarada xoriyadda hadalka bishii Mey 2015, ayaa lagu sheegay in xiritaanka qeyb dhan oo kamid ah isgaarsiinta “aan wax qiil ah loo heli karin marka la eego sharciga xuquuqda aadanaha.” Ma aha dowladuhu inay uga jawaabaan xiisad taagan xayiraad dheeraad ah oo ay kusoo roggaan xoriyadda hadalka, mana aha in tallaabooyin dhanka maamulka ah loo adeegsado xakameynta warbaahinta ee arimaha khuseeya danta shacabka. Xayiraadaha ay soo rogto dowladdu waa inay ahaadaan kuwo ku salaysan sharciga, aan laga fursan karin, isla marka jawaab dheelitan u ah walaaca gaarka ah ee taagan, isla markaana aan si gaar ah loogu beegsaneyn helitaanka macluumaadka.²¹⁰

Wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) ayaa sidoo kale u sheegay Amnesty International **“wasaaraddu kama war qabto wax xayiraad ah oo la saaray helitaanka macluumaadka sanadihii 2018 ama 2019”**. Balse waxa uu yiri, **“Waxaa jira kiisas kooban oo weryayaasha la hor joogsaday iyadoo ammaankooda laga fekerayo.”**²¹¹

203 Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Dr Cabdiqaadir Cabdiraxmaan Xaaji Aadan, asaasaha Amin Ambulance, Muqdisho, Soomaaliya, 20-kii July 2019.

204 Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Dr Cabdiqaadir Cabdiraxmaan Xaaji Aadan, asaasaha Amin Ambulance, Muqdisho, Soomaaliya, 20-kii July 2019.

205 Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (SJS), “SJS oo ugu baaqday baarlamaanka Soomaaliya inay dhismaha u oggolaadaan weryayaasha madaxa bannaan”, 19-kii Oktoobar 2019, <https://sjsyndicate.org/2019/10/19/sjs-calls-somali-parliament-to-allow-access-of-independent-journalists/>. Sidoo kale eeg, warbixin uu telefishinka Universal Facebook ku shaaciyay, <https://www.facebook.com/universalsomaliytv/videos/719704798546643/?v=719704798546643>.

206 Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Nairobi, Kenya, 14-kii Nofembar 2019. Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay gabar weriye ah oo Muqdisho ku nool (magaceeda la qariyay), Muqdisho, Soomaaliya 14-kii Nofembar 2019.

207 Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Nairobi, Kenya, 14-kii Nofembar 2019.

208 Daawo <https://twitter.com/HarunMaruf/status/1128008990259077122> wasiirka oo ku hanjabay inuu xirayo baraha bulshada.

209 Eeg, Amnesty International, “Soomaaliya: Qiil ma leh xiritaanka baraha bulshada imtixaanka awgii”, 14-kii Mey 2019, <https://www.amnesty.org/en/latest/news/2019/05/somalia-social-media-shut-down-over-exam-leakages-unjustified/>.

210 Eeg “Bayaanka Wadajirka ah ee Xoriyadda Hadalka iyo Ka Falcelinta Xaaladaha Colaadda”

<https://www.ohchr.org/EN/NewsEvents/Pages/DisplayNews.aspx?NewsID=15921&LangID=E>

211 Warqadda jawaabta ee uu wasiir Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) usoo diray Amnesty International kuna taariikheysan 9-ka Febraayo 2020, u diiwaangashan Amnesty International.

9. FAAFREEBIDDA KU TIMAADA LAALUUSHKA IYO HANJABAADDA

Dhowr weriye, saddex qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta,²¹² sarkaal sare oo ka tirsan dowladda,²¹³ agaasime hore oo warbaahinta ah,²¹⁴ laba kamid ah hogaamiyayaasha ururada bulshada,²¹⁵ hogaamiyayaasha mucaaradka²¹⁶ iyo shaqaale hore oo dowladda ka tirsanaa²¹⁷ ayaa u sheegay Amnesty International in mudadii u dhexaysay dabayaaqadii 2017 illaa horraantii 2019 ay mas'uuliyiin dowladda ka tirsan sida la sheegay lacago laaluush ah siinayeen milkiilayaasha iyo agaasimayaasha warbaahinta caanka ah iyo weliba shakhsiyaadka saamaynta ku leh baraha bulshada ee ku nool gudaha iyo dibedda dalka si loo tebiyo wanaagga dowladda.²¹⁸ Mas'uuliyiin ka tirsan xafiiska Madaxweynaha ayaa lagu eedeeyay inay fududeeyeen bixinta laaluushkaasi.²¹⁹

Agaasime hore oo warbaahin caan ka ah Soomaaliya ayaa sheegay in qudhiisa oo dhammaadka bil kasta laaluush loogu talagalay xaruntooda ka soo qaadi jiray mas'uuliyiin sare oo ka tirsan xafiiska Madaxweynaha.²²⁰ Waxa uu intaa ku daray inuu ka war qabo dhawr warbaahin oo si joogta ah u heli jiray lacagtaasi. Agaasime hore ayaa yiri: “Waxaa i soo wici jiray mas'uul ka tirsan xafiiska Madaxweynaha, kaasoo aan kula kulmi jiray huteel si aan uga qaato lacagta oo kaash ah. Weligii ma uusan oggolaan in lacagta uu ku shubo koontadeyda bangiga.”²²¹

Weriyaal badan oo la hadlay Amnesty International ayaa sheegay in laaluushka la siiyo madaxdooda uu saameyn ballaaran ku yeeshay shaqadooda, taasoo keentay inay si madax bannaan u tebin waayaan arimaha xasaasiga ah ee aanay ku farxayn dowladdu,²²² sababtoo ah tifaftirayaasha ayaa joojiya wararka

²¹² Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay saddex qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

²¹³ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay mas'uul sare oo ka tirsan dowladda, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019.

²¹⁴ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay agaasime hore oo warbaahinta ah, goobta waa la qariyay, 13-kii Nofembar 2019.

²¹⁵ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay laba hogaamiye oo bulshada rayidka ah, Muqdisho, Soomaaliya, 18-kii July 2019.

²¹⁶ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay hoggaamiye mucaarad ah, goobta iyo taariikhdaba waa la qariyay.

²¹⁷ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay shaqaale hore oo ka tirsanaa dowladda, goobta waa la qariyay 31-kii Oktoobar 2019.

²¹⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay mas'uul sare oo ka tirsan dowladda, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019. Sidoo kale eeg, “Khatarta ugu weyn ee ay wajahayso xoriyadda warbaahinta ee Soomaaliya ma aha Al-Shabaab ee waa dowladda Farmaajo”, Shirka Caalamiga ah ee Ka Hortagga Musuq maasuqa, 21 Febraayo 2019 <https://iaccseries.org/blog/press-freedom-in-somalia/>.

²¹⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay agaasime hore oo warbaahinta ah, goobta waa la qariyay, 13-kii Nofembar 2019. Iyo waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ay kamid yihiin saddex qof oo u doodda xoriyadda warbaahinta oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²²⁰ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay agaasime hore oo warbaahinta ah, goobta waa la qariyay, 13-kii Nofembar 2019.

²²¹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay agaasime hore oo warbaahinta ah, goobta waa la qariyay, 13-kii Nofembar 2019.

²²² Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

noocaasi ah ka hor inta aan la baahin.²²³ Weriyaasha ayaa sheegay in tifaftirayaashooda ay si cad ugu sheegi jiriin in ay dowladda lacag siio, ayna ku qasban yihiin inay faafreebaan wararkooda, oo aysan ka warramin arimaha qaarkooda.²²⁴

Dhowr weriye ayaa go'aansaday inay ka tagaan shaqooyin ay ka haysteen warbaahinta ay dowladdu laaluushka siiso oo ay ku biiraan kuwa aan lacagahaas helin, halka suxufiyiin kalena dhowr warbaahin laga eryay kadib markii ay diiddeen faafreebka wararka.²²⁵ Mas'uuliyiin sare oo dowladda ka tirsan ayaa ka dalbaday warbaahinta qaar inay shaqada ka joojiyaan weriyayaasha wax dhaliila.²²⁶

Mas'uul sare oo ka tirsan dowladda ayaa u sheegay Amnesty International in xukuumadda hadda jirta ay sanadihii hore cadaadis xooggan kala kulantay siyaasiyiinta mucaaradka, falcelinteedana ay noqotay inay beegsato hogaamiyayaasha mucaaradka, ayna gacanta ku dhigto warbaahinta iyadoo laaluusheysa.²²⁷ Sidaas waxaa dowladda ugu suuragashay inay maarayso doodaha bulshada, ayuu yiri. "Inta badan warbaahinta saameynta leh ayaa waxaa loo ballanqaaday lacag bil kasta ah iyadoo la eegayo dadka ku xiran, waxayna taa bedalkeeda warar wanaagsan ka tebiyaan dowladda," ayuu raaciyay.²²⁸

Maxamed Ibrahim Cismaan, oo ku magac dheer "Bulbul", kana tirsan telefishinka Universal ayaa sheegay in laga eryay ilaa laba warbaahin tan iyo 2017 maadaama uu diidday faafreebka wararka.²²⁹ Waxa uu sheegay in mas'uuliyiin dowladda ah ay la soo hadleen madaxdiisa ayna ku amreen inay shaqada ka joojiyaan maadaama uu tebiyay warar dhaliil wata. Mid kamid madaxdiisii hore ayaa u sheegay in idaacadda ay heshiis la gashay dowladda oo uusan tebin karin wararka dowladda lidka ku ah.²³⁰



Maxamed Ibrahim Cisman oo ku magac dheer "Bulbul", kana tirsan weriyayaasha telefishinka Universal xilli uu ka soo warramayay xero dadka soo barakacay oo ku taalla afaafka Muqdisho bishii Disembar 2019. Bulbul ayaa laga eryay laba shaqo tan iyo 2017 kadib markii uu diidday faafreebidda wararka. © Maxamed Ibrahim Cisman

"Waxaa ila soo xiriiray mas'uul sare oo ka tirsan xafiiska madaxweynaha, waxayna doonayaan inaan shaqada kaa eryo maadaama aad dowladda ku dhaliisho baraha bulshada. Marka waa inaad shaqada ka tagto,

²²³ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019. Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²²⁴ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019. Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²²⁵ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019. Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²²⁶ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019. Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²²⁷ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay mas'uul sare oo ka tirsan dowladda, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019.

²²⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay mas'uul sare oo ka tirsan dowladda, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019.

²²⁹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

²³⁰ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

sababtoo ah ma doonayo inaan waayo lacagta dowladda,” ayuu mid kamid ah madaxdiisa hore u sheegay Bulbul.²³¹

Ma aha Bulbul oo keliya weriyayaasha shaqada ku waayay faafreebidda ay ka soo horjeesteen. Amnesty International ayaa diiwaangelisay saddex kiis oo kale oo weriyayaal looga eryay shaqadooda kadib markii ay qoraallo dowladda lagu dhaliilayo soo dhigeen barahooda bulshada.

Weriye kale oo u shaqeynayay mid kamid ah warbaahinta Muqdisho ayaa qoray warbixin uu xogteeda ka soo xigtay ilo-wareed dhanka ammaanka ah kuna saabsan qarax ka dhacay goob lagu waday inuu Madaxweynaha shir uga qeybgali. Weriyaha ayaa warbixintaasi ku baahiyay baraha uu ku leeyahay Facebook iyo Twitter. Maamulka idaacaddaasi ayaa durbadiiba waxaa soo wacay sarkaalka ka tirsan NISA oo ku amray in warbixintaasi laga saaro baraha bulshada, uuna shaqada ka eryo weriyahaasi. Maamulaha ayaa raacay amarka la siiyay, wuxuuna shaqada ka eryay weriyaha.²³²

“NISA ayaa basaasiin ku leh meel kasta oo ay kamid tahay warbaahinta, wayna ka warqabaan weriyayaasha dowladda dhaliila. Haddii uu milkiilaha warbaahinta diido inuu qaato amarkooda oo uu shaqada ka eryo weriyaha ay doonayaan, waxay xoog ku galaan xarunta, waana ay xiraan” ayuu yiri Cabdalle Axmed Mumin, Xoghayaha Guud ee Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed.²³³

Sababta loo laaluusho milkiilayaasha warbaahinta ayaa ah in la tebiyo wanaagga dowladda oo keliya. “Ujeedku waa in la buunbuuniyo guulaha wanaagsan ee ay gaartay dowladda, oo aan la sheegin dhinaca kale, iyo in la hago aragtida dadweynaha” ayuu hadalkiisa raaciyay Cabdalle Axmed Mumin.²³⁴

3-dii Febraayo 2020, Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada ayaa ka jawaabtay su’aalo aan ka weydiinay eedeymaha musuq maasuqa: “...**Madaxtooyadda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waxa ay beeninaysaa inay wax khalad ah gashay, gaar ahaan in mas’uuliyiinteeda ay ku lug leeyihiin ficil kasta oo wax u dhimaya madax bannaanida saxaafadda ama dhiiragelinaya anshax xumada warbaahinta...**” waxay sidoo kale sheegeen, “**Waan sii wadi doonaa inaan ka digno oo aan ka hortagno dhammaan laaluushka noocyadiisa kala duwan ee horseeda in lagu lug yeesho hawlaha warbaahinta. Waxaan beenineynaa dhammaan eedeymaha ku aaddan in xiriir dhaqaale uu dhexmaray Madaxtooyadda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya iyo hay’adaha warbaahinta kaasoo looga gol leeyahay in lagu helo tebinta wararka dhinaca ka raran.**”²³⁵

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya kama aysan bixin sharraxaad dheeraad ah qaabka ay uga digto falalka ansharx xumada ku ah saxaafadda, mana aysan soo bandhigin macluumaad dheeraad ah oo ay ku beeninayso eedeymaha ay Amnesty International ku soo bandhigtay warbixintan.

²³¹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Maxamed Ibrahim Cisman (Bulbul), Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

²³² Waraysi ay Amnesty International la yeelatay laba qof oo u ololeeya warbaahinta, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²³³ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Xoghayaha Guud ee Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

²³⁴ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdalle Axmed Mumin, Xoghayaha Guud ee Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019.

²³⁵ Jawaab email ah oo ay Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada soo dirtay, la helay 3-dii Febraayo 2020, una diiwaangashan Amnesty International

10. HANDADAADA ONLINE-KA IYO MARIN- HABAABINTA BARAHA BULSHADA

Faafreebka jira iyo weliba isku dhex-milanka warbaahinta iyo dowladda ayaa ku qasbay weriyayaasha iyo shakhsiyaad kale oo Soomaaliya ku nool inay adeegsadaan baraha ay bulshadu kuwada xiriirto si ay u gudbiyaan fekerkooda iyo dhaliisha ay tilmaamayaan. Balse dowladda Soomaaliya ayaa si dhaw isha ugu haysa doodaha ka socda baraha bulshada.²³⁶ Dowladda ayaa samaysay koox ula socota arimaha ka taagan baraha bulshada oo ka tirsan xafiisyada Madaxweynaha iyo Ra'iisal wasaaraha, si gaar ahna uga warrama waxyaabaha dowladda lagu dhaliilayo.²³⁷ Mas'uuliyiinta dowladda ayaa weriyayaasha iyo dadka siyaasadahooda dhaliilsan oo ay kamid yihiin xubnaha mucaaradka ugu hanjabo online-ka, gaar ahaan baraha bulshada.²³⁸

Dhowr weriye ayaa ka warramay qaabka ay mas'uuliyiin ka tirsan xafiisyada warfaafinta ee Madaxweynaha, Ra'iisal wasaaraha iyo Wasaaradda Warfaafinta uga dalbadeen inay barahooda bulshada gaar ahaan Facebook iyo Twitter ka tiraan qoraallo lagu dhaliilayay dowladda. Qaar kamid ah weriyayaasha ayaa sheegay in lagu handaday oo loogu hanjabay qoraallo dhaliil ah oo ay soo dhigeen barahooda bulshada.²³⁹

Weriye ayaa u sheegay Amnesty International in lagu qasbay inuu shaqada ka tago kadib markii uu bartiisa Facebook taageero ugu muujiyay hogaamiye mucaarad ah.²⁴⁰ Waxa uu sheegay in mas'uul ka tirsan xafiiska Madaxweynaha uu u ballanqaaday in mushaarka loo kordhinayo haddii uu joojiyo taageerada uu u hayo musharraxaasi mucaaradka ah, taasoo uu iska diiday. Sida uu sheegay weriyahaas, mas'uulka ka tirsan xafiiska Madaxweynaha ayaa markii dambe la xiriiray macallinkiisa hore si uu ugu qanciyo weriyaha inuu isaga baxo saxaafadda, isagoo xitaa u ballanqaaday inuu shaqo ka siinayo Xafiiska Warfaafinta ee

²³⁶Waraysi ay Amnesty International la yeelatay mas'uul sare oo ka tirsan dowladda, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019; Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay laba hogaamiye oo bulshada rayidka ah, Muqdisho, Soomaaliya, 18-kii July 2019; Waraysiyo Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019; Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay laba qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019

²³⁷Waraysi ay Amnesty International la yeelatay mas'uul sare oo ka tirsan dowladda, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019; Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay laba hogaamiye oo bulshada rayidka ah, Muqdisho, Soomaaliya, 18-kii July 2019; Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019; Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay laba qof oo u ololeeya madax bannaanida warbaahinta, Muqdisho, Soomaaliya, 16-kii July 2019

²³⁸ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²³⁹ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo Soomaali ah. Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay weriyayaal badan oo ku sugnaa Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²⁴⁰ Waraysi ay Amnesty International Intla yeelatay nin weriye ah, Muqdisho, Soomaaliya, taariikhda waraysiga oo la qariyay sababo ammaan awgood.

Madaxweynaha.²⁴¹ Muddo yar kadib ayaa warbaahinta uu ka shaqeynayay waxa ay sheegtay inay lacag ka heshay dowladda, wariyayaasheedana ay ka reeban tahay inay dhaliilaha dowladda ku qoraan barahooda bulshada. Wariyaha ayaa ku qasbanaaday inuu shaqada ka tago, oo uu u wareego warbaahin kale.²⁴²

Qiyaastii lix bilood kadib, wariyahaasi ayaa warbixin ka diyaariyay ku lug lahaanshaha Madaxweynaha ee dhiibistii muranka badan dhalisay ee Cabdikariim Sheekh Muuse (Qalbi-dhagax) loogu gacan geliyay Itoobiya. Waxaa wariyaha markale la soo xiriiray mas'uul ka tirsan xafiiska Madaxweynaha, kaasoo codsaday inuu la kulmo oo ay ka wadhadlaan shaqadiisa. Sida uu sheegay wariyaha, wuu la kulmay, wuxuuna mar kale diidday inuu joojiyo warbixinnadiisa dhaliisha xambaarsan. Mas'uulka ayaa ku yiri.²⁴³

“Miyaadan ogeyn inaad wax u dhimayso dalkaaga? Ma isu aragtaa muwaadin Soomaaliyeed oo dhab ah? Maxaad markasta uga hadashaa waxa xun?”²⁴⁴

Mas'uul ka tirsan Kooxda Warfaafinta ee Xafiiska Madaxweynaha

Laba wariye oo kale ayaa waxaa weerar muuqda ku qaaday askarta dowladda xilli ay ka qeybgalayeen Maalinta Xornimada Soomaaliya ee July 2019.²⁴⁵ Mid kamid ah ayaa waxaa dhibaateeyay ilaalada madaxtooyada, muuqaal muujinaya waxa lagu sameeyay ayaana la soo dhigay Facebook.²⁴⁶ Mid kamid ah wariyayaashaasi oo lagu magacaabo Cabdiqaadir Axmed Maxamed, una shaqeyn jiray warbaahinta dowladda, ayaa bartiisa Facebook ku baahiyay muuqaalka, waxaana uu Madaxweynaha ka codsaday inuu arinta wax ka qabto.²⁴⁷ Durbadiiba waxaa soo wacay oo u hanjabay dad dowladda ka tirsan iyo weliba maamulhiisa, waxaana laga dalbaday inuu muuqaalka tiro, raaligelinna bixiyo.²⁴⁸ Sidaa darteed, waxa uu dareemay inuu ku qasban yahay inuu soo geliyo muuqaal kale oo uu si cad ugu sheegayo inuu cafiyay askariga dhibaataada u geystay, isla markaana uu xaqiijiyay in dad badan ay arkaan muuqaalka dambe. Askariga falkaasi geystay ayaan maxkamad la soo taagin, waxaana uu weli ka shaqeeyaa Muqdisho.²⁴⁹



Wariyayaasha u shaqeeya warbaahinta caalamiga ah ayaa la kulma cadaadis noocaas ah. Cabdicasiis Billow oo ka tirsan CGTN, ahna wariyaha labaad ee dhibaataada loo geystay Maalinta Xornimada Soomaaliya ee July 2019, ayaa bartiisa Twitter-ka uga hadlay waxa ku dhacay, durbadiibana waxaa handadaad ku billaabay mas'uuliyiin ka tirsan warfaafinta dowladda illaa laga gaaray saqdii dhexe.²⁵⁰

²⁴¹ Waraysi ay Amnesty International Intla yeelatay nin wariye ah, Muqdish, Soomaaliya, taariikhda waraysiga oo la qariyay sababo ammaan awgood.

²⁴² Waraysi ay Amnesty International Intla yeelatay nin wariye ah, Muqdish, Soomaaliya, taariikhda waraysiga oo la qariyay sababo ammaan awgood.

²⁴³ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay nin wariye ah, Muqdisho, Soomaaliya, taariikhda waraysiga ayaa la qariyay sababo ammaan awgood.

²⁴⁴ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay nin wariye ah, Muqdisho, Soomaaliya, taariikhda waraysiga ayaa la qariyay sababo ammaan awgood.

²⁴⁵ Labada wariye ayaa kala ah Cabdicasiis Billow Cali iyo Cabdiqaadir Axmed Maxamed. Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Billow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019; iyo Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

²⁴⁶ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

²⁴⁷ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

²⁴⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

²⁴⁹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiqaadir Axmed Maxamed, Muqdisho, Soomaaliya, 17-kii July 2019.

Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay shakhsi yaqaana meesha uu askarigaasi ka hawlgallo Muqdisho. 4-tii Febraayo 2020, goobta waa la qariyay.

²⁵⁰ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Billow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019;

Kadib markii uu soo wacay oo uu raaligelin siiyay mas'uul sare oo ka tirsan xafiiska Ra'iisal Wasaaraha, ayaa Cabdicasiis waxa uu sheegay inuu dareemay inuu ku qasban yahay baahinta qoraal kale oo uu ku muujinayo tallaabada wanaagsan ee ay qaaday dowladdu.²⁵¹

Weriye caan ah oo Muqdisho ka soo jeeda, bartiisa Facebook-gana ay ku taxan yihiin dad badan, ayaa sheegay in ugu yaraan bishiiba mar ay handadaan oo ay u cagajugleeyaan saraakiisha dowladda, mararka qaarna ay booliska iyo mas'uuliyiin dowladda ka tirsan u yeeraan si ay su'aalo u weydiiyaan.²⁵²



“Waxaa ila soo hadlay qof aan aqaanno oo ka tirsan wasaaradda warfaafinta. Waxa uu ii sheegay inuu madaxa u yahay kooxda dabagalka baraha bulshada. Waxa uu su'aalo iga weydiiyay warbixin aan ka qoray darawal bajaajle ah oo la dilay. Kadibna waxa uu i geeyay xarunta booliska ee ka soo horjeeda wasaaradda warfaafinta. Waxaa la i geeyay qol, waxaana la i tusay fayl ay ka buuxaan dhammaan waxyaabaha aan soo dhigo baraha bulshada. Waxay iga dalbadeen inaan tiro qaar kamid ah qoraallada, waana tiray maadaama aan ka baqayay,”²⁵³

Weriye ku sugan Muqdisho.

Taageerayaasha siyaasadeed ee dowladda ayaa sidoo kale daba dhigta isla markaana u hanjaba

weriyayaasha iyo shakhsiyaadka kale ee dowladda dhaliila.²⁵⁴ Mid kamid ah siyaasiyiinta mucaaradka ee Muqdisho ayaa sharraxay caqabadaha uu kala kulmo dadkaasi marka uu lollihiisa kusoo bandhigayo baraha bulshada. Waxa uu sheegay in inta badan dadkaasi ay lacag siiso dowladda Federaalka ah si ay u kharriibaan dooda siyaasadeed ee ka socota baraha bulshada, una ceebeeyaan siyaasadihiisa.²⁵⁵

“Warbaahinta baraha bulshada ayaa ka hormaraysa saxaafadda caadiga ah. Waa qaab cusub oo si habaysan loo adeegsan karo. Balse waxaa arin cusub ku ah Soomaaliya in dadka lacag lagu siiyo inay baraha bulshada ku weerarraan shakhsiyaadka ay kamidka yihiin dadka magaca ku leh dalka.”²⁵⁶

Cabdiraxmaan Cabdishakur Warsame, siyaasi mucaarad ah oo Muqdisho ku sugan.

Weriyaasha ayaa iyaguna arintaa ka cawday. Mid kamid ah weriyayaasha ayaa sheegay in daba dhigashada baraha bulshada ay noqotay arin nidaamsan.²⁵⁷ Waxa uu u sheegay Amnesty International inay arintaasi saamaysay shaqadiisa, oo uu ka walwalo qaabka uu u tebinayo arimaha lagu muransan yahay.²⁵⁸ Weriye kale ayaa xaqiijiyay qaabka nidaamsan ee ay u shaqeeyaan dadkaasi, waxaana uu tilmaamay inay caddahay in shakhsiyaadkaasi ay wada shaqeyn ka dhaxeeyso maadaama ay inta badan adeegsadaan cinwaanno dhawaan la sameeyay, dad yar ay ku xiran yihiin, isla markaana aanay jirin wax lagu aqoonsan karo qofka adeegsanaya.²⁵⁹ Farriimaha cinwaannadaasi laga soo diro ayaa mararka qaar isku mid ah oo xitaa iska raaca habka qoraalka iyo weliba khaladaadka dhanka hingaada ah.²⁶⁰

²⁵¹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Billow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019

²⁵² Waraysi ay Amnesty International la yeelatay nin weriye ah, Muqdisho, Soomaaliya 22-kii July 2019.

²⁵³ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay nin weriye ah, Muqdisho, Soomaaliya 22-kii July 2019.

²⁵⁴ Waraysiyo ay Amnesty International laba kamid ah hogaamiyayaasha bulshada rayidka, Muqdisho, Soomaaliya, 18-kii July 2019; Waraysiyo ay Amnesty International weriyayaal badan oo ku sugan Muqdisho iyo Nairobi intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²⁵⁵ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiraxmaan Cabdishakur Warsame, hogaamiyaha xisbiga Wadajir, Muqdisho, Soomaaliya, 18-kii July 2019.

²⁵⁶ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdiraxmaan Cabdishakur Warsame, hogaamiyaha xisbiga Wadajir, Muqdisho, Soomaaliya, 18-kii July 2019.

²⁵⁷ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Billow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019; Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cali Aadan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²⁵⁸ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay nin weriye ah, Muqdisho, Soomaaliya 18-kii July 2019.

²⁵⁹ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Billow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019; Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cali Aadan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²⁶⁰ Waraysi ay Amnesty International la yeelatay Cabdicasiis Billow Cali, Muqdisho, Soomaaliya, 19-kii July 2019 iyo; Waraysi ay Amnesty International la yeelatay nin weriye ah, Muqdisho, Soomaaliya 18-kii July 2019.

MARIN HABAABINTA XOGTA FACEBOOK

Cinwaannada Facebook ay ku leeyihiin 16 qof – oo u badan weriyayaal – ayaa si buuxda hawada looga saaray ama la tirtiray sanadihii 2018 iyo 2019 oo keliya.²⁶¹ Dhammaan dadka laga xiray cinwaannada Facebook ayaa u sheegay Amnesty International in horay ay u qoreen waxyaabo ay dowladda ku dhaliilayaan. Sidoo kale waxaa jira isku-day lagu jabsanayay cinwaannada Facebook ee shan weriye, halka cinwaannada afar suxufi oo kale lala wareegay labadii sano ee la soo dhaafay. Inta badan weriyayaasha ayaa cinwaannadooda Facebook u adeegsada hawlahooda shaqo, si ay macluumaadka muhiimka ah ugu gudbiyaan shacabka Soomaaliyeed. Xayiraadda laga saaray cinwaannadooda ayaa saameeyay shaqadooda iyo weliba noolashooda.²⁶²

16-kii Juun 2019, cinwaannada ay Facebook ku lahaayeen 10 weriye ayaa si buuxda hawada looga saaray iyagoo aan wax digniin ah ka helin shirkaddaasi.²⁶³ Marka ay weriyayaashaasi la xiriireen Facebook, ayaa dhammaantood waxaa loo diray farriin qura ah, taasoo loogu sheegay in aysan xaq u lahayn inay isticmaalaan bartaasi bulshada iyagoo ku xadgudbay “Dhaqanka Bulshada Facebook.” Shirkadda ayaa u sheegtay weriyayaasha in go’aankaasi uu kama dambeys yahay oo aanay jirin fursad kale oo u furan.²⁶⁴

Cali Aadan Mumin oo ka tirsan weriyayaasha warbaahinta Goobjoog, kana mid ah weriyayaasha cinwaannadooda hawada laga saaray 16-kii Juun, ayaa sheegay inuu rumaysan yahay in dowladda ay ka dambeeyo xiritaanka cinwaankiisa.²⁶⁵ “Waxaan lahaa in ka badan 60,000 oo ku taxnaa cinwaankeyga, sidaa ayaana ku waayay. Waxaan filayaa in qof ka tirsan dowladda uu igu dacweeyay Facebook. Ma isticmaali karo cinwaankeyga. Marka mid cusub ayaan samaystay, sidaana cadaalad ma aha,”²⁶⁶

Cinwaanka Facebook ee weriye Cabdirisaaq Cali Hiiraan, ahna YouTube-le, kaasoo hadda ku sugan Uganda ayaa hawada laga saaray 24-kii Maarso 2019.²⁶⁷ Waxa uu rumaysan yahay in shakhsiyaad u shaqeeya dowladda Soomaaliya ay ku dacweeyeen shirkadda Facebook. Waxa uu hadda ku guda jiraa hannaanka uu ku xaqiijinayo inuu yahay milkiilaha dhabta ah u leh cinwaanka la xiray.²⁶⁸

Ma aha weriyayaasha oo keliya cidda lagu beegsaday handaadaada online-ka. Dad ay kamid yihiin shaqaalihii hore ee dowladda iyo hogaamiyayaasha mucaaradka ayaa sidoo kale la bartilmaameedsaday.²⁶⁹ 9-kii Abriil 2019, cinwaanka Facebook ee Cabdicasiis Cali Ibraahim oo ku magac dheer “Xildhibaan”, oo mar lataliye dhanka ammaanka u ahaa dowladda – haddana dhaliila siyaasadaheeda – ayaa la xiray. Marka uu weydiyay Facebook sababta looga xiray cinwaanka ayaa waxa ay shirkada ugu jawaabtay in uusan xaq u lahayn isticmaalka bartaasi bulshada isagoo ku xadgudbay “Dhaqanka Bulshada Facebook”.²⁷⁰ Cinwaankiisa ayaa dib loo soo celiyay 2-kii Oktoobar 2019 kadib markii ay Amnesty International su’aashay shirkadda Facebook sababta ay ninkaasi uga xirtay cinwaankiisa, haseyeeshee Cabdicasiis ayaan illaa maanta wax faahfaahin ah ka helin Facebook.²⁷¹ Waxa uu rumaysan yahay in dowladda Soomaaliya ay cinwaankiisa dacweysay si loo xiro.²⁷²

²⁶¹ Waraysiyo ay Amnesty International ila yeelatay 16 qof oo ay kamid yihiin 13 weriye oo cinwaannadooda Facebook laga xiray ama hawada laga saaray, intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²⁶² Waraysi ay Amnesty International ila yeelatay Cali Aadan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²⁶³ Waraysiyo ay Amnesty International ila yeelatay 10 weriye oo cinwaannadooda Facebook laga xiray ama hawada laga saaray 16-kii Juun 2019, intii u dhexaysay July iyo Disembar 2019.

²⁶⁴ Farriimaha ay shirkadda Facebook u dirtay 10 weriye oo cinwaannadooda Facebook laga xiray ama hawada laga saaray 16-kii Juun 2019, oo u diiwaangashan Amnesty International.

²⁶⁵ Waraysi ay Amnesty International ila yeelatay Cali Aadan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²⁶⁶ Waraysi ay Amnesty International ila yeelatay Cali Aadan Mumin, Muqdisho, Soomaaliya, July 2019.

²⁶⁷ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdirisaaq Cali Hiiraan, Kampala, Uganda, 11-kii Sebtembar 2019.

²⁶⁸ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdirisaaq Cali Hiiraan, Kampala, Uganda, 11-kii Sebtembar 2019.

²⁶⁹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Xildhibaan, London, UK, 11-kii Sebtembar 2019.

²⁷⁰ Farriinta ay shirkadda Facebook u dirtay Cabdicasiis Xildhibaan, oo u diiwaangashan Amnesty International.

²⁷¹ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Xildhibaan, London, UK, 11-kii Sebtembar 2019.

²⁷² Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Xildhibaan, London, UK, 11-kii Sebtembar 2019.



Cabdicasiis Cali Ibraahim oo loo yaqaan Xildhibaan, lataliyihii hore ee ammaanka dowladda – haddana kamid ah dadka dhaliila dowladda – ayaa cinwaankiisa Facebook laga xiray isagoo lagu eedeeyay inuu jebiyay “Dhaqanka Bulshada Facebook”. Waxaa cinwaankiisa la xiray 9-kii Abriil 2019, haseyeeshee dib loogu soo celiyay 2-kii Oktoobar 2019 kadib markii ay Amnesty International su’aashay shirkadda Facebook sababta ay ninkaasi uga xirtay cinwaankiisa.

Shirkadda Facebook ma aysan siin weriyayaashaasi fursad kale ama faahfaahin dheeraad ah oo ku aaddan sababta ay u xirtay cinwaannadooda.²⁷³ Sidoo kale shirkaddu ma aanay soo bandhigin inay xilliga ay go’aanka gaaraysay ay u shaqeynayeen dadka Soomaaliga ku hadla oo gorfeeyay xogta weriyayaasha lagu haysto, haddiise ay jireen tallaabooyinka ay qaaday si ay u xaqiijiso in Facebook aanay marin habaabin ku samayn mas’uuliyiin u shaqeyneysa dowladda Soomaaliya ama taageerayaasheeda.²⁷⁴

13-kii Nofembar 2019, Amnesty International ayaa warqad u dirtay shirkadda Facebook, taasoo ay kusoo koobtay waxyaabaha lagu ogaaday warbixinta, waxaana ay ka codsatay in shirkadda ay ka jawaabto su’aalo khuseeya cinwaannada weriyayaasha iyo dadka kale laga xiray. Su’aalaha waxaa kamid ahaa in wax digniin ah la siiyay shakhsiyaadka laga xiray cinwaannada ka hor inta aan hawada laga saarin, sida lagu ogaaday iyo cidda soo dacweysay. Warqada ayaa sidoo kale lagu weydiyay Facebook inuu leeyahay dad luuqada Soomaaliga ula socda iyo tallaabooyinka ay shirkaddaasi qaaday si loo xaqiijiyay in go’aannadeeda aanay saamayn ku lahayn mas’uuliyiinta ama shakhsiyaadka kale ee u shaqeynaya dowladda Soomaaliya iyo su’aalo kale.²⁷⁵

3-dii Disembar 2019, shirkadda Facebook ayaa si rasmi ah uga soo jawaabtay su’aalahaasi qaarkood, waxaana ay tiri “...Cinwaannada la xannibay ee aad warqada uga hadasheen ayaa ah kuwo si sax ah loo xiray kadib markii ay si ba’an ugu xadgudbeen Dhaqanka Bulshada ee u yaalla Facebook. Tallaabooyinkaasi wax sal iyo xiriir ah lama aysan lahayn sharciga Soomaaliya”.²⁷⁶ Shirkadda Facebook ayaa intaa raacisay “.... Sababo xogta gaarka ah iyo ammaanka awgood, ma awoodno inaan idinla wadaagno macluumaad faahfaahsan oo ku aaddan cinwaannada Facebook ee gaarka ah ama heybta dadka nagu wargeliyay macluumaadkaasi”.²⁷⁷

Inkastoo Amnesty International ay Facebook uga mahadcelinayso waqtiga iyo dedaalka ay siisay su’aalahaasi, ayaa haddana jawaabta Facebook ee ku aaddan cinwaannada la xiray waxa ay u muuqataa mid gebi ahaanba aan sax ahayn, maadaama aan rumaysannahay in mid kamid ah cinwaannada aan u

²⁷³ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay 16 qof oo ay kamid yihiin 13 weriyayaal oo cinwaannadooda Facebook laga xiray ama hawada laga saaray mudadii u dhexaysa July iyo Disembar 2019.

²⁷⁴ Waraysiyo ay Amnesty International la yeelatay 16 qof oo ay kamid yihiin 13 weriyayaal oo cinwaannadooda Facebook laga xiray ama hawada laga saaray mudadii u dhexaysa July iyo Disembar 2019.

²⁷⁵ Warqad ay Amnesty International u dirtay Facebook, una diiwaangashan.

²⁷⁶ Warqada Jawaabta Facebook ee su’aalihii aan u dirnay kuna taariikheysan 29-kii Nofembar 2019, u diiwaangashan Amnesty International.

²⁷⁷ Warqada Jawaabta Facebook ee su’aalihii aan u dirnay kuna taariikheysan 29-kii Nofembar 2019, u diiwaangashan Amnesty International.

gudbinay – oo uu leeyahay Cabdicasiis Xildhibaan, lataliyihii hore ee ammaanka Soomaaliya, haddana kamid ah dadka dhaliila siyaasadaha dowladda – si khalad ah loo xiray, dibna loo soo celiyay 2-dii Oktoobar 2019, kadib markii ay Amnesty International weydiisay Facebook sababta markii horaba loo xiray cinwaankaasi.²⁷⁸

Amnesty International ayaa sidoo kale ka walaacsan qaababka uu adeegsado Facebook si uu u xakameeyo macluumaadka lagu wadaago Soomaaliya, gaar ahaan qaabka lagu ogaado in shakhsiyadka ay ku xadgudbeen Dhaqanka Bulshada ee Facebook, iyo in dadka aan loo digin iyo weliba xalka uu Facebook u hayo shakhsiyadka ay kamidka yihiin weriyayaasha ee cinwaannadooda Facebook hawada laga saaray.

Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada ayaa ka jawaabtay su'aalaha aan ka weydiinay handadaada online-ka iyo marin habaabinta xogta baraha bulshada:

“...tiknoolajiyadda sii xoogeysanaysa ee dal ay aad u kobcayaan warbaahinta dijitaalka ah iyo baraha bulshada. Inkastoo ay taasi horseeday soo shaac bixidda muwaadiniin hal abuur leh oo ku nool gudaha iyo dibedaba, jiritaanka xog aan la nidaamin ama in aanay jirin qaab lagu kala saarayo weriyayaasha iyo fanaaniinta ayaa bannaanka soo dhigtay dhammaan noocyada dadka adeegsada baraha bulshada ee soo qora waxyaabaha sumcad dilka ah iyagoo aan dareensaneyn isla xisaabtan. Dowladda, gaar ahaan Madaxtooyada ayaa dhibbane u ah xogta aan la nidaamin. Haseyeeshee, Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada waxay diiradda saartay inay baraha bulshada (Twitter iyo Facebook) kusoo bandhigto xaqiiqda jirta, iyagoo loo adeegsanayo in shacabka waxa jira loogu caddeeyo..”²⁷⁹

Amnesty International ayaa fahansan caqabadaha la socda warbaahinta dijitaalka ah iyo tan baraha bulshada ee dhawaan soo gaaray Soomaaliya. Haseyeeshee, siyaasad ama sharci kasta oo ku aaddan caqabadahaasi ayaa loo baahan yahay inay si buuxda ula jaanqaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada. Ma aha in dowladda ay caqabadahaasi u adeegsato xakameynta xoriyadda hadalka ee sharciga ah iyadoo kusoo gabbanaysa “sumcad dilka”. Jawaab kasta oo wax looga qabanayo caqabadahaasi waa in la waafajiyo heerarka sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada kuwaasoo kala ah; sharcinimada, baahida loo qabo, dheelitirka iyo sharci ahaanshaha.

Waxaa intaa dheer in Amnesty International ay rumaysan tahay in tiridda, xannibidda iyo kala shaandheynta xogta si xad dhaaf ah loogu adeegsaday weriyayaasha iyo dadka dowladda dhaliilsan ee ka warrama arimaha ay mas'uuliyiinta u arkaan kuwo xasaasi ah.

Ma aha in shuruudda sumcad dilka (qadfiga) loo adeegsado aamusinta weriyayaasha, difaacayaasha xuquuqda aadanaha iyo dadka u ololeeya xuquuqda. In weriyayaasha iyo dadka u ololeeya xuquuqda lagu beegsado dacwado sumcad dil ah ayaa waxa ay meel ka dhac ku tahay xuquuqdooda xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta. Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay ayaa si cad u qeexay in dalalka looga baahan yahay ka fiirsashada shuruudda sumcad dillida, iyoin xitaa xaaladaha aadka u daran aan loo baahneyn in dadka loo xiro kiisaskaasi.

Dowladda waxaa waajib ku ah inay wadahadallo wax ku ool ah la yeelato weriyayaasha, difaacayaasha xuquuqda aadanaha iyo dadka u ololeeya xuquuqda si xal looga gaaro caqabadaha la soo sheegay.

²⁷⁸ Waraysi ay Amnesty International telefoonka kula yeelatay Cabdicasiis Xildhibaan, London, UK, 06-kii Oktoobar 2019.

²⁷⁹ Jawaab email ah oo ay Waaxda Warfaafinta ee Madaxtooyada soo dirtay, la helay 3-dii Febraayo 2020, u diiwaangashan Amnesty International.

11. TALOYINKA

KU AADDAN MADAXWEYNAHA SOOMAALIYA:

- Inuu si shaac baxsan u cambaareeyo weerarrada muuqda, dilalka, hanjabaadda, cagajugleynta iyo xariga loo geysto weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta;
- Inuu soo saaro amarro cad-cad oo faraya dhammaan mas'uuliyiinta dowladda iyo laamaha ammaanka inay joojiyaan handaada, hanjabaadaha ama weerarrada muuqda ee ka dhanka ah weriyayaasha iyo hay'adaha warbaahinta iyo inuu xaqiijiyo in dhammaan hay'adaha dowladda oo ay kamid yihiin laamaha ammaanka ay ixtiraamaan, difaacaan oo ay hormariyaan xoriyadda hadalka ee qof kasta iyo madax bannaanida warbaahinta;
- Inuu qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagu xaqiijinayo baaritaan degdeg ah, adag, madax bannaan oo wax ku ool ah oo ku aaddan tacaddiyada iyo weerarrada ay kamid yihiin dilalka iyo hanjabaadaha ka dhanka ah weriyayaasha, iyo inuu wax ka qabto fashilka ku aaddan in si ku filan loo baaro oo loo maxkamadeeyo dadka lagu tuhunsan yahay inay geysteen tacaddiyada iyo weerarradaasi;
- Inuu si shaac baxsan u ballanqaado ka hor doorashooyinka inuu xaqiijnayo in ma'uuliyiinta iyo hay'adaha dowladda ay ixtiraamaan, difaacaan, hormariyaan ayna fuliyaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta ka hor, inta ay socdaan iyo kadib doorashooyinka, oo ay kamid tahay in la diyaariyo jawi wanaagsan oo ammaan ah oo ay weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta uga warrami karaan arimaha xasaasiga ah iyo kuwa ay ku jirto danta shacabka si ammaanka, doodaha ku aaddan doorashada iyo inay shaacin karaan wararka xubnaha mucaaradka;
- Inuu qaado tallaabooyin lagu xaqiijinayo in baaritaan degdeg ah, adag oo ku wax ku ool ah lagu sameeyo eedeymaha sheegaya in mas'uuliyiin ka tirsan xafiiskiisa ay si joogta ah u laaluushaan warbaahinta si loo helo tebinta wararka wanaagsan ee guulaha dowladda, iyo xaqiijinta in cid kasta oo looga shakiyo arimahaasi la hor geeyo maxkamad cadaalad ah;
- Inuu ku amro mas'uuliyiinta dowladda iyo laamaha ammaanka inay u oggolaadaan weriyayaasha iyo shaqaalaha warbaahinta helitaanka macluumaadka dowladda oo ay kamid tahay in aysan xayiraad saarin gelitaanka dhismayaasha dowladda iyo waraysiyada mas'uuliyiinta qaran;
- Inuu ku amro mas'uuliyiinta dowladda iyo dadka kale ee metala xukuumadda in aysan xakameyn ama ku xadgudbin xuquuqda shakhsiyaadka ay ku raadsanayaan, helayaan ama gudbinayaan macluumaadka iyagoo adeegsanaya noocyada kala duwan ee warbaahinta ee uu kamidka yahay internet-ka, iyagoo adeegsanaya qaababka xakameynta sida tiridda, joojinta iyo kala shaandheynta xogta.

KU AADDAN RA'IISAL WASAARAH SOOMAALIYA:

- Inuu degdeg u xaqiijiyo in hay'adaha dowladda ee ku shaqada leh ay qaadaan tallaabooyin si dhaqsa ah wax looga qabanayo fashilka si baaritaan adag, madax bannaan oo wax ku ool ah loogu qaado dadka lagu tuhunsan yahay inay geystaan weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, cadaaladdana loo mariyo;
- Inuu ku amro mas'uuliyiinta dowladda iyo laamaha ammaanka inay u oggolaadaan weriyayaasha iyo shaqaalaha warbaahinta helitaanka macluumaadka dowladda oo ay kamid tahay in aysan xayiraad saarin gelitaanka dhismayaasha dowladda iyo waraysiyada mas'uuliyiinta qaran;

- Inuu ku amro mas'uuliyiinta dowladda iyo dadka kale ee metala xukuumadda in aysan xakameyn ama ku xadgudbin xuquuqda shakhsiyaadka ay ku raadsanayaan, helayaan ama gudbinayaan macluumaadka iyagoo adeegsanaya noocyada kala duwan ee warbaahinta ee uu kamidka yahay internet-ka, iyagoo adeegsanaya qaababka xakameynta sida tiridda, joojinta iyo kala shaandheynta xogta.

KU AADDAN BAARLAMAANKA SOOMAALIYA:

- Inuu qaado tallaabooyin degdeg ah oo uu dib u eegis ugu samaynayo xeerka saxaafadda, xeerka ciqaabta iyo dhammaan shuruucda kale ee caqabada ku ah xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta iyo in shuruucdaasi la waafajiyo dastuurka Soomaaliya iyo waajibaadka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.

KU AADDAN WASIIRKA AMNIGA:

- Inuu ku amro dhammaan askarta booliska, gaar ahaan kuwa Hay'adda Nabad sugidda iyo Sirdoonka Qaranka ee NISA iyo Dembi Baarista inay soo afjaraan cagajugleynta, xannibaada, hanjabaadaha, garaaca, xariga iyo dhibaateynta ay ku hayaan weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta;
- Inuu xaqiijiyo in booliska iyo hay'adaha kale ee ku shaqada leh ay si adag oo wax ku ool ah u baaraan dhammaan kiisaska la soo wariyay ee weerarrada, hanjabaadda, cagajugleynta iyo handadaada ka dhanka ah weriyayaasha iyo xaqiijinta in dadka looga shakiyo falalkaasi la hor geeyo cadaaladda;
- In si adag oo wax ku ool ah loo baaro dhammaan kiisaska la soo wariyay ee mas'uuliyiinta u hanjaba ama handada weriyayaasha iyadoo aan loo egeeyn xilka ay hayaan, sida kuwa weriyayaasha ku handada waxyaabaha lagu qoray baraha bulshada, iyo in la edbiyo ama si cadaalad ah loo maxkamadeeyo dadka looga shakiyo falalka noocaasi ah;
- Inuu qaado tallaabooyin degdeg ah oo xuquuqda aadanaha lagu barayo booliska iyo saraakiisha kale ee ammaanka, gaar ahaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta.

KU AADDAN WASIIRKA CADAALADDA :

- Inuu ku amro hay'adaha ku shaqada leh joojinta xariga weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee saxaafadda iyo weerarrada lagu qaado xarumaha warbaahinta.

KU AADDAN WASIIRKA WARFAAFINTA:

- In isagoo la tashanaya saamileyda uu dedajiyo dib u eegista xeerka saxaafadda uuna kala shaqeeyo xildhibaanada iyo saamileyda kale xaqiijinta in wax ka bedal lagu sameeyo dhammaan qodobada meel ka dhaca ku ah xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta iyo xaqiijinta in sharciga la waafajiyo heerarka caalamiga ah;
- Inuu taageero ka raadiyo deeq bixiyayaasha si dhaqaale loogu helo ololaha wacyigelinta bulshada ee ilaalinta xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta.

KU ADDAAN WASAARADDA HAWEENKA & HORMARINTA XUQUUQDA AADANAHA:

- Inay dhamaystiro dhisidda iyo hawgelinta Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha iyo xaqiijinta inuu u shaqeeyo si madax bannaan oo wax ku ool ah, isagoo la siinayo dhaqaalaha uu u baahan yahay si uu u baaro dhammaan eedeymaha ku aaddan handadaada, hanjabaadaha, weerarrada muuqda iyo dilalka loo geysto weriyayaasha iyo tacaddiyada kale ee xuquuqda aadanaha.

KU AADDAN BEESHA CAALAMKA, GAAR AHAAN QARAMADA MIDOOBAY, MIDOWGA YURUB IYO MIDOWGA AFRIKA:

- Inay si shaac baxsan uga hadlaan muhiimadda ay u leedahay xuquuqda aadanaha, gaar ahaan xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta nabadda Soomaaliya iyo hannaanka dal dhiska iyo inay ugu baaqaan dowladda Soomaaliya inay ku amarto mas'uuliyiinteeda in aanay handadaad ama hanjabaad u geysan weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta;
- Inay ugu baaqaan dowladda inay ixtiraamto, difaacdo, hormariso ayna fuliso xuquuqda xoriyadda hadalka ee ay leeyihiin weriyayaasha, dadka u ololeeya xuquuqda, mucaaradka siyaasadeed iyo ururada kale ee bulshada iyo madax bannaanida warbaahinta;
- Inay ku taageeraan ururada bulshada ee maxalliga ah, gaar ahaan kuwa u ololeeya madax bannaanida warbaahinta iyo ururada shaqaalaha fulinta kor joogteyn nidaamsan iyo ka warramidda tacaddiyada ka dhanka ah xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida warbaahinta ee guud ahaan dalka;
- Inay taageeraan dedaallada ay dowladda Soomaaliya isbedelka ugu samayneeso shuruucda iyo hay'adaha dalka si ay ula jaanqaadaan waajibaadka caalamiga ah ee Soomaaliya ka saaran xuquuqda aadanaha; iyo inay taageero farsamo ku bixiyaan dedaallada noocaasi ah;
- Inay taageeraan dedaallada ay dowladda Soomaaliya ku barayso booliska, shaqaalaha kale ee ammaanka, iyo saraakiisha maxkamadaha arimaha xuquuqda aadanaha iyo madax bannaanida warbaahinta;
- Inay sii wadaan taageeradooda ku aaddan waxyaabaha hormariya badqabka weriyayaasha Soomaaliya iyo inay cadaadis ku saaraan dowladda inay wax ka qabato la xisaabtan la'aanta dadka ku xadgudba weriyayaasha.

KU AADDAN AL-SHABAAB:

- Inay joojiyaan weerarrada ka dhanka shacabka, gaar ahaan kuwa sida tooska ah ay ugu beegsadaan weriyayaasha, weerarrada aan kala sooca lahayn ee ay u geystaan dadka rayidka ah iyo hantidooda iyo dhammaan xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada.

KU AADDAN FACEBOOK:

- Inuu si adag oo wax ku ool ah u baaro dhammaan edeymaha ku xusan warbixintan ee ku aaddan marin habaabinta ay dowladda Soomaaliyo iyo dadka kale ee metalaya ku sameeyaan Facebook;
- Inuu qaado tallaabooyin cad oo uu ku xaqiijinayo in aanay marin habaabin uga iman dowladda Soomaaliya, gaar ahaan xilli ay soo dhawyihiin doorashooyinka. Waxaa kamid ah inuu kordhiyo hannaanka baaritaanka xadgudubyada la soo wariyo ee ku aaddan Dhaqanka Bulshada ee Facebook. Waa in uu sidoo kale ka fekero saamaynta ay xiritaanka cinwaannada weriyayaasha Soomaalida ku leedahay helitaanka macluumaadka ee bulshada, maadaama cinwaannadaasi ay yihiin halka koobaad ee ay xogta ka helaan shacabka Soomaalida;
- Inuu shaqaaleysiiyo dad ku filan oo ula socda xogta luuqada Soomaaliga, si uu uga gaashaanto inay marin habaabiso dowladda. Inuu xaqiijo in dadkaasi u shaqeynaya ay ka madax bannaan yihiin faragelinta dowladda;
- Inuu sameeyo hannaan cad oo ay weriyayaasha iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha ee laga xiro cinwaannadooda racfaan uga qaadan karaan go'aanka, gaar ahaan in lagu wargeliyo sababta dhanta ah ee cinwaannada looga xiray.

KU AADDAN URURADA SUXUFIIYIINTA SOOMAALIYA:

- Inay sii wadaan dabagalka iyo ka warramidda xadgudubyada iyo tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha ee guud ahaan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya iyo Puntland;

- Inay ugu baaqaan dowladda Soomaaliya inay baaritaan ku samayso dhammaan tacaddiyada ka dhanka xuquuqda aadanaha iyo xadgudubyada loo geysto weriyayaasha ku sugan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya iyo Puntland;
- Inay sameeyaan dedaallo lagu wanaajinayo xirfadda weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta Soomaaliya iyagoo tababar loo fidinayo.

**AMNESTY INTERNATIONAL
WAA DHAQ-DHAQAAQ
CAALAMI AH OO U DOODA
XUQUUQDA AADANAHA.
MARKA UU CADAALAD HELO
HAL QOF, WAA MID MUHIIM
NOO AH DHAMMAANTEEN.**

NALA SOO XIRIIR



info@amnesty.org



+44 (0)20 7413 5500

KA QEYBGAL DOODDA



www.facebook.com/AmnestyGlobal



[@Amnesty](https://twitter.com/Amnesty)

“WAXAAN KU NOOLNAHAY CABSII

JOOGTA AH”

XADGUDUBYADA IYO TACADDIYADA LAGU HAYO XORIYADDA HADALKA EE SOOMAALIYA

Tan iyo dabayaaqadii 2017, madax bannaanida warbaahinta ee Soomaaliya ayaa waxaa caburin ku hayay laamaha ammaanka iyo mas’uuliyiinta dowladda Federaalka ee Soomaaliya, maamul goboleedyada iyo ururka Al-Shabaab. Warbixintan ayaa waxaa lagu diiwaangeliyay eedeymaha ku aaddan hanjabaadaha, dilalka, isku-dayga dil, xariga, handadaada iyo cagajugleynta lagula kaco weriyayaasha iyo dadka kale ee wax dhaliila iyo xayiraadda ku aaddan helitaanka xogta. Waxaa sidoo kale lagu diiwaangeliyay qaababka cusub ee ay mas’uuliyiinta u laaluushaan warbaahinta si ay isu faafreebaan – ujeedada laga leeyahayna ay tahay inay tebiyaan oo keliya wanaagga dowladda – handadaada dhanka online-ka ah iyo marin habaabinta xogta baraha bulshada.

Warbixinta ayaa ugu baaqaysa dowladda inay ixtiraamto, ilaaliso, hormaris, isla markaana fuliso xuquuqda xoriyadda dalka, madax bannaanida warbaahinta ka hor, inta ay socoto iyo kadib doorashada la filayo inay dhacdo 2021, gaar ahaan inay diyaariso jawi ammaan ah oo u sahlaya weriyayaasha iyo xirfadlayaasha kale ee warbaahinta inay ka warramaan arimaha xasaasiga ah iyo kuwa khuseeya danta shacabka.